Saint Paul Public Schools

# Buug–Gacmeedka Xuquuqda iyo Waajibaadka 2026-27

Loogu Talagalay Ardayda, Waaliddiinta, Masuuliyiinta iyo Shaqaalaha

















**Guddiga Waxbarashada:** Halla Henderson • Uriah Ward • Erica Valliant • Yusef Carrillo • Chauntyll Allen • Carlo Franco • Brandon Lowe

**Isu Duwaha Guud (Superintendent):** Dr. Stacie Stanley

# Horudhac

Buug–gacmeedkani waxa uu tilmaame u yahay habdhaqanka ardayga. Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxa ay sameeyaan oo ay meelmariyaan xeerarka lagu hagayo ficillada qofwalba ee jooga degmada. Kormeeraha Guud waxa uu soo saaraa habraacyada lagu tuso sida xeerarkani looga dhaqangelin doono gudaha SPPS. Maamulayaasha iyo horjoogayaasha barnaamijyada ayaa markaa ka dib ku sii kordhin kara tilmaamo dheeraad ah oo lagama maarmaan u ah ardaydooda, shaqaalahooda iyo bulshadooda. Macallimiinta iyo shaqaalaha kale waxa ay markaa ka dib kala shaqeeyaan ardayda dajinta iyo raacitaanka waxyaabaha laga filayo ee sida ay wadajir ugu wada shaqeyn doonaan fasalka dhexdiisa. Xubnaha waaweyn ee ka tirsan shaqaalaha waxaa looga fadhiyaa habdhaqan heer sare ah waxa ayna hoos yimaadaan sharciyada lagu dabaqi karo, siyaasadaha Guddiga Waxbarashada, iyo xeerarka iyo dhaqamada Maamulka Shaqaalaha.

Tilmaamaha iyo xeerarka ku saabsan habdhaqanka iyo anshaxa ardayga ee ku jira buug–gacmeedkan waxa ay fulinayaan siyaasadaha Guddiga Waxbarashada sida lagu sheegay Xeerarka Guddiga SPPS ee 506.00, 506.02 iyo 506.03., iyo Minn. Stat. § 121A.55(a).

**Buug–gacmeedka waxa uu khuseeyaa habdhaqanka ka dhaca:**

1. Dhismaha dugsiga, gaadiidka dugsiga ee ay degmadu bixiso, ama goobaha loo qoondeeyey ardayda inay ku sugaan gaadiidka dugsiga ee ay degmadu bixiso.
2. Inta lagu jiro barnaamij walba, hawl, dhacdo ama safar uu maalgaliyey ama fasaxay dugsiga.
3. Isticmaalka kumbiyuutarada dugsiga, tiknoolajiyada elektaroonigga ah,shabakadaha khadka, shirarka, ama liisaska boostada.
4. Isticmaalka tiknoolajiyada elektaroonigga ee ka baxsan dhismayaasha dugsiga oo maadi ahaan iyo awood ahaan u carqaladeeya waxbarashada ardayga ama deegaanka dugsiga.
5. Buug-gacmeedkan ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu quseeyo dhacdooyinka ku lug leh ardayda SPPS haddii xiriir aan la ansixin ama arrin lala xiriirinayo degmada SPPS ama shaqaalaheeda si cad ama si dadban loo xusay ama laga fahmaay dhacdooyinka (tusaale ahaan, ciyaar-xumada halista ah ee la dhaho hazing).

Haddii aad ka qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan wax walba oo aad halkan ka akhriso, fadlan la xariir macalinka ama maamulaha canugaada. Si aad buug–gacmeedka oo dhan ooga eegto onlaynka, booqo spps.org/rights_and_responsibilities.

Si aad u ogaato tilmaamaha lagu taliyey ee loogu talagalay bedqabka baska, tixraac tusmada ku taalla bogga 32–aad.

Haddii aad u baahan tahay nuqul qaab kale ah, sida far waaweyn, cod duuban, ama qaab kale oo ku habboon, waad codsan kartaa. Fadlan la xiriir Xafiiska Isgaarsiinta adigoo wacaya 651-767-8100. Si aad u aragto qorshaha degmada ee adeegyada luqadaha, fadlan booqo booqo bogga Language Access Plan

Haddii aad jeclaan lahayd inaad heshid macluumaadkan oo luuqad kale ah, fadlan la xiriir iskuulkaaga.

# Miiska Mawduucyada


Horudhac 1

Miiska Mawduucyada 2

Waajibaadka la Wadaago 6

Dhaqanka Dugsiga ee Wanaagsan 7

Xuquuqda iyo Waajibaadka Ardayga 9

Heerarka Habdhaqanka Ardayga 17

Heerarka Xadgudubyada Habdhaqanka 19

Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista Maamuulka 22

Telefoonnada Gacanta & Qalabka Korontada ee Shakhsi ahaaneed - Ku Xadgudub 23

Hannaanka Anshaxa 31

Hannaanka Anshaxa: Ardayda Naafada ah 34

Tilmaamaha Ammaanka Baska ee Saint Paul Public Schools 37

Tilmaamaha loogu talagalay iPad–yada iyo Qalabyada Lumay / La Xaday/ Waxyeeloobay Dulmarka Guud ee Buug–gacmeedka iPad–ka 39

Qaamuuska Ereyo Bixinta 41

Lifaaqqa I'aad - Siyaasadaha Guddiga Waxbarashada 54

Lifaaqqa III'aad - Habraaca Cabashada Anshaxa (SPPS Procedure 506.00.01) 78

Khayraadka iyo Kaalmada 79

Qiimaynta Gobolka oo dhan: Go'aanka Waalidka/Masuulka ee ah in aanu ka qayb galin 79

Qoysaska Mudnaanta leh ee Saint Paul Public Schools,

Anigoo u hadlaya Guddiga Waxbarashada, waxaad ku mahadsan tahay in aad dooratay Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul. Aad baanu ugu faraxsanahay inaan ardaydeena dib ugu soo dhaweyno sannad-dugsiyeedka 2026-27. Dhammaanteen waxaa naga go'an inaan siinno ilmahaaga deegaan ammaan ah oo soo dhaweyn leh si ay u helaan waxbarashada ugu wanaagan intii macquul ah. Waxaan ka mahadcelineynaa kalsoonida aad nagu qabtid, waxaana maalin walba ka shaqeyn doonnaa sidii aan u kasban lahayn oo aan u ilaalin lahayn kalsoonidaas.

Waxaan ka helnay waalidiinta iyo shaqaalaha talooyin muujinaya in loo baahan yahay in dad badan lagu wacyigeliyo buuggan, in si cad loo sharxo waxa laga filayo hab-dhaqanka ardayda, iyo in dhammaan dugsiyada si isku mid ah uga jawaabaan marka xeerarka la jebiyo. Waxaa naga go'an inaan sii wadno tababarrada iyo wada-hadallada aan la yeelaneyno maamulayaasha, shaqaalaha, ardayda, iyo qoysaska si aan u abuurno dugsiyo leh jawi wanaagsan oo arday kasta uu dareemo inuu ka tirsan yahay.

Fadlan kala hadal ardaygaaga dukumeentigan muhiimka ah. Waxaa jira xuquuqo loo dammaanad qaaday ardayda marka ay iskoolka joogaan iyo sidoo kale waxaa jiro mas'uuliyado la socda xuquuqahaas. Labadaba waxa lagu soo koobay buugyarahan. Intaa waxaa sii dheer, dukumeentigani wuxuu qeexayaa shaqada ay SPPS qabanayso si ay u dhisto hab-dhaqan iskool oo wanaagsan iyo in ardayda lagula xisaabtamo hab-dhaqanka aan habboonayn.

Waad ku mahadsan tahay taageerada aad nala garab taagan tahay si aan u dhisno dugsiyo ay arday kastaa ku dareemaan in la arko, la taageero, lana qiimeeyo.

Waxaan adiga iyo qoyskaagaba idiin rajaynayaa sannad wanaagsan oo aad ku qaadataan waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul.

Wadashaqeyn wacan,

Dr. Stacie Stanley,
Isu Duwaha Guud (Superintendent)

# Waajibaadka la Wadaago

## Kor u Qaadidda Ixtiraamka, Waajibaadka iyo Bedqabka

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxa ay ku dadaalayaan inay dhammaan ardayda u abuuraan goob bedqabta oo soo dhaweyn leh. Dhammaanteen waxaan gacan ka geysaneynaa abuurista deegaan waxbarasho oo wanaagsan oo ixtiraam leh. Iyadoo qaabka uu u wajahayo dugsi walba laga yaabo inay faahfaahin ahaan u kala duwan yihiin, jaantuuska hoose waxa uu bixinayaa soo koobista waajibaadka aan wadaagno si aan u abuurno dhaqan dugsi iyo degmo oo wanaagsan:

| | Ardayda | Waaliddiinta/Dadka Masuulka ah | Dhammaan Shaqaalaha SPPS |
|---|---|---|---|
| **Aaminsanaanta** | Aamin inaad awood u leedahay inaad nafsi ahaantaada ugu wanaagsanaato, aad gaarto riyooyinkaaga oo aad adduunka wax kabadasho. | Aamin ilmahaada inay awood u leeyihiin inay nafsi ahaantooda ugu wanaagsanaadaan, ay gaaraan riyooyinkooda oo ayna adduunka wax ka beddalaan. | Aamin shaqaalaha inay awood u leeyihiin inay ardayda ku taageeraan sida ugu wanaagsan naftooda, ay gaaraan riyooyinkooda oo ayna adduunka wax ka beddalaan. |
| **Cilaaqaadka Wanaagsan** | Dhis, joogtee oo dib u hagaaji cilaaqaad wanaagsan oo aad la yeelato dhammaan shaqaalaha. Dooro qof weyn oo aad ku kalsoon tahay oo aad ula tagto su'aalaha iyo walaacyada aad qabto. | Dhis, joogtee oo dib u hagaaji cilaaqaad wanaagsan oo aad la yeelato dhammaan shaqaalaha jooga iskuulka. | Dhis, joogtee oo dib u hagaaji cilaaqaad wanaagsan oo aad la yeelato dhammaan ardayda iyo qoysaskooda. |
| **Ixtiraamka** | Ixtiraam naftaada, deegaanka waxbarashada, ardayda kale, waaliddiintooda/dadka masuulka ka ah, qoysaskooda iyo dhammaan shaqaalaha. | Ixtiraam oo taageero kageyso deegaanka waxbarashada oo xoogga saar muhiimada ay leedahay inaad xushmad muujisid gudaha iskuulka. | Samee bulsho waxbarata iyo deegaan ixtiraamaya oo gacan ka geysanaya guulaha dareenka–bulshada iyo tacliinta. |
| **Taageerada** | Codso oo aqbal caawinta marki aad u baahato in lagu caawiyo. | Codsi caawin marki aad u baahato in lagu caawiyo. U dood ilmahaaga adiga oo si joogta ah ula xariiraya shaqaalaha iskuulka. | Si joogta ah ula xariir ardayda iyo qoysaska. Caawi marka ay codsadaan in la caawiyo. |
| **Soo xaadiritaanka** | Soo xaadir fasalka maalin walba wakhtigii loogu talagalay, diyaar u noqo inaad waxbarato oo sii dadaalkaaga ugu wanaagsan. | Xaqiiji in canugaada uu maalin walba iskuulka yimaado wakhtigii loogu talagalay oo uuna u diyaarsan yahay inuu waxbarto. | Diyaari jawi soo dhaweyn leh. Rajo sare ka filo ardayda oo dhan. |
| **Filashooyinka iyo Nidaamyada** | Baro oo raac filashooyinka iyo nidaamyada iskuulka. | Baro oo kala hadal ilmahaada wixii ku saabsan filashooyinka iyo nidaamyada ka jira iskuulkooda. | Bar, tusaalee oo xooji filashooyinka iyo nidaamyada iskuulka. Raac qorshaha anshaxa ee iskuulka dhan kajira. |
| **Isticmaalka Tiknoolajiyada** | U isticmaal tiknoolajiyada iyo qalabka si masuuliyad leh. | Dib u eeg heshiiska tiknoolajiyada ee ilmahaaga. | U qaabee waxbarashada loogu talagalay codka iyo dookha ardayga gudaha deegaan waxbarasho oo hodan ku ah tiknoolajiyada. Bar ardayda oo dib u eeg isticmaalka habboon ee tignoolajiyada. |
| **Baro** | Si shakhsi ahaaneed u diyaarso waxbarashadaada adiga oo hal–abuurkaaga u keenaya shaqadaada. | Ku dhiirigeli xamaasadda dareenka ilmahaada si uu wax u barto oo uu ugu kobco xagga hadafyadooda kuleejka iyo shaqada. | Sii tilmaamo si shakhsi ahaaneed ugu diyaarsan, oga qeybgalinaya oo tacliin ahaana ku habboon, oo ay ku jiraan wax barid dhaqan ahaan wax oga jawaabeysa oo matasha oona casuumeysa aqoonsiga ardayda. |
| **Bedqabka** | Nafsi ahaantaada u dhaqan hab xaqiijinaya bedqabkaaga iyo bedqabka dadka kale. | La xariir iskuulka canugaada haddii aad aragto ama aad ka warqabto hawlo ama xaalado aan bedqab ahayn oo suuragal ah. | Xaalado bedqab leh samee oo la saco iskuulka dhexdiisa. Si firfircoon u kormeer dhammaan aagagga ardaydu joogto. |

## Dhaqanka Dugsiga ee Wanaagsan

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxa ay aqoonsan yihiin muhiimada ay leedahay dhaqanka dugsiga ee wanaagsan iyo siinta taageero tayo leh ardayda iyo shaqaalaha guud ahaan degmada oo dhan. Marka lagu daro maamulayaasha, macallimiinta, iyo shaqaalaha kale ee iskuulka, shaqaalaha bulshada ee iskuulka, lataliyayaasha, khuburada cilmi nafsiga, iyo kalkaaliyayaasha caafimaadku waxay bixiyaan hagitaan ay ku taageerayaan ardayda oo ayna ooga saarayaan waxyaabaha caqabada ku ah waxbarashada. Dhaqanka degmada iyo iskuulka oo wanaagsan waxa uu muhiim u yahay SPPS inay ku dhiirigeliyaan dhammaan ardayda inay si xoogan maankooda ooga shaqeysiiyaan, raacaan riyooyinkooda oo ayna wax ka beddalaan caalamka. Waxaa hoos ku qoran qaabka wajihitaanka firfircoon ee loo adeegsado in lagu abuuro deegaan soo dhaweyn iyo dhaqan wanaagsan leh.

### Wax-ka-qabashada iyo Taageerooyinka Habdhaqanka Wanaagsan (PBIS): Qaabdhismeedka loogu Talagalay Dhammaan Dugsiyada oo Dhan

Waxqabadyada iyo Taageerada Dhaqanka Wanaagsan (PBIS) waa hab waxbarasho, ka hortag, iyo soo celin ah hab dhaqanka wanaagsan. Habkani wuxuu caawiyaa dugsiyada inay abuuraan oo ay joogteeyaan jawi wax ku ool ah iyo dhaqan loo siman yahay fasalka oo taageero guusha waxbarashada iyo heerka bulsho ee dhammaan ardayda. Dhammaan Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay isticmaalaan PBIS si ay dhammaan ardayda u baraan waxa la iska filayo dugsiyada oo dhan iyo in la aqoonsado ardayda ka buuxiso sameynta waxyaabaha laga filayo. Koox yar iyo taageerooyin gaar ah ayaa sidoo kale lagu bixiyaa qaabkan.

Dugsi walba dhexdiisa, nidaamyada iyo dhaqamada soo socdo ayaa aasaas u ah hirgelinta PBIS:

- Dugsi walba waxa uu sameystaa waxyaabaha laga filayo iskuulka oo dhan oo cad oo joogta ah oo kor u qaada habdhaqanka wanaagsan. Filashooyinkani, kuwaas oo ka tarjuma bulshada dugsiga, qiimaha iyo dhaqanka, ayaa lagu qeexaa, lagu baraa, lagu tusaaleeyaa, lagu xoojiyaa oo (marki loo baahdo) dib loogu baraa.
- Dugsiyadu waxa ay ururiyaan oo ay isticmaalaan xogta (ardayga iyo shaqaalaha) si ay ugu hagaan sida ay u barayaan oo ay u xoojinayaan waxyaabaha laga filayo ardayda gaarka ah, kooxaha ardayda, fasallada oo dhan iyo guud ahaan iskuulka. Xogta waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu aqoonsado ardayda u baahan taageero dheeraad ah oona lagu waafajiyo wax kaqabadyada iyo taageerada.
- Dugsi walba waxa uu si joogta ah u hagaajiyaa nidaamyadiisa iyo dhaqamadiisa hadba sida ay baahiyuhu isu beddalaan. Hadafku waxa uu yahay in natiijooyin habdhaqan, bulsho, iyo tacliin ahaan u wanaagsan oo loo siman yahay lagu siiyo dhammaan ardayda.

Dugsi walba waxa uu nakhshadeystaa nidaamkiisa wajiyada saddex–geesoodka ah:

- **Wajiga 1–aad:** ***Dhammaan*** ardayda habdhaqanka laga filayo waxa ay ku bartaan iskuulka. Xubnaha ka tirsan shaqaalaha waxa ay baraan, ku tusaaleeyaan oo ay xoojiyaan waxyaabahaan laga filayo sannad-dugsiyeedka oo dhan.
- **Wajiga 2–aad:** Ardayda ***qaarkood*** waxa ay helaan wax ka qabashooyin kooxo yaryar ah si ugu dhaqmaan habdhaqanki lagu soo baray Wajiga 1–aad.
- **Wajiga 3–aad:** Arday ***yar ayaa*** hela wax ka qabashooyin iyo taageero shakhsi ahaan ah.

Waji walba, ardaydu waxa ay bartaan oo ay ku dhaqmaan xirfadaha dareenka bulshada iyo habdhaqanka ee ay u baahan yihiin inay wax fiican ooga qabtaan iskuulka iyo inta ay nool yihiin oo dhan. Taageerooyinka lagu siiyo waji walba waxa ay ku lug leeyihiin dhaqamada is–dhexgalka iyo toosinta, barnaamijyada iyo taageerooyinka hoos ku qoran. Waxbadan ka ogow **spps.org/pbis**.

## Dhaqamada Dib U soo Celinta

Dhaqamada Dib U soo Celinta waa dariiqooyinka bulshada dugsiga ay ku dhistaan cilaaqaadka, xalinta mashaakilaadka oo ayna si wadajir ah wax ugu wada bartaan. Habkan, cilaaqaadku waa dariiqa ugu muhiimsan ee aan ku barano adduunka iyo anaga nafteena. Goobaha qaarkood waxa ay iskuulka oo dhan ka hirgelinayaan Dhaqamada Dib U soo Celinta si ay dariiq wax ku ool ah bulshada ula dhisaan saamileyda iyo inay isticmaalaan hababka dib u soo celinta si loogu shaafiyo dhaawaca, marki loo baahdo. Dugsiga Dhaqanka Dib U soo Celinta iyo bulshadu waxa ay aaminsan yihiin:

- Qof walba oo ka mid ah bulshada dugsiga waa qof wanaagsan, caqli badan, oo awood leh.
- Dhammaanteena waan isku wada xiranahay.
- Dhammaanteena waxaanu rabnaa inaan xiriir wanaagsan, oo caafimaad leh la yeelano dadka kale.
- Dhammaanteenu waxaanu leenahay hal–abuur iyo hibooyin aan ku soo biirino iskuulka.
- Waxa ay qaadataa wakhti, dhaqamo iyo taageero in la dhiso oo la ilaaliyo xiriir wanaagsan.

Marka laga soo tago goobaha Dhaqanka Dib U soo Celinta, iskuullo badan waxa ay doonayaan inay isticmaalaan hababka dib u soo celinta. Waxbadan ka ogow **spps.org/restorativepractices**.

## Barashada Dareenka Bulshonimo

Barashada Dareenka Bulshonimo waa sida ilmaha iyo dadka waaweyn ay u bartaan sida loo maareeyo dareenka shucuurta, loo hiigsado oo lagu gaaro yoolalka wanaagsan, loogu damqado oo loogu muujiyo naxariis dadka kale, loo dhiso oo loo ilaaliyo xiriirka wanaagsan, iyo qaadashada go'aannada mas'uuliyadda leh. Waaxyaha guud ahaan degmada waxa ay si iskaashi leh ooga wada shaqeeyaan inay taageeraan barashada dareenka bulshonimo. Dugsigu waxa uu dooran karaa inuu dhaqangeliyo barnaamij(yo) gaar ah oo Barashada Dareenka Bulshonimo ah si uu ugu taageero guusha tacliinta iyo bulshada. Wax badan ka ogow **spps.org/schoolsupport**.

## Caafimaadka Dhimirka iyo Fayo–Qabka

Caafimaadka Maskaxda iyo Fayo–Qabka waxaa loola jeedaa joogteynta taageerada dareenka shucuurta ee loo helayo ardayda iyo shaqaalaha. Taageerooyinkani waxa ay xoogga saarayaan sameynta deegaan waxbarasho oo **bedqaba,** kordhinta **iskaashiga** ka dhexeeya ardayda iyo dadka waaweyn, **dookh–siinta** ardayda, sameynta cilaaqaad **is–aaminaad** leh, iyo u awood–siinta ardayda inay inti karaankooda ah sameeyaan. Wax badan ka ogow **spps.org/schoolsupport**.

## Xuquuqda iyo Waajibaadka Ardayga

Ardayda dhigata SPPS waxa ay leeyihiin xuquuq iyo fursado. Ardayda waxaa sidoo kale waajibaad ka saaran macallimiinta, shaqaalaha kale iyo ardayda kale. Ardaydu waxa ay leeyihiin xuquuqo kale ee uu u damaanad qaadayo Dastuurka iyo sharciyada gobolka iyo deegaanka. Xuquuqda iyo waajibaadka kooban ee ku jira ma ahan mid ay waxwalba ku dhan yihiin mana soo koobeyso xaalad walba oo laga yaabo inay soo baxdo. Qeybtani waxa ay qeexeysaa xuquuqaha, fursadaha iyo waajibaadka ardayga ee SPPS.

### Helitaanka Diiwaanada

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Waaliddiinta/dadka masuulka ka ah ardayda iyo ardayda u qalma sida ku cad xeerka dawladda dhexe guud ahaan waxa ay xaq u leeyihiin inay arkaan diiwaannadooda islkuulka sida waafaqsan shuruucda gobolka iyo kuwa dawladda dhexe.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin asturidda diiwaannadooda iskuulka. Shaacin walba ee xogta diiwaanada ardayga waxa ay waafaqsanaan doontaa sida uu farayo sharciga iyo xeerarka u dagsan degmada dugsiga.

**Waajibaadka**

- Ardayda xaqa u leh waxaa waajib ka saaran yahay raacitaanka habraacyada dhismaha iyo degmada ee loo dajiyey helitaanka diiwaannadooda iskuulka.

### Imaanshaha iyo Daahitaanka

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Maqnaanshaha ama daahitaanka ardayda oo ay sabab u tahay ciidaha iyo ku dhaqanka diinta waa in maqnaansho ama daahitaan cudur–daar leh loogu diiwaangeliyo codsiga qoraalka ah ee waalidka/qofka masuulka ka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, Xeerka Guddiga 503.00 ka eeg **spps.org/board-policies**.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa laga filayaa inay ku jiraan fasalka. Ardaydu waxay mas'uul ka yihiin inay raacaan nidaamka iskoolka, tusaale ahaan kaarka lagu maro hoolwayga iskoolka oo laga soo qaato qof shaqaale ah marka uu ardaygu ka soo daaho fasalka ama haddii ay jirto baahi loo qabo in laga baxo fasalka.
- Ardayda iyo waaliddiinta/dadka masuulka ka ah waxaa waajib ka saaran inay u hoggaansamaan xeerarka iyo habraacyada u dagsan imaanshaha iyo daahitaanka ee iskuulka.
- Ardayda iyo waaliddiinta/dadka masuulka ka ah waxaa waajib ka saaran inay ku soo wargeliyaan iskuulka (tusaale, farriin qoraal ah, wicitaan taleefan) ka hor maqnaansho ama marka lagu soo laabanayo iskuulka ka dib maqnaansho.
- Ardayda iyo waaliddiinta/dadka masuulka ka ah waxaa waajib ka saaran inay ku soo wargeliyaan iskuulka haddii ay qasab tahay ardayga inuu ka soo tago iskuulka inta lagu jiro wakhtiga iskuulka. Wixii macluumaad dheeraad ah, Xeerka Guddiga 503.03 ka eeg **spps.org/board-policies**.

### Taleefannada Gacanta & Aaladaha Korontada ee Shaqsiga ah

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in ay haystaan taleefan gacanta ama aalad koronto oo shaqsi ah, balse waa in aan la isticmaalin inta lagu jiro maalinta dugsiga.
- Ardayda leh xaalado gaar ah, sida ku qeexan siyaasadda, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo hab waafaqsan oo oggolaan ah.
- Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxaa laga codsanayaa in ay la xiriiraan ardayda iyagoo wacaya xafiiska dugsiga. Wixii faahfaahin dheeraad ah eeg Siyaasadda Guddiga 550.00 ee ku jirta **spps.org/board-policies**.

**Waajibaadka**

- Ardaydu waxay waajib ku tahay in ay raacaan siyaasadda guddiga iyo habraacyada gaarka ah ee dugsigooda ee la xiriira isticmaalka taleefannada gacanta iyo aaladaha korontada ee shaqsiga ah.
- Dugsiyadu waxay mas'uul ka yihiin in ay ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta si cad ugu sheegaan waxa laga filayo isticmaalka aaladahan iyo nidaamka uu dugsigu raaco.
- Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxaa laga codsanayaa in ay xaddidaan wicitaanka/dirista farriimaha qoraalka ah ee ciyaalkooga inta lagu jiro maalinta dugsiga maadaama ay arrintaasi carqaladeyn karto.

## Fursad Siman

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardayda waxa ay xaq u leeyihiin fursad siman, sida uu u oggol yahay sharciga, inay ka qeybqaataan dhammaan waxqabadyada iskuulka iyo barnaamijyada waxbarashada iskuulka ee ay xaqa u leeyihiin.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran u hoggaansanaanta xeerarka iyo nidaamyada u dagsan hawlaha uu soo qabanqaabiyo iskuulka kuwaas oo iyaga, ama arday kale, ay ka qeybgalayaan. Ardaydu ma niyad jebin karaan, ma dib dhigi karaan ama ma horjoogsan karaan ka qaybgalka ardayda kale.

## Ula Dhaqanka si Caddaalad ah

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin nidaamka sharciga, sida ku qeexan Sharciga Cayrinta Ardayga ee Minnesota, marka uu ku lug yeesho ku xadgudubka sharciyada degmada. Waxaa ka mid ah fursad lagu dhageysto nooca xadgudubka iyo inay dhankooda ka war bixiyaan xaaladda.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo dhammaan sharciyada u dagsan fasalka iyo iskuulka, waxyaabaha laga filayo iyo habraacyada.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay si ixtiraam leh ula dhaqmaan shaqaalaha degmada iyo ardayda kale.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay xor ka ahaadaan taabashada jireed ee aan macquul–galka ahayn ee shaqaalaha iyo ardayda kale. Hayeeshee awoodda macquulka ah ee shaqaaluhu ay ku xakameynayaan ama ku saxayaan ardayga inuusan naftiisa ama dadka kale wax u geysan waa la oggol yahay.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ka jawaabaan dhammaan tilmaamaha ama su'aalaha shaqaalaha iyo raacitaanka dhammaan sharciyada, siyaasadaha, xeerarka iyo waxyaabaha laga filayo ee iyaga khuseeya.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ogaadaan oo ay raacaan dhammaan xeerarka fasalka ee khuseeya, waxyaabaha laga filayo, iyo nidaamyada.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay si ixtiraam leh ula dhaqmaan dhammaan dadka.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ixtiraamaan goobta iyo xorriyada dadka la joogo.
- Ardayda waxaa laga filayaa inay si masuuliyadi ku jirto ula dhaqmaan hantida dadka kale iyo degmada.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ka fogaadaan adeegsiga xoog ama gacan ka hadal si ay qof kale wax u gaarsiiyaan.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inaysan ku lug yeelanin dhaqan jir ahaan iyo maskax ahaan khatar ku ah naftooda, dad kale ama hanti.

## Xorriyadda Hadalka iyo Muujinta Aragtida

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin xorriyadda hadalka iyada oo la raacayo xaddidaadyo Dastuuri ah oo gaar ah.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran aragti cabiridda, daabicidda waxyaabaha qoran iyo tirinta suugaanta oo aan ahayn hab sumcad–dil ah, fuxshi, takoor ama galmo cad, taas oo aanan ku jirin wax tixraacayo khamri, sun, tubaako, ama badeecooyinka kale ee sharci darrada ah inay isticmaalaan carruurta; taas oo aanan faragalin ku sameyneynin xuquuqda dadka kale; oo aanan maadi ahaan iyo baaxad ahaan u carqaladeynenin jawiga waxbarashada iskuulka; oo raacaya sharciyada iyo habraacyada iskuulka ee ku saabsan wakhtiga, goobta iyo habka.
- Oggolaanshaha maamulaha iskuulka ayaa looga baahan yahay qeybinta ama soo dhigidda waxyaabaha qoraalka ah.

## Aqoonsiga Jinsiga

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardayda waxa ay xaq u leeyihiin in lagu aqoonsado magaca ama magac u yaalka iyo jinsiga ay rabaan ee ku cad diiwaanada iskuulka, meelaha waxbarashada, xarumaha, iyo waxqabadayada ka baxsan manhajka ee waafaqsan Xeerka iyo Habraacyada Guddiga. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg Xeerka Guddiga 500.00 iyo habraaca 500.00.01 barta **spps.org/board-policies.**

**Waajibaadka**

- Ardaydu waa inay la xariiraan shaqaalaha iskuulka haddii diiwaanada iskuulkooda aysan ka tarjumeynin magacooda, magac u yaalka, iyo/ama aqoonsiga jinsigooda ee ay doorbidayaan.
- Wax kabaddelka magaca ka diiwaangashan iskuulka iyo/ama jinsiga ee la xariira aqoonsiga jinsiga ee lab ama dhedig waxa ay u baahan tahay in cusbooneysiinta loo gudbiyo xafiiska meeleynta si waafaqsan habraaca Guddiga.

## Waxbarashada iyo Shaqada Tacliinta

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardayda u qalma ee deegaanka dagan waxa ay xaq u leeyihiin waxbarashada dadweynaha ee lacag la'aanta ah sida uu qabo sharciga gobolka iyo dawladda dhexe.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay iskuulka dhigtaan oo ay wax bartaan sida sharcigu dhigayo. Dhigashada iskuul gaar ah waa mudnaan, ee ma ahan xuquuq. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 120A.36 barta **revisor.mn.gov/statutes**.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay ka dhigtaan iskuulka deegaan bedqaba oo xor ka ah akhlaaq xumada dadka kale. Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay la kulmaan fursadaha waxbarashada ee ka tarjumaya waaya–aragnimada dhaqankooda si aan cunsuriyad ku jirin, aanan lahayn eexasho jinsi, hab jinsi ahaan iyo naafo ahaan caddaalad ah. Wixii xog dheeraad ah ka eeg Xeerka Guddiga 602.01 barta **spps.org/board-policies**.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay dib ka dhammeystiraan shaqadi iskuulka ee dhaaftay inti lagu jiray maqnaansho cudurdaar lahaa.
- Marka la maqnaado muddo dheeraad ah oo ay keentay arrin caafimaad, ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin waxbarashada lagama maarmaanka ah ee guriga/isbitaalka sida ay dhigayaan habraacyada gobolka.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay maalin walba yimaadaan, ku dhammeystiraan layliyada fasalka wakhtigii loogu talagalay, iyo inay la yimaadan agabka ku habboon ee looga baahan yahay in lagu isticmaalo fasalka.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay u dhaqmaan hab taageeraya waxbarashada ardayda oo dhan, oo aanan khatar ama halis dhab ah ku keeneynin naftooda ama kuwa kale, oo aanan carqaladeyneynin hannaanka waxbarashada ee ardayda kale.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ixtiraamaan khibradaha dhaqameed ee ay la wadaagaan asxaabtooda.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay raadiyaan oo ay soo dhammeystiraan shaqadi dhaaftay ee la diray inti ay maqnaayeen.

## Daawooyinka

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardayda waxa ay xaq u leeyihiin inay daawooyin qaataan iyo habraacyada caafimaadka oo ay tahay in lagu siiyo inta lagu jiro wakhtiga maalinta iskuulka si uu ardaygu u dhigto iskuulka si waafaqsan Xeerka iyo habraaca Guddiga. Wixii xog dheeraad ah ka eeg Xeerka Guddiga 516.00 barta **spps.org/board-policies**.

**Waajibaadka**

- Qoysaska waxaa waajib ka saaran inay kala xariiraan kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka ama shaqaalaha kale ee iskuulka wixii ku saabsan wax ka beddelka daawooyinka ama habraacyada caafimaadka marka ay qasab tahay in lagu siiyo inta lagu jiro wakhtiga maalinta ee iskuulka.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay kala shaqeeyaan shaqaalaha iskuulka wixii ku saabsan daawooyinka iyo habraacyada caafimaadka ee lagu siinayo inta lagu jiro wakhtiga maalinta ee iskuulka.

## Deegaan Takoor La'aan ah/Xor ka ah Cagajugleynta

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardayda waxa ay xaq u leeyihiin inay wax ku bartaan deegaan xor ka ah takoorka, cagajugleynta iyo shaqaaqada ku saleysan isirka qofka, caqiidada, jinsiga lab ama dhedig, xaalada guurka, wadanka uu ka soo jeedo, da'da, midabka, diinta, heerka qoysnimo, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada ama la–hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat.§ 363A.03. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg qodobada Xeerka Guddiga 101.00 & 102.00, Xeerka Guddiga 415.00 iyo Xeerka Guddiga 500.00 barta **spps.org/board-policies**.
- Ardayda waxa ay xaq u leeyihiin in aanan laga aargoosan marka ay si daacad ah u sheegaan warbixinnada ku saabsan takoorka, dhibaateynta, ama shaqaaqada.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay si ixtiraam leh ula dhaqmaan ardayda kale iyo shaqaalaha degmada oo ah hab aanan takooreynin ama shakhsi u geysaneynin dhibaato ku saleysan dabaqadda dadka la ilaaliyo.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay u soo sheegaan shaqaalaha (sida macalinka ama maamulaha) dhacdooyinka la xariira u xoog–sheegashada, takoorka, dhibaateynta, shaqaaqada ama aargoosi loo geystay ama ay ka warqabaan.

## Hantida Gaarka ah iyo Qarsoonaanta

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay guud ahaan xaq u leeyihiin qarsoonaanta shakhsi ahaantooda, iyo hantidooda gaarka ah ee taala dhismaha degmada dugsiga iyo dhacdooyinka uu qabanqaabiyo ama la xariiro iskuulka.
- Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan hantida uu leeyahay iskuulka (tusaale ahaan, miisaska qaanadaha leh, miisaska, iPad–yada) inay ku keydsadaan sheeyaasha ku habboon ee hantida gaarka ah iyadoo la fahamsan yahay in dhammaan hantida uu leeyahay iskuulka ay si gaar ah gacanta ugu hayaan degmada dugsiga oo ayna maamulka iskuulka u baari karaan sabab walba, wakhti walba, iyaga oo aan u baahneyn fasax, oggolaansho ama amar lagu baaro. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.72, subd. 1 barta **revisor.mn.gov/statutes/**. Wixii faahfaahin dheeraad ah, eeg Siyaasadda Guddiga 501.02 iyo Siyaasadda Guddiga 506.06 ee ku yaal **spps.org/board-policies.**

**Waajibaadka**

- Ardaydu waa inaysan keenin dhismaha dugsiga degmada, ama dhacdooyinka uu qabanqaabiyo ama la xariiro iskuulka, wax shey ah ama agab xadgudub ku ah Xeerka u dagsan dugsiga degmada, xeerarka iskuulka, ama sharciga gobolka ama dawladda dhexe, ama wixii u keeni kara, ama u muuqda inay u keenayaan, carqalad ama khatar galinaya caafimaadka ama bedqabka ardayda ama dadka kale. Sheeyaasha la mamnuucay waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn, alaabta lasoo xaday, hubka iyo wixii hub u eg, iyo sheeyaasha kale ee sharci darrada ah.
- Marka uu jiro shaki macquul ah oo lagu rumeysto in arday uu haysto sheeyaasha la mamnuucay ama baaritaan uu daaha ka qaadayo caddeynta ku xadgudubka xeerka ama sharciga iskuulka, masuuliyiinta iskuulka waxa ay baaritaan macquul ah ku sameyn karaan qofka ardayga ah ama waxyaabaha uu leeyahay.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay sanduuqyada qaanadaha leh/miisaska ku xafidaan xaalad wanaagsan oo ayna ka ilaaliyaan shey walba oo sharci darro ah ama la mamnuucay.
- Waxyaabaha gaarka ah ee ay ardaydu leeyihiin ee ku dhex jira sanduuqyada qaanadaha leh waxaa kaliya la baari karaa marka masuuliyiinta iskuulka ay qabaan shaki macquul ah oo baaritaanka uu daaha kaga qaadayo caddeynta ku xadgudubka sharciga ama xeerarka iskuulka. Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib baaritaanka waxyaabaha gaarka uu u leeyahay ee ardayga, masuuliyiinta iskuulka waa inay siiyaan ogeysiiska baaritaanka ardayda qaanadaha sanduuqyadooda la baaray marka laga reebo in shaacinta ay carqalad ku yeelan karto baaritaan socday oo ay wadeen saraakiisha booliska ama masuuliyiinta iskuulka. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.72, subd. 1 barta **revisor.mn.gov/statutes**/. Wixii faahfaahin dheeraad ah, eeg Siyaasadda Guddiga 501.02 iyo Siyaasadda Guddiga 506.06 ee ku yaal **spps.org/board-policies**.

## Ballanqaadka Daacadnimada

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Sharciga Minnesota waxa uu farayaa dhammaan dugsiyada dadweynaha in ay ardayda siiyaan fursad ay ku akhriyaan Ballanqaadka Daacadnimada ama Pledge of Allegiance ugu yaraan hal mar toddobaadkiiba (haddii uusan Guddiga Dugsiga u codeynin in laga dhaafo shuruudan).

**Waajibaadka**

- Qof walba oo aan rabin inuu ka qeybqaato akhrinta Ballanqaadka Daacadnimada sabab walba oo gaar ah oo ay ahaataba waxa uu dooran karaa inuusan akhrin, oo ardayda kalena waa inay ixtiraamaan xaqa uu qofka kale u leeyahay inuu sidaa doorto. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.11, subd. 3(b) barta **revisor.mn.gov/statutes/**.

## Wareysiyada ay Qaadaan Booliska

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay xor ka ahaadaan inay wareystaan ama su'aalo weydiiyaan dhinacyada gaarka ah, sida qareenada iyo baarayaasha gaarka ah, inta lagu jiro wakhtiga maalinta ee iskuulka.
- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay xor ka ahaadaan inay wareystaan ama su'aalo weydiiyaan Waaxda Booliska Saint Paul inta lagu jiro wakhtiga maalinta ee iskuulka ilaa maamulka dhismaha ardayga ay go'aamiyaan inay caqli–darro tahay ama aanay ku qanacsanayn in Waaxda Booliska Saint Paul kula xariiraan ardayga meel ka baxsan iskuulka.
- Marka ay wareysi ka qaadayaan Waaxda Booliska Saint Paul inta lagu jiro wakhtiga maalinta ee iskuulka, ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in si gaar ah loo wareysto oo qarsoodi ah iyo iyada oo uu joogo maamulaha ardayga ama qof uu u xilsaaray maamulaha, iyada oo aanan lahayn carqalad iyo daawasho kaga timaada shaqaalaha iskuulka ama ardayda. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 506.05.01 barta **spps.org/board-policies**.

## Labiska Ardayga

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin inay doortaan habka ay u labisanayaan iyo qaabka is–qurxinta gaarka ah marka laga reebo in khatar cad ay ku keeneyso caafimaadka ama bedqabka ardayga, ay la fara–galeyso shaqada iskuulka ama ay kala–dambeyn la'aan ku abuureyso fasalka ama iskuulka.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay xirtaan dhar ku habboon iskuulka. Si loo joogteeyo deegaan waxbarasho oo bedqaba, labiska ardaygu ma noqon karo mid khatar ku ah caafimaadka iyo/ama bedqabka, fisqi, galmo cad ama takoorid. Dharka muujinaya ereyada ama sawirada gudbinaya farriin ah cunsurinimo, galmo, ama haddii kale aflagaado lama oggola. Dharka muujinaya tixraacyada khamrada, sunta, tubaakada ama badeecooyinka kale ee sharci darrada ah inay isticmaalaan carruurta lama oggola.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay u hoggaansamaan heerarka ugu yar ee nadaafadda iyo nadiifsanaanta ee uu soo saaray maamulaha iskuulka. Ardayda dhigata dugsiyada qaatay shuruudda dharka gaarka ah ee iskuulka waa inay raacaan shuruudda dharka gaarka ah ee iskuulka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg qodobada Xeerka Guddiga 501.03 iyo Xeerka Guddiga 501.04 barta **spps.org/board-policies**.

## Maamulka Ardayda

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay leeyihiin fursad ay ku dhistaan oo ayna kaga qeybqaataan maamulka ardayda oo u furan dhammaan xubnaha ka tirsan ururka ardayda matalo. Ujeedka laga leeyahay jiritaanka maamulka ardayda waa in lagu matalo oona looga jawaab bixiyo dhammaan baahiyaha ay qabaan ardayda.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran, marka ay dhisayaan maamulka ardayda, inay dejiyaan xeerar maamul oo ujeedo leh. Maamulka ardayda waxaa waajib ka saaran inay la xariiraan ururka ardayda, macallimiinta iyo maamulka, iyo inay ka warqabaan oo ayna u hoggaansamaan xeerar walba oo u dagsan dugsiga degmada ee saameynaya habraacyada maamulka ardayda.

## Isticmaalka Tignoolajiyadda iyo Bedqabka

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Ardaydu waxa ay haystaan fursad ay ku helaan agabka tiknoolajiyadda degmada ee kala duwan ee taageeraya waxbarashada gaarka ah.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran isticmaalka saxda ah ee agabka tiknoolajiyadda degmada, oo ay ku jiraan iPad–yada, iyo raacitaanka dhammaan xeerarka iyo habraacyada u dagsan degmada iyo dugsiga.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ixtiraamaan asturnaanta sirta ee isticmaalayaasha kale, oo aanay si ula kac ah u raadsan macluumaadka, koobiyo aysan ka qaadan, ama aysan wax ka beddelin faylasha, xogta kale ama lambar sireedyada ay leeyihiin isticmaalayaasha kale iyada oo aanan laga haysan fasax.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay ilaaliyaan ammaanka agabka tiknoolajiyadda degmada iyo inay aqoonsadaan oo ay ixtiraamaan xuquuqda lahaanshaha hal–abuurka ee dadka kale.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay si degdeg ah gelitaanka aan ula kaca ahayn ee waxyaabaha aan la aqbali karin ama barta internetka ee aan la aqbali karin ugu soo sheegaan maamulaha dugsiga degmada ee ku habboon.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay isticmaalaan agabka tiknoolajiyadda dugsiga iyaga oo aanan isbeddello ku sameyneynin nidaamyada shaqada ee qalabka iyo xogta amniga ama aysan ku soo dejin wax ablikeeshino ah oo aanan ka ahayn kuwa ay oggol yihiin Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul.
- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay xaqiijiyaan in xog walba oo dhijitaal ah oo ku jirta agabka tiknoolajiyadda degmada ay dugsiga ku habboon tahay.
- Isticmaalka aanan la aqbali karin ee agabyada tiknoolajiyadda dugsiga, oo ay ku jiraan iimaylka iyo intarneetka, ay keeni karto mid ama in ka badan cawaaqibta soo socota: ka cayrinta ama ka joojinta mudnaanta isticmaalka ama gelitaanka, ku edbinta xeerarka iyo nidaamyada lagu dabaqi karo ee hoos yimaada degmada, ama mas'uuliyadda madaniga ah ama dambiyada hoos yimaada sharciyada lagu dabaqi karo. Wixii macluumaad dheeraad ah, Xeerka Guddiga 520.00 barta [spps.org/board-policies](spps.org/board-policies).
- Fadlan ka eeg Tilmaamaha loogu talagalay iPad–yada iyo Qalabyada Lumay / La Xaday / Waxyeeloobay bogga _26_ si aad u ogaato cawaaqibka.

## Gaadiidka

**Xuquuqaha/Fursadaha**

- Marka la raacaayo baska ama caasiga iskuulka ama looga soo noqonaayo iskuulka, ardaygu waxa uu xaq u leeyahay raacitaan bedqaba oo xor ka ah caga–jugleyn, hanjabaad, ama dhibaateyn. Ka eeg [spps.org/transportation](spps.org/transportation) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Waaliddiinta/Dadka masuulka ka ah iyo ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo in adeegga gaadiidka uu yahay mudnaan la siiyo ardayga oo ku xiran habdhaqanka ku habboon. Sida uu dhigayo Xeerka Minnesota § 121A.59, gaadiidku waa mudnaan, ee ma ahan wax xaq loo leeyahay, oo loogu talagalay ardayda u qalma.
- Adeegyada iyo gaadiidka gaarka ah ee ku qoran Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee ardayga waa xuquuq uu ardaygu leeyahay, mana la beddeli karo ilaa kooxda IEP ay go'aan ka gaarto. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha la xiriira badbaadada awgood, ardayga waxaa lagu soo rogi karaa joojin ku-meel-gaar ah oo ka saarta adeegga baska.

**Waajibaadka**

- Ardayda waxaa waajib ka saaran inay u hoggaansamaan habdhaqanada laga filayo, oo ay u dajiyeen Guddiga Waxbarashada, inta ay saaran yihiin baska iskuulka iyo inta ay joogaan meelaha baska iskuulka laga raaco ama looga dago. Habdhaqanada xun ee kadhaca baska iskuulka waxaa lagu maareyn doonaa si waafaqsan Buug–gacmeedka Xuquuqda & Waajibaadka ee Ardayga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg qodobada Xeerka Guddiga 707.02 barta [spps.org/board-policies](spps.org/board-policies) ama [spps.org/transportation](spps.org/transportation).

- Waaliddiinta/Dadka masuulka ka ah ardayda gaadiidka lagu soo qaaday waxaa waajib ka saaran inay ilaaliyaan carruurtooda ilaa carruurtooda ay ka koraan baska iskuulka wakhtiga subixii iyo ka dib marka ay carruurtooda ka soo tagaan baska ee la joogo dhammaadka maalinta iskuulka.
- Ardayda ku lugta yeesha dhacdooyinka halista ah ama soo noqnoqda oo anshaxa ardayga ee aanan la aqbali karin ah inta ay saaran yihiin baska iskuulka ama ay joogaan boosteejada baska iskuulka waxaa laga yaabaa in laga joojiyo ama lagala noqdo mudnaanti la siiiyey ee raacitaanka baska, oo ay ku jiraan raacitaanka gaadiidka baska marka la aadaayo safarrada booqashada goobaha.
- Waalidka ama qofka masuulka ka ah ardayga laga joojiyey raacitaanka gaadiidka waxaa waajib ka saaran xaqiijinta in ardayga si nabad ah ugu socdaalo kana soo baxo iskuulka iyo in ardayga ku yimaado iskuulka wakhtigii loogu talagalay.
- Darawalada baska iyo shaqaalaha iskuulka waxaa waajib ka saaran inay baraan, tusaaleeyaan oo ay xoojiyaan habdhaqanka wanaagsan ee laga filayo dhammaan ardayda.
- Ardayda dhigata iskuullada bixiya Kaarka Ardayga ee Gaadiidka Lagu Raaco ee loo isticmaalo Gaadiidka Metro Transit waxaa waajib ka saaran inay u hoggaansamaan xeerka anshaxa, kaasoo ay qasab tahay inay saxiixaan si ay u qaataan Kaarka Gaadiidka Lagu Raaco. Ku xadgudubka xeerka anshaxa, ama maqnaanshaha soo noqnoqda ee aanan cudur–daarka lahayn waxa ay keeni karaan in laga xayiro, laga xiro ama laga joojiyo Kaarka Ardayga ee Gaadiidka Lagu Raaco ee ardayga.

## Heerarka Habdhaqanka Ardayga

Deegaan bedqaba oo wanaagsani waxa uu muhiim u yahay waxbarashada. Ogaanshaha iyo raacitaanka waxyaabaha laga filayo iyo habraacyada waxa ay ka taageeri doonaan ardayda sameynta doorashooyinka wanaagsan iyo horumarka tacliinta. Marka ardayda ay ku lug yeeshaan habdhaqano aanan raacsaneyn waxyaabaha uu ka filayo iskuulkooda, xubnaha ka tirsan shaqaalaha iskuulka waxaa laga filayaa inay ooga jawaabaan si degdeg ah, ku haboon oo joogto ah:

- Shaqaalaha iskuulka waxa ay ku wargelin doonaan waaliddiinta/dadka masuulka ka ah arday walba oo habdhaqankiisa ay khilaafsan yihiin filashooyinka iyo habraacyada dagsan.
- Shaqaalaha iskuulka waxaa laga filayaa inay ku diiwaangeliyaan, diiwaanka habdhaqanka ee ardayga, dhacdooyinka habdhaqanada lagu maareeyo meel ka baxsan fasalka.
- Ardayda, waaliddiintooda/dadka masuulka ka ah iyo shaqaalaha iskuulka waxaa waajib ka saaran inay ka wada shaqeeyaan in la taageero filashooyinka iyo habraacyada lagu sharaxay Buug–gacmeedka Habdhaqanka Ardayga.

### Tallaabooyinka Maamulka Qaado iyo Heerarka Xadgudubyada Habdhaqanka

Habdhaqanada waxaa loo qeybiyaa shan heer. Xadgudubka Heerka 1–aad waa midka ugu halis yar (badanaa waxaa lagu maareeyaa fasalka dhexdiisa), iyo Heerka 5–aad waa midka ugu halis badan. Xadgudub walba oo kuqoran jaantuusyada hoose (boggaga 17-24), waxaa jira heerar baaxad ama jawaabo oo lagu qeexay; heer walba oo (•) ugu horreysa ay ka hoos muuqata waa jawaabta ugu yar iyo heer walba oo (•) ugu dambeysa ay kasoo hoos muuqata waa jawaabta ugu badan. Waxaa kalo jiraa tusaalooyinka wax ka qabashooyinka iyo jawaabaha kuwaas oo:

- Saxa oo bara habdhaqanka wanaagsan si ay ardayda ubaran karaan oo ayna u noqon karaan kuwa bedqaba oo ixtiraam leh.
- Bixi tusaalooyinka tallaabooyin maamulka qaado.
- Dadaal walba oo suuragal ah waa in la sameeyaa si loogu saxo waxyeellada oona lagu beddelo habdhaqanka iyadoo la isticmaalaayo wax ka qabashooyin iyo jawaabta ugu yar ee ku habboon.

**Arrimaha soo socdo waa in la tixgeliyaa ka hor soo saaritaanka wax ka qabashooyinka ama siinta tallaabooyin maamulka qaado:**

- Da'da ardayga, qaangaarnimada, qasadka, iyo fahamka saameynta habdhaqanka
- Kartida uu ardayga u leeyahay inuu dib u hagaajiyo waxyeellada uu keenay habdhaqanka
- Rabitaanka ardayga uu dib ugu hagaajinayo waxyeellada uu keenay habdhaqanka
- Diiwaanka anshaxa ardayga oo ay ku jiraan nooca habdhaqanki hore, tirada dhacdooyinki hore ee habdhaqanka, iyo wax ka qabashooyinka iyo tallaabooyinka maamulka bixiyay ee la istacmaalay
- Nooca, inta ay la'egtahay khatarta, iyo baaxada habdhaqanka
- Duruufaha iyo xaaladaha ku hareereysan habdhaqanka dhacay, oo uu kujiro saameynta uu ku leeyahay deegaanka waxbarashada
- Qorshaha Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) ee ardayga ama qorshaha 504, haddii ay khuseyso

### Ka Qaybgal Buuxa oo Sinnaan leh ee Caruurta Yar ee ah Waxbarashada Hore Dhigato Taasoo ku Saleysan Xeerka Pupil Fair Dismissal Act (Xeerka u Ceyrinta Ardayga si Caddaalad ku Jirto):

Arday ka diiwaangashan barnaamijka dugsiga barbaarinta ubadka ama dugsiga xannaanada ka hor (preschool ama pre kindergarten), oo uu ku jiro cunug ka qeybgalaya waxbarashada qoyska ee barbaarinta ubadka ee hore, barnaamijka u diyaargarowga iskuulka, barnaamijka u diyaargarowga iskuulka ee dheeraadka ah, dugsiga barbaarinta ubadka ee mutadawaca ah, barnaamijka Head Start, ama barnaamij kale oo iskoolka-ku-saleysan oo ah preschool ama prekindergarten, ama kindergarten ilaa fasalka 3-aad dhammaantood ma qabanayo xeerka ceyrinta ee halka maalin ah oo iskoolku jiro ama in ka badan marka la eego xeerarka ku jiro Buug-gacmeedkan, iyadoo la raacayo sharciga heerarka

gobol iyo federaal ee ardayda helaysa adeegyada waxbarashada gaarka ah. Cayrinta iyo ka saaridda iskoolka waxaa loo isticmaali karaa ka dib marka waxyaabaha hoos ku sharaxan laga soo daalo, iyo kaliya caqabadaha marka ay jiraan waxyaabo socdo oo khatar ku ah bedqabka canuga ama kuwa kale. Edbinta nooceeda ah inaan ardayga la Saarin hawsha socoto waxaa muhiim u ah in la helo ugu yaraan mid ka mid ah arrimahaan hoose:

1. la shaqeynta qoyska ama qofka masuulka ka ah ardayga, la taliyaha ama bixiyaha caafimaadka maskaxda ee canuga, khabiirka ku takhasusay waxbarashada ardayga, ama taageerada kale ee ku saleysann bulshada;
2. abuurista qorshe, kaasoo lala qoray waalidka ama masuulka, kaas oo faahfaahinaya tallaabada iyo nooca taageero ee loogu baahan yahay ardayga si uu si buuxda uga qaybqaato barnaamijka waxbarasho ee hadda socdo, kaasoo uu ku jiro barnaamijka preschool or prekindergarten; ama
3. bixinta ugudbinta adeegyada taageerada loo baahan yahay, oo ay ku jiraan waxbarashada waalidnimada, booqashooyinka guriga, wax ka qabashooyinka kale ee taageerada waxbarashada, ama, meeshi ay ku habboon tahay, qiimeyn lagu go'aaminayo haddii ardaygu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ama adeegyada qaybta 504.

Fiiro gaar ah: Fadlax u tixraac qaamuuska ereyada si aad u hesho qodobada iyo qeexitaanada dheeraadka ah, ee la xariira tixraacyada xeerka Minnesota, iyo xogaha kale.

## Heerarka Xadgudubyada Habdhaqanka

### Heerka 1–aad

Wax ka qabashooyinka Heerka 1–aad waxaa guud ahaan dabaqo xubnaha ka tirsan shaqaalaha iskuulka marka ardayga uu leeyahay xadgudubyo yar ama uusan horay u lahayn wax xadgudub ah. Jawaabta shaqaalaha waa inay baraan oo ugu celceliyaan habdhaqanka la filayo si ardayda ay ubartaan oo u soo bandhigaan habdhaqanno bedqaba oo ixtiraam leh. Xubnaha ka tirsan shaqaalaha waxa ay isticmaalaan xeelado waxbarid iyo maareyn ah oo kala duwan, oo tanina inta badan waa habdhaqan lagu maareeyo fasalka.

**Tusaalooyinka wax ka Qabashooyinka iyo Jawaabaha Dib u soo Celinta**

Dhacdooyinka Heerka 1–aad guud ahaan ma keenaan in laga saaro iskuulka ilaa xaddiga iyo/ama joogteynta habdhaqanka uu sarreeyo oona la isku dayey wax ka qabashooyin badan. Wax ka qabashooyinka waxaa loogu talagalay in lagu saxo oona lagu baro habdhaqan kale si ardayda u soo bandhigaan habdhaqan bedqaba oo ixtiraam leh.

Xubnaha ka tirsan shaqaalaha iskuulka waxaa laga filayaa inay isticmaalaan habab kala duwan iyo xeeladaha maareynta fasalka oo ay ku jiri karaan:

- Dib–ubaridda habdhaqanka/xirfadda laga filayo
- Dib u jihayn afka ah ama mid aan hadal lahayn
- Doorka laga cayaaro
- Ka tarjumid/raaligalin qoraal ah
- Kursi beddelid
- Shirka macalinka/ardayga
- Xaashida horumarka maalinlaha ah ee habdhaqanka
- Dib u soo celin (qorshe–hagaajin)
- Qaado Nasasho /Adeegsiga Goobta Dejinta ee Fasalka.
- Waayidda mudnaanta(naha)
- Kal fadhiga dib u dhisidda bulshada fasalka
- Qoraal Fikir Dib-u-eegis ah
- Dib u barid filashada isticmaalka taleefanka gacanta.

Wax ka qabashooyinka shaqaalaha ee ku habboon waxaa ku lug yeelan kara waalidka/qofka masuulka ka ah ardayga iyo xubnaha kale ee ka tirsan bulshada dugsiga. Wax ka qabashooyinka waxaa ku jiri kara:

- Ogeysiinta waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka waalidka/qofka masuulka ka ah/macalinka
- Waalidka/qofka masuulka ka ah oo ardayga u soo raaca iskuulka ama fasalka
- In ardayga la weyddiiyo inuu bixiyo, hagaajisto, ama daboolo dharka ku xadgudba shuruudaha labiska ardayga
- Wadahadal lala yeesho maamulka oo ku saabsan isbeddelka jadwalka
- Adeegga bulshada ee dugsiga dhexdiisa ah
- Xallinta khilaafaadka
- Ka qaybqaadashada barnaamijka tababarka toosinta
- Heshiis udhexeeya macalinka, ardayga iyo waalidka/qofka masuulka ka ah
- Dhexdhexaadinta asxaabta iskufilka ah
- U gudbinta adeegyada taageerada dheeraadka ah ee iskool

## Heerka 2–aad

Xadgudubyada Heerka 2–aad waxa ay keeni karaan wax ka qabashooyin iyo/ama tallboolyinka maamulka qaada oo ay ku lug yeelanayaan shaqaalaha kale ee iskuulka.

**Tusaalooyinka wax ka qabashooyinka, Hab-dhaqanno Dib u soo celin ah, iyo/ama Tallboolyinka Maamulka Qaada**
Wax ka qabashooyinkani waxaa ku lug yeelan kara maamulka iskuulka waxaana loogu talagalay in lagu saxo habdhaqanka iyadoo la xarriiqayo halista habdhaqanka iyadoo isla markaana ardayga lagu haynaayo iskuulka.

- Isticmaalka wax ka qabashooyin iyo cawaaqib heer–hoose ah
- Tababarka xirfadaha habdhaqanka
- Shirka ardayga
- Ogeysiinta waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka waalidka/qofka masuulka ka ah
- Dhaqannada soo celinta (Wada-hadal dib u soo celin ah, dhexdhexaadinta ay sameeyaan ardayda isku dhigga ah)
- Adeegga bulshada ee dugsiga
- Ugudbinta Student Assistance Team (Kooxda Caawinta Ardayga, SAT)
- Ka saarida fasalka
- Xabsi ku xiridda
- Dugsiga Sabtida
- Ka joojinta dugsiga maalin barkeed ama ka badan
- Heshiiska habdhaqanka ee ardayga
- Kaga tag taleefanka gacanta maamulaha dugsiga inta kahartay maalinta

Haddii ardaygu marar badan ku celceliyo xadgudubka Heerka 2, waxaa loo qaadan karaa xadgudub heer sare ah haddii la caddeeyo in tallaabooyin wax-ka-qabasho hore loo sameeyay. ***Faahfaahin dheeraad ah ka eeg bogga 14, qaybta "Administrative Actions and Level of Behavior Violation."***

## Heerka 3–aad

Xadgudubyada Heerka 3–aad waxaa ku jiri doona maamulka iskuulka waxa ayna keeni karaan ka cayrinta iskuulka qeyb ka mid ah maalinta ama wax aan ka badnayn hal maalin ee dugsiyeed.

**Tusaalooyinka Wax ka Qabashooyinka, Tallaabooyinka Dib U soo Celinta, iyo/ama Maamulka Qaaday**
Jawaabahani waxa ay ku lug yeelan karaan ka saarida ku meel gaar ah, muddada gaaban ee ardayga laga saaro deegaanka iskuulka sababo la xariiro sida uu u daran yahay habdhaqanka. Muddada ay soconeyso ka saaridda, haddii la siiyo, waa in lagu soo xadidaa ilaa inta suuragalka ah iyadoo isla markaana si ku filan wax looga qabanayo habdhaqanka.

- Isticmaalka wax ka qabashooyin iyo cawaaqib heer–hoose ah
- Ogeysiinta waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka waalidka/qofka masuulka ka ah
- Beddelka ka eryidda, sida shirka xallinta waxyeellada, Shirka Kooda Qoyska, ama Dhaqanka kale ee Soo Celinta
- Ugudbinta taageerooyinka PBIS Heerka 2–aad iyo/ama Heerka 3–aad ee dhismaha dhexdiisa
- Eryidda (ilaa hal maalin dugsiyeed oo dhammaystiran)
- Loo gudbiyo Kooxda Taageera Caafimaadka Dhimirka ee dugsiga ama laga fikiro baaritaanka CARE.

Haddii ardaygu marar badan ku celceliyo xadgudubka Heerka 3, waxaa loo qaadan karaa xadgudub heer sare ah haddii la caddeeyo in tallaabooyin wax-ka-qabasho hore loo sameeyay. ***Faahfaahin dheeraad ah ka eeg bogga 14, qaybta "Administrative Actions and Level of Behavior Violation."***

## Heerka 4–aad

Xadgudubyada Heerka 4–aad waxaa kadhalan kara fiijinta ardayga iyo ogeysiinta suuragalka ah ee Xafiiska Amniga iyo Maareynta Degdegga ah. Fiijinta waa ka saaridda iskuul in kabadan hal maalin.

**Tusaalooyinka Wax ka Qabashooyinka, Tallaabooyinka Dib U Soo Celinta, iyo/ama  kuwa Maamulka Qaaday**

Jawaababahani waxa ay ku lug yeelan karaan ka saarida ku meel gaar ah, muddada gaaban ee ardayga laga saaro deegaanka iskuulka sababo la xariiro sida uu u daran yahay habdhaqanka. Muddada ay soconeyso ka saariddaa muddada gaaban ah, haddii la siiyo, waa in lagu soo xadidaa ilaa inta suuragalka ah iyadoo isla markaana si ku filan wax looga qabanayo habdhaqanka.

- Isticmaalka wax ka qabashooyin iyo cawaaqib heer–hoose ah
- Ogeysiinta waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka Kooxda Qoyska ama Dhaqan Soo Celin oo kale
- Gudbinta Kooxda Ka Jawaabista Ardayga iyo/ama Kulan Go'aaminta Sababta Dhaqanka.
- Wareejinta maamulka
- Beddelka fiijinta
- Meeleynta waxbarasho kale oo ku meel gaar ah
- Fiijinta, in ka badan hal maalin dugsiyeed oo dhamaystiran
- Ceyrinta ama ka saarida (tallaabada Guddiga Waxbarashada)

**Fiiro gaar ah:** Ardayda ku lugta yeesha dhacdooyinka heerkan waxaa loo gudbin karaa cayrin iyadoo ku xiran duruufaha.

## Heerka 5–aad

Xadgudubyada Heerka 5–aad waxa ay kaga baahan yihiin maamulaha inuu ogeysiiyo Xafiiska Amniga iyo Maareynta Degdegga ah oo uuna cayrinta u gudbiyo Kormeeraha Guud ama qofka loo xilsaaray. Ka eeg qeexitaanada buuxa ee cayrinta iyo xeerarka khuseeya xadgudubyada lagu xusay qaamuuska ereyo-bixinta.

**Tusaalooyinka Jawaabaha Anshaxa**

Jawaababahani waxa ay ku lug yeeshaan ka saarida ardayga ee laga saaro deegaanka iskuulka sababo la xariiro sida uu u daran yahay habdhaqanka. Waxa ay ku lug yeelan karaan in ardayga lagu meeleeyo deegaan bedqaba oo siinaya qaab–dhismeed dheeraad ah oo wax kaqabanayo habdhaqanka. Wax ka qabashooyinkani waxa ay diiradda saaraan ilaalinta bedqabka bulshada dugsiga iyo joojinta habdhaqanka is–baabi'inta iyo/ama khatarta ah:

- Isticmaalka wax ka qabashooyin iyo cawaaqib heer–hoose ah
- Ogeysiinta waalidka/qofka masuulka ka ah
- Shirka waalidka/qofka masuulka ka ah
- U tixraac Nidaamyada Buug–gacmeedka Taageerada wixii ku aadan go’aaminta caddeynta iyo hannaanka Kooxda Ka Jawaabidda Ardayga
- Wareejinta maamulka
- Meeleynta waxbarasho kale oo ku meel gaar ah
- Ceyrinta ama ka saarida (tallaabada Guddiga Waxbarashada)

## Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista Maamuulka

| | |
|---|---|
| **Heerka 1–aad** | Wax ka qabashooyinka **Heerka 1–aad** waxaa guud ahaan wax ka qabta xubnaha ka tirsan shaqaalaha iskuulka ee fasalka dhexdiisa marka ardayga uu leeyahay xadgudubyo yar ama uusan horay u lahayn wax xadgudub ah. Jawaabta shaqaalaha waa inay baraan oo ugu celceliyaan habdhaqanka la filayo si ardayda ay ubartaan oo u soo bandhigaan habdhaqanno bedqaba oo ixtiraam leh. Xubnaha ka tirsan shaqaalaha waxaa laga filayaa inay isticmaalaan xeeladaha wax baridda iyo maareynta oo kala duwan. |
| **Heerka 2–aad** | Xadgudubyada **Heerka 2–aad** waxa ay keeni karaan wax ka qabashooyin iyo/ama jawaabaha edbinta oo ay ku lug yeelanayaan shaqaalaha kale ee iskuulka. Tallaabooyinkani waxaa loogu talagalay in lagu saxo habdhaqanka iyadoo la adkeynayo halista habdhaqanka iyadoo isla markaana ardayga lagu haynaayo iskuulka. |
| **Heerka 3–aad** | Xadgudubyada **Heerka 3–aad** waxaa ku jiri doona maamulka iskuulka waxa ayna keeni karaan ka cayrinta iskuulka qeyb ka mid ah maalinta ama maalinta oo dhan ee iskuulka. |
| **Heerka 4–aad** | Xadgudubyada **Heerka 4–aad** waxa ay keeni karaan ardayga in la fiijiyo. Fiijinta waa ka saaridda iskuulka in kabadan hal maalin. Degmadu waxa ay xaq u leedahay inay u gudbiso cayrin ama laga saaro marka ay dhacaan dhacdooyinka aadka u daran ee dembiyada Heerka 4–aad. |
| **Heerka 5–aad** | Xadgudubyada **Heerka 5–aad** waxa ay kaga baahan yihiin maamulayaasha inay ugudbiyaan cayrinta Kormeeraha Guud ama qofka loo xilsaaray. Qeexitaanada buuxa ee cayrinta iyo xeerarka khuseeya xadgudubyada waxa ay ku jiraan qaamuuska ereyo-bixinta. |

### Marka la ogeysiinayo Xafiiska Amniga iyo Maareynta Degdegga ah

Shaxda hoose, haddii ay jirto (*) oo lagu daray heerka maamulayaasha goobta ay ku meelaynayaan xadgudubka akhlaaqda ardayga, fadlan ogeysii Xafiiska Amniga iyo Maareynta Degdegga ah.

**Shaxda hoose waxaa ku jira soo koobista qeexitaanada xadgudubyada iyo jawaabaha laga bixinayo. Fadlan ka eeg qeexitaanada buuxa qaamuuska ereyo-bixinta.**

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Maqnaanshaha, Googoyska Joogtada ah**<br>Maqnaanshaha aan la ogolayn ee sii socda. Ka eeg qeexitaanka oo dhammeystiran qaamuuska ereyo-bixinta. | | • | | | |
| **Maqnaanshaha, Daahitaanka**<br>Imaanshaha ka daahitaanka dugsiga ama fasalka. | • | | | | |
| **Maqnaanshaha, Cudurdaar la'aanta ah**<br>Ka maqnaanshaha aan la ogolayn ee dugsiga ama fasalka. | • | • | | | |
| **Haysashada/Isticmaalka/Kusarkhaansanaanta Khamrada/Codsashada/Iibinta**<br>Haysashada, isticmaalka, codsashada, iibinta, ama ku sarkhaansanaanta wax badeeco khamri ah inta lagu jiro dhulka dugsiga ama hawlaha uu soo qabanqaabiyo dugsiga. | | | | •* | |
| **Gubitaanka**<br>Burburinta ula kaca ah ama waxyeeleynta hantida iyadoo la qabadsiinayo dab ama qaraxyo. | | | •* | •* | •* |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Weerarka**<br>In si qasad ah nabar loogu geysto qof aan xubin ka ahayn shaqaalaha SPPS iyadoo aan oggolaansho laga haysan qofka. | | | | •* | |
| **Weerar, ka Daray (waxyeello wayn ama la taaban karo ee jireed)**<br>Si ulakac ah oo dhaawac weyn oo jireed ama dhaawac weyn loo geysto qof kale oo aan ahayn xubin shaqaalaha SPPS. | | | | | •* |
| **Weerar, ka Daray (qori, hub khatar ah, ama hub kale)**<br>Ku–samaynta fal qori, hub khatar ah, ama hub kale iyadoo ujeedadu tahay in lagu sameeyo cabsi mid kale oo ah dhaawac jidheed ama dhimasho degdeg ah. | | | | | •* |
| **Weerarka lagu qaado Shaqaalaha**<br>Waxyeello ula kac ah oo jidhka ah oo loo geysto shaqaalaha SPPS, iyada oo aan qofka oggolaansho laga haysan. | | | | •* | |
| **Weerarka lagu qaado Shaqaalaha, ka Daray (waxyeello wayn ama la taaban karo ee jireed)**<br>Waxyeello wayn ama taaban karo ula kac ah oo jidhka ah oo loo geysto shaqaalaha SPPS. | | | | | •* |
| **Xoog u sheegashada**<br>Cagajugleyn, hanjabaad, aflagaado, ama dhaqan waxyeelleyn oo si ula kac weerar u ah iyo: (1) inay jirto isu dheelitirnaan la'aanta awooda oo dhab ah ama loo arko oo u dhexeysa ardayga ku lugta yeelanaya dhaqanka la mamnuucay iyo habdhaqanka bartilmaameedka ah oo habdhaqankuna soo noqnoqday ama noqdo taxane; AMA (2) xajmi ahaan iyo baaxad ahaan faragalin ku yeelaneysa fursadaha waxbarasho ee ardayga ama waxqabadka ama awoodda uu ooga qeybgalayo hawlaha dugsiga ama waxqabadyada ama awoodda uu ku qaadanayo gunnooyinka iskuulka, adeegyada ama mudnaanta. Ka eeg Xeerka Guddiga 505.00 (laga heli karo barta [spps.org/board-policies](spps.org/board-policies)). Ka hel tusaalooyinka qaamuuska ereyo-bixinta. | | • | • | •* | •* |
| **Xoog u Sheegashada Iyadoo la Isticmaalayo Tiknoolajiyada (Xoog Ugu Sheegashada Intarneedka)**<br>Si aad u hesho qeexitaanka Xoog Ugu Sheegashada Intarneedka, ka eeg Xeerka Gudiga 505.00 ([spps.org/board-policies](spps.org/board-policies)). | | • | • | • | |
| **Xashiishad, Haysashada/Isticmaalka/Codsiga/Iibinta/Sarkhaansanaanta**<br>Haysashada, isticmaalka, codsashada, iibinta ama sarkhaansanaanta la xiriirto xashiishadda meel walba oo iskoolka ah. Ka eeg Xeerka Guddiga 504.00 [spps.org/board-policies](spps.org/board-policies). | | | | •* | |
| **Telefoonnada Gacanta & Qalabka Korontada ee Shakhsi ahaaneed - Ku Xadgudub**<br>Isticmaalka joogtada ah ee telefoonnada gacanta ama qalabka kale ee korontada ee shakhsi ahaaneed inta lagu jiro waqtiyada maalinta dugsiga ee isticmaalka la mamnuucay iyadoo ardayga loo xasuusiyey shuruudaha dugsiga ee isticmaalka. Isticmaalka qalabka korontada ee shakhsi ahaaneed waxaa lagu qeexaa, laakiin kuma eka, farriin diris (texting), wicitaan, internet-ka ku raadis, isticmaalka baraha bulshada, sawir-qaadis ama muuqaallo duubis, ama adeegsiga barnaamijyo (apps). | • | | | | |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Qishka ama Sheegashada Wax Aadan Lahayn**<br>Daacad–xumada tacliinta oo ay ku jirto, laakiin aanay ku koobneyn, soo koobiyeynta shaqada dadka kale ee shaqooyinka dugsiga ama imtixaanada iyo isticmaalka fikradaha ama qoraallada qof kale iyada oo aan la siinin qaddarinta saxda ah ee abuuraha shaqada. Tani waxaa ka mid ah shaqada dhijitaal ahaan loo galo. | • | • | • | | |
| **Qasbidda**<br>Waxay dhacdaa markuu qofku qof kale ku qasbo inuu sameeyo ficil ka dhan ah rabitaankiisa ama uu si qasab ah uga celiyo inuu sameeyo ficil sharci ah isagoo hanjabaya af ahaan ama qoraal ahaan. Ka eg qeexitaanka oo dhammaystiran qaamuuska ereyo-bixinta. | | | | •* | |
| **Xeerka Dambiga**<br>Ku galidda dambi, hantida dugsiga ama inta ay socoto hawl dugsigu soo qabanqaabiyey ama dugsiga la xariirta, oo noqoneysa dambi haddii uu galo qof qaangaar ah. | | | | •* | •* |
| **Waxyeeleynta Hantida Dadka kale**<br>Burbur ula kac ah oo loo geysto hantida xubnaha ka tirsan shaqaalaha ama kuwa kale. | | • | • | • | |
| **Waxyeeleynta Hantida Dugsiga**<br>Waxyeeleyn ula kac ah oo loo geysto hantida uu leeyahay ama uu isticmaalo dugsiga degmada. Tani waxaa ka mid ah waxyeeleyn ula kac ah oo loo geysto qalabka, softiweerka ama aalad kale oo uu leeyahay ama uu isticmaalo dugsiga degmada. | | • | • | • | |
| **Amar Ka Diididda Maamulka**<br>Diidmada ula kac ah ee in la raaco amarada uu bixiyo xubin ka tirsan shaqaalaha. Ka eeg tusaalooyinka ku jira qaamuuska ereybixinta. | • | • | | | |
| **Takoorka** [1]<br>Takoorka ama takooridda waxaa ka mid ah dhammaan in si aan loo sinneyn loola dhaqmo qof walba sababo la xiriira isir, caqiido, jinsi, xaalad guur, asalka qarankiisa, da'diisa, midabka, diinta, abtirsiinyo, heerkiisa nolosha marka la eego helidda kaalmada dadweynaha, dhanka uu qofku u janjeero ama cidda uu ka helo jaceyl ahaan, siduu isu arko xagga jinsiga iyo muujinta arrinkaas, xaaladda xagga qoyska, ama naafannimada. Ujeeddooyinka takoorka ee ku saleysan jinsiga, waxaa ka mid ah dhibaateynta jinsiga la xiriiro. | | • | • | • | |
| **Habdhaqanka Carqaladeynta**<br>Xaaladaha iyo/ama ficilo faragalin ku yeelanaya, ama suuragalka ah inay faragalin ku yeeshaan, waxbarashada waxtarka leh iyo/ama hawlaha dugsiga. | • | • | • | | |
| **Habdhaqanka Carqaladeynta, daran**<br>Xaaladaha iyo/ama ficilo khatar galin kara ama khatar galiyey bedqabka dadka kale; ama si aad u weyn rabsho ah, ama habdhaqan hanjabaad ah oo si aad u daran u carqaladeeya iskuulka, hawl iskuulku soo qaban qaabiyey, ama hawl iskuulku kormeero oo lagu hayo meel ka baxsan iskuulka. | | | | •* | |
| **Habdhaqanka Carqaladeynta ee marka loo socdo ama laga soo noqdo Dugsiga**<br>Habdhaqan khatar gelinaya ama dhibaateynaya ardayda marka ay u socdaan ama ay kasoo noqdaan dugsiga, ama ay joogaan boosteejada baska, ama darawalka baska dareenkiisa ka weecinaya inuu kaxeeyo baska. | | • | | | |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Haysashada/Isticmaalka/Ka Codsashada/Iibinta/Sarkhaansanaanta ka timid Daroogooyinka ama Daroogo Xakameysan**<br>Isticmaalka iyo/ama haysashada daroogo la xakameeyey iyo walxaha sunta ah oo lagu isticmaalo dugsi walba ama goob shaqo. Ka eeg Xeerka Guddiga 504.00 barta spps.org/board-policies.. | | | | •* | •* |
| **Haysashada/Isticmaalka/Ujeedka in lagu Isticmaalo, Qalabka Qarxa**<br>Haysashada, isticmaalka, ama ujeedka in lagu isticmaalo qalabka qarxa sida bambada, bam–gacmeed, miino, sayruuq, gantaal, bamka tuubada, ama qalab lamid ah oo loo qaabeeyey inuu qarxo oo awood u leh inuu geysto waxyeelo jireed ama burburka hantiyeed. | | | | | •* |
| **Isla–diririd**<br>Laba ama in ka badan oo qof oo si wadajir ah ooga qayb qaata adeegsiga xoog ama gacan ka hadal. | | • | • | •* | |
| **Haysashada/Isticmaalka/Ujeedka in lagu Isticmaalo, Hubka**<br>Hub walba (oo ay ku jiraan qoriga tartamada lagu bilaabo) ee la doonayo ama loo qaabeeyey ama laga yaabo in si sahal ah loogu beddelo in lagu rido xabad oo ka dhalata qarxa; qubka ama hub walba; dabdeeye walba oo hub ama aamusiyihii hubka; ama qalab walba oo wax gummaada. Ereygan kuma jiro hub qadiimi ah. Haddii aa rabtid, qoryaha kuusha laga rido, Qoriga saalada laga rido, ama qori–u–eke eeg Haysasho/ Isticmaal Hub Khatar ah Oonan Ahayn Qori ama Bastoolad. | | | | | •* |
| **Dabka iyo Qaylo–dhaanta Dabka ee Beenta ah**<br>Cilladaynta ama fara–faraynta qalabka qaylo–dhaanta dabka ama ku guuldaraysiga taxaddarka, taasoo keenaysa dab. | | | | • | |
| **Qamaar**<br>Dheelista ciyaar baqtiyo–nasiib ah. | | • | • | | |
| **Ka Qayb Noqosho Burcad**<br>Ka qayb noqoshada burcadda waxay xadgudub dheerad ah ku tahay. Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku jira qaamuuska ereybixinta. | | | | •* | •* |
| **Dhibaataynta, oo ku Salaysan Maqaam la Ilaaliyo [1]**<br>Dhibaataynta waxaa ka mid ah akhlaaq jir ama hadal ah, oo ay ku jirto, laakiin aan ku koobneyn, wadaxariirka elegtarooniga ah, ee la xiriirta shakhsi ahaanta ama ka shakhsi ahaanta kooxda ee isirka, caqiidada, jinsiga lab ama dhedig, xaalada guurka, wadanka uu ka soo jeedo, da'da, midabka, diinta, abtirka, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga iyoi cabiridda jinsiga, heerka qoys ama naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la–hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03 marka dhaqanka akhlaaqda: 1) uu leeyahay ujeedo ama saameyn cagajugleyn, cadowtinimo, ama aflagaado ku abuureyso deegaanka shaqada ama tacliinta; 2) uu leeyahay ujeedo ama si weyn u saameyneysa ama si aan caqli gal ahayn u faragalineyso shaqada ama tacliinta ee shaksi gaar ah; ama 3) haddii kale si xun u saameyneysa fursadaha shaqada ama tacliinta ee shakhsi gaar ah. | | • | • | •* | •* |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management**

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Ciyaar leh Waxyeelleyn** [1,2]<br>Waa fal ka dhan ah arday, ama ku qasbidda arday inuu fal geysto, taasi oo halis weyn ku abuureysa qofka si ardayga loogu bilaabo ama lagu xiro koox, ama ujeedadi walba ee kale. | | | | • | |
| **Qalab wax Curyaamiya, Haysasho, oo isticmaalaya ama ku hamminaya isticmaalka qalabka**<br>Qalab loo qaabeeyey in si ku meel gaadh ah u ku istaajiso ama u curyaamiso dadka sida teesaraha, qoriga korontada ama faraca sunta dadka ka ilmaysiisaa. Isticmaalka ama ku hammintu waa iney wakhtil xaadirkaas ahaataa. | | | | | •* |
| **Qalab wax Curyaamiya, Haysasho, aanan isticmaalayn ama ku hamminayn isticmaalka qalabka**<br>Kor fiiri. Isticmaalka ama ku hammintu waa iney ahaanin wakhtil xaadirkaas ahaataa. Jawaab ka bixinta xadgudubka marka koobaad waa la wareegidda qalabka iyo wada hadal lala yeesho ardayga iyo waalidka/masuulka. | • | • | • | •* | |
| **Faragelin/Carqaladayn**<br>Tallaabo walba oo loo qaado si looga hortago in xubin ka mid ah shaqaaluhu uu guto waajibaadkiisa sida sharciga ah loogu idmaday, oo ay ku mid tahay baadhista dhinaca maamulka. | | • | • | | |
| **Luuqad, Cay ah**<br>Ardaygu waxa uu soo gudbiyaa farriimaha afka ah oo ay ku jiraan luuqad gaf ama hanjabaad ah. | | • | • | • | |
| **Luuqad, aan Haboonayn**<br>Dhaarasho ama ereyada oo si xushamd la’aan ah loo adeegsado. | • | | | | |
| **Ka Tagista Dhulka Iskuulka**<br>Ka tagista dhulka iskuulka iyaadoon fasax laga haysan shaqaalaha. | | • | | | |
| **Xadgudubka Xeerka Daawada Dhakhtarku Qoray**<br>Ardeyda isticmaalayaan ama qaybinayaan daawoyinka dhakhtar qoray ama kuwa aan dhakhtar qorin si aan la ogolayn. | | • | • | • | • |
| **Xeerka Ku Xadgudubka Daawada, Midda aan Laguu Qorin**<br>Ardayda isticmaalaysa ama si aan loo oggoleyn u qaybinaysa daawo uusan dhakhtar soo qorin. | | • | • | • | • |
| **Haysasho, Alaabaha kale ee la Mamnuucay**<br>Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara (laakiin aan ku xaddidnayn): rasaasta, walax yar oo cod qarax camal ah sameysa, dabka sigaarka lagu shido, katiinadaha booliiska ee gacmaha, aaladda digniinta ee qeyliso, iyo wixii kale ee ah alaabta lagu ciyaaro ama walxaha kale (oo ay ku jiraan qoriga ciyaarta ee aan dhab u buuxin qeexitaanka qoriga runta ah la isu ekeysiiyay, mindiyaha caagga ah, seefaha caagga ah, iwm.) oo aan loo aqoonsan doonin hub ahaan balse iskoolka u keeni kara carqalado. | • | • | | | |
| **Ka Bixis Goobta**<br>Ardayga ka soo baxay goobtii loogu talagalay (tusaale, ka tagida fasalka ama bay’adda waxbarashada fasax la'aan; wareegaya hoolalka ama dhulka dugsiga) | • | • | | | |
| **Xadgudub Baakinka Gaariga**<br>Ku baakimid meel aan la oggolayn ku dhex taal hantida iskuulka. | • | | | | |

***Ogeysii Xafiiska Maareynta Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah (Office of Security and Emergency Management)***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Daandaansi Gacan Qaad (Waxyeelo Jirka ah)**<br>Fal ula kac ah oo keenaya waxyeelo jirka ah. | | • | •* | • | |
| **Daandaansi Gacan Qaad (Waxyeelo Wayn oo Jirka ah)**<br>Fal ula kac ah oo keenaya waxyeelo wayn oo jirka ah. | | | •* | •* | |
| **Daandaansi Gacan qaad ah oo shaqaalaha lagula kaco**<br>Fal ula kac ah oo uu ardaygu sameeyo taas oo keenaysa gacan qaad aan la jeclaysan oo uu ku sameeyo qof shaqaale ah. Waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, riixida, dharbaaxada, iyo candhuufta. | | • | •* | •* | |
| **Gacan Qaad (Ma leh Waxyeelo Jirka ah)**<br>Ardeydu waxay galaan gacan isku qaadid aan halis ahayn laakiin aan habboonayn, sida riixid, candhuufidda, faro-ka-ciyaarka, iyo cabsigelin. | • | • | • | | |
| **Haysashada, Hub kale ama Shay, aan ahayn hub oo aan buuxin qeexitaanka hubka khatarta ah ee Xeerka Minnesota, iyada oo aan la isticmaalin ama la damacsanayn in loo isticmaalo hub ahaan**<br>Aaladda aan loo soo saarin ka hub khatar ahaan oo awood u leh in uu gaysto waxyeello jirka ah, waxyeello weyn oo jirka ah, ama looga cabsanayo waxyeello jirka ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah mindiyaha leh kirkiraha ay wax ku jaraan ee kayar 2.5 inji, kartoon jarto, sakiinta, iwm. Isticmaalka ama ku hammintu waa iney ahaanin wakhtil xaadirkaas. | | | | •* | |
| **Haysasho/ Isticmaal Hub Khatar ah Oonan Ahayn Qori ama Bastoolad**<br>Aalad loo sanceeyay ama loo qaabeeyay hub ahaan kasoo awood u leh inuu keeno dhimasho ama waxyeello jireed oo aad u wayn. Tusaaleyasha waxaa ka mid ah mindi leh kirkir 2.5 inji ama ka dheer, qori–u–eke, qoriga kuulaha laga rido, ama birta feerka. | | | | | •* |
| **Haysashada, Hub kale ama Shay, aan ahayn hub oo aan buuxin qeexitaanka hubka khatarta ah ee Xeerka Minnesota, oo la isticmaalayo ama la damacsanyahay in la isticmaalo**<br>Aaladda aan loo soo saarin ka hub khatar ahaan ama hub aan la caadaysan oo awood u leh in uu gaysto waxyeello jirka ah, waxyeello weyn oo jirka ah, ama looga cabsanayo waxyeello jirka ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah mindiyaha leh kirkiraha ay wax ku jaraan ee ka yar 2.5 inji, kartoon jarto, sakiinta, iwm. Isticmaalka ama ku hammintu waa iney ahaanin wakhtil xaadirkaas ahaataa. | | | | | •* |
| **Aaladaha buleer ka, Haysashada iyo/ama Qarxinta**<br>Buleer ama buleerka dhawaaqa dheer kaasoo dab keeni karo. | | | • | •* | |
| **Rabsho Isireed ama Diineed [1,2]**<br>Rabshadaha isir ama diineed waa fal daandaansi gacan ka hadal ah ama weerar ama hanjabaad daandaansi ama weerar qof kale oo ay ugu wacantahay , ama qaab macquul ah oo la xiriirtaa, isir ama diin. | | | | •* | |
| **Darawalnimo Taxaddar la'aan**<br>Ku dhex wadidda baabuurta iskuulka hantidiisa qaab khatar galinaysa dadwaynaha ama hantidaas. | | | | •* | |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Ka been sheegid Diiwaanka iyo Aqoonsiga**<br>Ka been sheegid ama beddelid saxiixa ama xogta, diidid inaad bixiso aqoonsi saxsan, ama inaad shaqaalaha siisid aqoonsi been ah. | | • | • | | |
| **Dhac/ Baad**<br>Helis maal qof kale adoo adeegsanaya xoog ama hanjabaad xoog ah. | | | | •* | |
| **Hab–dhaqanka galmada**<br>Ku lug lahaanshaha hab–dhaqanka galmada oo ay ka mid tahay, laakiin aanay ku koobnayn, galmada tooska ah ama galmada galinta xubinta taranka, isku tag galmo, astur xumida cawrada, ama siigaysiga. | | • | • | •* | |
| **Dhibaataynta xaga galmada[1]**<br>Dhibaataynta xaga galmada waxay ka koobantahy dhaqdhaqaad galmo ee aan la jecaysan, codsiyo la xiriira asxaan galmo, dhaqan jir ahaaneed oo galmada dhiirogalinaysa ama mid kale oo ah dhaqan jir ahaneed ama af ahaaneed ama xiriir ku salaysan dabiici ahan galmo kolka: a) adeecidda dhaqankaas ama xiriirkaas looga dhigo qodob ama sharuud, si cad ama maldahan, si loogu helo shaqo ama waxabarsho; ama b) adeecidda ama diidista dhaqankas ama xiriirkaas qof uu diido loo isticmaalo shay lagu xirayo go'aamada saamaynaya shaqaalaysiinta ama waxbarasha qofkaas; ama c) dhaqankas ama xiriirkas uu leeyahay ula jeeddo ama saamayn oo si wayn ama aan caqli–gal ahayn loogu farageliyo qofka shaqaalaysiintisa, ama waxbarashadiisa, ama abuuraysa jawi shaqaalaysiin ama waxbarasho oo cabsi galin, colaad, ama afxumo ka buuxdo. | | • | • | •* | |
| **Anshax–xumada galmada, Ka dartay**<br>Dhaqanka galmada ah ee keenaya xadgudubka waxa ka mid ah "isku tag galmo" ama fal galmo oo walba oo kale oo noqon kara fal dambiyeed haddii uu sameeyo qof weyn. | | | | •* | •* |
| **Xadgudub Galmo [1,2]**<br>Fal jireed oo gardaro ah ama xoog ama hanjabaad gardaro ama xoog taas oo ku lug leh taabashada qof kale qaybtiisa cawrada ah ama ku qasbida qofka inuu taabto qof walba qaybtiisa cawrada ah. | | | | •* | •* |
| **Labiska Ardayga**<br>Hab labiska ama is qurxinta shaqsiyadeed aanan waafaqsanayn siyaasadaha ama nidaamka looga dhaqmo iskuulka ama degmada. | • | • | | | |
| **Jees–jees iyo magac ku caayid**<br>Dhacdooyinka jees–jeeska ama magac ku caayidda ama ha laga lahaado ama yaan laga lahaan ujeeddo lagu dhaawacayo, bahdilaayo, ceebaynayo ama lagu cabsi galinayo dadka kale waa in wax laga qabto xitaa haddii aysan buuxin micnaha Cagajuglaynta. | • | | | | |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Isticmaal xumada Teknoolojiyadda/ Xadgudub**<br>Tan waxaa ka mid ah ku mashquulka moobilka xiliga casharka, ula dhaqmidda iPad–yada si taxadar la'aan ah iyo in aad wax dirsatid fasax la'aan iyadoo la isticmaalaya AirDrop. Ardaygu waxa uu si aan habboonayn u adeegsadaa tignoolajiyada, taas oo ka mid noqon karta (laakiin aan ku ekeyn) iPad, taleefan gacanta, aalad koronto oo shaqsi ah, kamarad, kombiyuutar, iyo/ama qalab kale. | • | • | • | | |
| **Tiknoolojiyad– Isticmaalka aan la ogolayn ama aan hoboonayn ee Degmada Agabka Tiknoolojiyadda**<br>Fal walba oo ku xadgudbaya sharciga Gudiga Waxbarashada ee Isticmaalka Tiknoolojiyadda iyo Xeerka Bedqabka ama ku dhaqaaqa isticmaal aan la aqbalin ama sharci darro ah oo lagu sameeyo qalabka kombiyuutarada ee degmada, nidaamyada, qadadka ama softiweer. | | • | • | •* | |
| **Xatooyo**<br>Qaadasho/haysasho aan la fasixin ee hantida iskuulka degmada iyo/ama hantida mid kale oo ka mid tahay laakiin aan ku koobnayn jaakado, aaladaha elektronikada ee qaliga ah, iwm. | • | • | • | •* | |
| **Hanjabaadyo, Qof ahaan [2]**<br>Muujin walba oo niyaddedu tahay in lagu sababo waxyeelo ama rabshad qof kale ama qof kale hantidiisa oo uu ka imaatay qof masaafo ahaan aad ugu dhow qofka loo hanjabaayo. Dhici–karnimada waxyeelada degdega ah ama rabshadaha waa inay jirtaa. Maamulayasha waa iney si taxadar leh u qiimeeyaan ujeeddada uu lahaa ardayga sameeyay muujinta waana iney tixgaliyaan waxyaabaha la soo ogaaday bogga 11. Ka hel tusaaleyaasha iyo hagidda qaamuuska ereyo-bixinta.. | • | • | • | •* | |
| **Hanjabaadyo, Aan Ahayn Qof ahaan [2]**<br>Muujin niyadeed oo walba ama af ha noqoto ama qoraal ee lagu sababayo waxyeelo ama rabshad qof kale ama qof kale hantidiisa taasoo hawada la soo mariyo ama qaab kale ku imaatay. Maamulayasha waa iney si taxadar leh u qiimeeyaan ujeeddada uu lahaa ardayga sameeyay muujinta waana iney tixgaliyaan waxyaabaha la soo ogaaday bogga 13. Ka hel tusaaleyaal iyo hagidba qaamuuska ereyo-bixinta. | • | • | • | •* | |
| **Hanjabaadyo, Ka Sii Daray[1] [2]**<br>Hanjabaad walba oo rabsho:<br>(i) la sameeyay iyadoo ujeedku yahay in la sababo cabsi xad–dhaaf ah ama walwal laguna dhex abuuro qayb wayn oo ka mida bulshada iskuulka;<br>(ii) la sameeyay iyadoo ujeedku yahay in la sababo daad–gurayn ama albaabada la iskugu dhufto dhisme, meel la iskugu yimaado, xaflad iskuul, ama baabuur;<br>(iii) la sameeeyay marar badan oo looga soo hor jeedo shaqsi ama urur; AMA<br>(iv) Muujin walba oo aanan buuxin qeexidda hanjabaad, laakiin loo sameeyay iyadoon dan laga lahayn khatarta, oona dhab ahaantii sababaysa cabsida xad–dhaafka ah, walwalka, daad–guraynta, ama xiritaanka lagu maleeyay (i) iyo (ii).<br><br>**Maamulayaasha tixgelinaya xad–gudubkan waa in ay si taxadar leh dib u eegaan qeexida hanjabaadda uu isticmaalo buug–gacmeedkan si loo go'aamiyo in xadgudubka ku habboon uu yahay Hanjabaado; Hanjabaado, ka sii daray; ama Luuqad, Afxumo leh..** Ka hel tusaaleyaasha iyo hagidda qaamuuska ereyo-bixinta. | | | | •* | •* |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

| Xadgudubyada Habdhaqanka iyo Heerka Ka Jawaabista | Heerarka | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| **Tubaakada iyo Aaladaha kale ee Tubaakada la xiriira, Haysashada/Isticmaalka**<br>Ardayda waa ka mamnuuc inay haystaan tubaakada, sigaarka elektaroonigga ah iyo qalabka kale ee tubaakada la xiriira. Fiiri Xeerka Guddiga 414.00 at **spps.org/board-policies**. | | • | • | | |
| **Ku xad gudubka dhulka iskuula, oo ay ku jirto Xiliyada Eryidda ama Joojinta**<br>ku sii nagaanshaha dhismaha dugsiga ama hawlaha dugsiga ka dib markii uu ku amray maamulaha dugsigu ama qof kale oo si sharci ah mas'uul ka ah xakamaynta dhismaha inuu ka tago iskuulka. | | | • | •* | |

***Ogeysii Xafiiska Amniga iyo Arrimaha Degdegga ah ee Office of Security and Emergency Management***

[1] Wixii macluumaad dheeri ah oo quseeya xuquuda biniadantinimo ee ardayga, fadlan kala xiriir Dhexdhexaadiyaha 651–767–8394. Dhexdhexaadiyaha wuxu ciiwaaanka 360 Colborne Street, Saint Paul, MN 55102.

[2] Kooxda u Gurmashada Ardayda waxaa laga yaabaa iney shir iskugu yimaadaan si ay u qiimeeyaan kalsoonida iyo heerka hanjabaad walba ama habdhaqan walba oo hanjabaad ah.

## Hannaanka Anshaxa

Dhammaan tallaabooyinka anshax–marinta waxa loo habayn doonaa iyadoo la raacayo xeerarka edbinta ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul, shuruudaha Xeerka Eryidda Caddalaadda ah ee Ardayga ee Minnesota, iyo sharciyada kale ee lagu dabaqi karo.

Arday walba oo ku xad–gudba Xeerka Anshaxa Ardayga ee Degmada oo dhan looga dhaqmo waxaa lagu qaadi karaa cawaaqibka lagu dhisay Buug–gacmeedka Xuquuqda iyo Waajibaadka.

Iskoolladu waxay isku dayi doonaan inay adeegsadaan nidaamyada iyo hababka ciqaabta ee aan ardayga laga saareynin iskoolka ka hor intaan la eryin ardayga, marka laga reebo halka ay u muuqato in ardaygu uu abuuri doono qatar degdeg ah oo la taaban karo oo ku aaddan naftiisa ama dadka ku xeeran ama dhismaha.

Ardey walba oo ku xad–gudba xeer ay ka dhalan karto ka joojinta dugsiga in ka badan hal maalin oo iskuul jiro wuxuu shir aan rasmi ahayn la yeelan doonaa maamulaha dugsiga.

Ardayda xilliga cayiman la eryay waxay fursad u heli doonaan inay muddada ardayga la eryay dhammaystiraan dhammaan shaqooyinka iskoolka ee loo diray  iyo inay helaan dhibco buuxda oo ku aaddan dhammaystir lagu qanco oo xagga duruusta loo diray ah.

Haddii joojinta la dheereeyo in ka badan shan maalmood oo iskuul jiro, maamulaha joojinta amaray waa inuu u soo bandhigo kormeeraha ama wakiilka sababta joojinta loo dheereeyay.

Ma jiro arday ay tahay in laga joojiyo iskuulka in ka badan 10 maalmood oo xiriir ah isla qaladkii uu sameeyay awgiis, marka laga reebo kolka arday uu abuuro khatar degdeg ah oo wayn naftiisa ama dadwaynaha ama hantida ka ag dhow, ama kolka degmada iskuulka uu ku jiro hanaan uu ku meel marinayo cayris, taasoo degmada iskuula ay ku siyaadin karto joojinta ilaa 15 bari xiriira oo iskuul jiro.

Haddii wadarta maalmaha ardayga laga saarayo iskuulka ay ka badan tahay 10 maalmood oo isugeyn ah ee sannad dugsiyeedka, degmada iskuulka waa inay sameeyaan isku dayo macquul ah oo ay kula shiraan ardayga iyo waalidka ama masuulka ardayga ka hor inta aan ardayga laga saarin iskuulka. Ula jeedada shirkaan waa in la isku dayo in la go'aaamiyo baahida uu u qabo qiimayn ama adeeegyo kale ama haddii waalidka ama masuulka uu oggolyahay in ardayga la qiimeeyo ama la baaro si loo go'aamiyo haddii ardaygu u baahanyahay daawayn xanuunada dhimirka. Haddii waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah uu fasax ka haysto, degmada iskuulka waxay diyaarin kartaa baadhis caafimaadka dhimirka ah ee ardayga. Degmadu loogama baahna iney bixiso qarashka baarista caafimaadka dhimirka.

Majiro arday laga reebi doono ama laga cayrin doono degmada iskuulka iyadoon la siin ogaysiis iyo fursad uu ku helo dhagaysyi si waafaqsan xeerka Minnesota.

## Habraacyada Adeegyada Waxbarashada Kale

Haddii ardayga laga joojiyo iskoolka in ka badan shan maalmood oo isku xigta, ardaygu wuxuu xaq u leeyahay adeegyo kale oo waxbarasho oo u oggolaanaya ardayga inuu horumar ka gaaro buuxinta shuruudaha qalin-jabinta. Guud ahaan, Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay bixiyaan adeegyo waxbarasho oo ka duwan kuwa caadiga ah sida ku xusan jadwalka soo socda:

| Muddada Joojinta | Adeegyada la Bixiyo | Maamulaha Iskuulka ama Waajibaadka Wakiilka | Waalidka/Masuulka Waajibaad |
|---|---|---|---|
| Ilaa shan bari xiriira oo iskuul jiro | shaqada fasalka ee hadda iyo shaqada guriga waa la heli doonaa, hadday suurto gal tahay. | Ku tala gal soo aruurinta shaqada fasalka iyo shaqada guriga macallimiinta. | Ka soo qaad shaqada fasalka iyo shaqada guriga maamulaha iskuulka ama ku tala gal in gurigaada boostada ay kuugu keento. Soo celi shaqada oo la soo dhameyay adoo ku beegaya soo noqodka ardayga. |
| Ilaa shan bari xiriira oo iskuul jiro | shaqada fasalka ee hadda iyo shaqada guriga waa la heli doonaa ugu dambayn maalinka lixaad laga soo bilaabo maalinkii joojinta. | Ku tala gal soo aruurinta shaqada fasalka iyo shaqada guriga macallimiinta. | Ka soo qaad shaqada fasalka iyo shaqada guriga maamulaha iskuulka ama ku tala gal in gurigaada boostada ay kuugu keento. Ku soo celi shaqada oo dhamaystiran maamulaha iskuulka. |
| Ilaa 15 maalmood xiriir ah oo iskuul jiro (kaliya cayris soo socda ama marka ardaygu ka dhigan yahay khatar la taaban karo oo degdeg ah) | Adeegyada loogu tala galay inta ardaygu ku xanniban yahay guriga waa in laga shaqeeyaa inay bilaabmaan ugu dambayn maalinta iskuulka 11aad. | Ku tala gal adeegyada loogu tala galay inta ardaygu ku xanniban yahay isla marka la go'aamiyo in ardayga loo gudbiyo cayrin ama beddel maamul. | Ka caawi maamulaha iskuulka inuu hagaajiyo jedwal bixinta adeegyada loogu tala galay inta ardaygu ku xanniban yahay. |

Jadwalkani kama diidayo maamulayaasha dugsiga inay bixiyaan adeegyo waxbarasho oo kala duwan oo u oggolaanaya ardayga inuu sii socdo sifo uu u buuxiyo sharuudaha qalinjabinta. Tallaabo walba oo joojin ah waxay dhici karta in ay ku jirto qorshe ah in ardayga dib loo qaabilo. Qorshaha dib u qaabilidda waxaa ku jiri doona, sida ku habboon, bixinta hirgelinta adeegyada waxbarasho ee beddelka ah marka dib loo qaabilo oo aan loo isticmaali karin in lagu dheereeyo joojinta hadda.

Maamulaha iskuulka wuxuu masuul ka yahay xaqiijinta isku dayga iskuulka uu ku bixinayo adeegyada kale ee waxbarasho ee loo baahanyahay. Waaliddiinta/Masuuliyiinta sidoo kale waxaa saraan waajibaadka kor lagu xusay. Waaliddiinta leh tabasgooyin ku saabsan u hoggaansanaanta dugsiga ee habraacyadan waa inay si degdeg ah ula xiriiraan maamulaha dugsiga ama madaxdiisa sida ugu dhaqsiyaha badan.

Macluumaad dheeraad ah oo la xiriira ardayda waxbarashada gaarka ah: SPPS waxa ay lahaan karaan waajibaad dheeraad ah oo ku aaddan ardayda waxabrashada gaarka ah kuwaas oo halkan aan lagu sharrixin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda ardayda waxbarashada gaarka ah, ka eeg Ogeysiiska Ilaalinta Nidaamka Xuquuqda Waalidka ee Ardayda Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiyada Dadweynaha halkan **education.mn.gov/MDE/dse/sped/proc/** ama la xiriir maamulaha dugsiga, maamulahaaga kiiska ardayga ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah halkan 651–767–8321.

## Kooxda Gurmadka Ardayga

Kooxda Gurmadka Ardayga (SRT) waxay la tacaalaan dhibaatooyinka la xiriira anshaxa ardayga iyo iskuulku inuu is beddel yar ku samayn karo: (1) ardayda aan u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah; iyo (2) ardayda helaysa adeegyada waxbarashada gaarka ah kuwaas oo anshaxooda ay go'aamiyeen kooxda ku haboon in aanay muujin naafonimada ardayga. Haddi dhaqanka laga hadlayaa uu yahay dhaqan ardayga helaya adeegyada waxbarashada gaarkas ah iyo habdhaqankaas la go'aamiyay inuu yahay muujinta naafanimada ardayga, kooxda IEP – ee maahan SRT – waa inay wax ka qabtaan anshaxaas iyo jawaabta dugsiga si waafaqsan gobolka iyo sharciga federaalka.

Maamulaha ayaa magacaabaya guddigan oo inta badan ay ku jiraan maamule, lataliye, macallimiin, shaqaale bulsho, kalkaaliye caafimaad, iyo/ama shaqaale kale (5–7 xubnood). Guddigu waa ay kulmi doonan si ay uga fiirsadaan dhibaatooyinka edbinta iyo anshaxa ee ardayda uu u soo gudbiyay maamulaha ama qofka loo xilsaaray (gudoomiyaha) waxayna u soo jeedinayaan maamulaha tallaabooyinka sixitaanka, sixitaanka, ama edbinta ee ay u aragto in ay ku jirto danta ardayda iyo dugsiga. Si looga fogaado u hoggaansanaan la'aanta sharciga Minn. Stat. § 121A.41 ee ka imaata in arday la joojiyo in ka badan toban maalmood, guddigu waa iney kulmaan oona go’aan ka gaaraan ama soo jeedin sameeyaan muddo laba maalmood oo shaqo jirto gudahood oo ka soo bilaabata goorta dhacdada. Marka go'aan weyn ama talo ku saabsan arday la tixgelinayo, waaliddiinta waa in lagu martiqaadaa inay joogaan kulanka SRT ama inay soo gudbiyaan bayaan qoran. Waaliddinta waxay ikhtiyaar u leeyihiin iney shirka SRT u soo wataan qof dheeraad ah.

Maamuluhu wuxuu dib u eegaa talooyinka SRT wuxuuna sameeyaa go'aanka kama dambaysta ah. Haddii go'aanku yahay beddelaad iskool, cayrin ama ka saaridda iskoolka, maamuluhu wuxuu soo gudbin doonaa waraaqaha cayrinta/beddelidda maamulka ee loo baahan yahay 24 saacadood gudahooda marka uu helo talada SRT waxaana loo gudbin Guddiga Taageerada Nidaamyada Degmada ee wakiilada waaxaha si dib u eegis iyo go'aan dheeraad ah loogu sameeyo. Guddigan Taageerada Nidaamyada Degmada wuxuu ka kooban yahay maamulka Degmada iyo shaqaale ka kala yimid meelo iyo aragtiyo kala duwan. Dembiyada Heerka 5, maamuluhu wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah ugu gudbiyo gudbinta cayrinta ama ka saarida si toos ah Guddiga Taageerada dib u eegista iyo go'aanka iyada oo aan tallaabo SRT la qaadin.

Haddii waaliddiinta/masuuliyiinta rabaan, waxay ku soo gudbin karaan bayaan qoran saddex maalmood gudahooda ka dib markay helaan ogaysiiska ee talada maamulaha ama talada SRT ee wareejinta, cayrinta ama ka saarida. Maamuluhu wuxuu ku dari doonaa qoraalkas soo jeedinata uu u gudbinayo Guddiga Taageerada Nidaamyada Degmada.

## Qiimaynta Hanjabaadda

Kooxda Qiimaynta Hanjabaadda ayaa qiimayn doonta hanjabaadaha rabshadaha leh ee loo gaysto ardayda, shaqaalaha, ama dadka kale iyo dhaqamada hanjabaada ah, oo ay go'aamiyaan suurtogalnimada in qofku uu qaado hanjabaad. Ula jeedada qiimaynta hanjabaadu waa in lagu kooxda qiimaynta hanjabaada ku salaysan goobta iyada oo loo marayo habka xog ururinta kaas oo keeni doona qorshe kormeerid iyo taageero ah si kor loogu qaado badbaadada ardayda. Xafiiska SPPS ee Amniga iyo Maareynta Degdegga ah (SEM) waa inuu bixiyaa tababaro, agab, iyo kaalmo goobta ah marka la codsado.

## Nidaamyada Guddiga Taageerada

Nidaamyada Guddiga Taageerada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay u jiraan ujeeddada hubinta in ardayda SPPS laga diiwaan geliyo jawi ku habboon oo waxbarashadu ka dhaci karto. Maamulayaashu waxa ay codsan karaan in arday maamul ahaan laga soo wareejiyo dugsigooda iyaga oo raacaya SRT oo horey loogu qayaxay dokumentigaan. Waa mas'uuliyadda Guddiga Taageerada Nidaamyada Degmada si ay u go'aamiyaan tallaabada ugu habboon, ha noqoto oggolaanshaha codsiga beddelka iyo xulashada goobta cusub ee diiwaangelinta, ama diidmada codsiga beddelka. Nidaamyada Guddiga Taageerada waxay isticmaalaan shuruudo kala duwan, oo ay ku jiraan Buug–gacmeedka Xuquuqda iyo Waajibaadka iyo sidoo kale Xeerka Gobolka Minnesota, talooyinka SRT, iyo dhaqankii hore si loo go'aamiyo fariisinta ku habboon ardayga. Nidaamyada Guddiga Taageerada waxay shiraan isbuc walba inta lagu jiro sanad dugsiyeedka waxayna ku dadaalaan hubinta in codsi walba la hubiyay iyadoo maskaxda lagu hayo danaha ugu wanaagsan ee ardayga, qoyska, iyo shaqaalaha.

# Hannaanka Anshaxa: Ardayda Naafada ah

## Ardayda Naafada ah/Qaybta 504 Ardayda

Ardeyda ay dabooleyso Qeybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 waxaa laga yaabaa in lagu edbiyo habdhaqankooda la xiriira naafonimadooda, haddaysan edbintu keenayn isbeddel weyn ee fariisinta ah. Ardayga u qalma ee naafada ahi lagama yaabo in laga joojiyo in ka badan iskugeyn 10 maalmood oo dugsiyeedka iyada oo aan la helin caddaynta ay sameeyeen kooxda 504 ee ardayga.

## Ardayda Naafada ah iyo Ardayda leh Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP)

Kolka ardayga naafada ah laga joojiyo dugsiga shan maalmood oo isku xigta ama ka dib maalinta isugaynta 10aad ee sanad dugsiyeedka, kooxda IEP waa inay kulmaan si ay u qabtaan kulanka go'aaminta wax soo if-bixista. Kooxda ayaa go’aamin doonta haddii habdhaqanku la xiriiro naafanimada ardayga. Kooxdu waxay u baahan karta iney samayso Qiimayn Habdhaqan Shaqaysa (FBA) oona ay qoraan qorshe wax ka qabasho ee habdhaqanka si ardayga loogu taageero iskuulka.

Shirkaas waa inuu dhacaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah, laakiin wax aan ka badnayn 10 maalmood ka dib maalinta lixaad ee isku xigta ee joojinta ama marka maalinta tobnaad ee iskugeynta ah ee joojinta ay dhaafto. Eryidda hal maalin dugsiyeed ama ka yar waa maalin ka joojinta haddii ardayga naafada ah uusan helin waxbarashada caadiga ah ama waxbarashada gaarka ah inta lagu jiro xilligaas eryidda. Ardayga naafada ah waxaa la siin doonaa adeegyo waxbarasho oo beddelaad ah ilaa xad ay joojintu ka badato shan maalmood oo isku xigta oo iskuul jiro.

Ka hor intaanay bilaabin cayrinta ama ka saarida, degmada, xubnaha ay khusayso ee kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardayga, iyo waalidka ardaygu waa in, si waafaqsan sharciga dawlada dhexe, go'aamiyaan in ardayga dhaqankiisu uu sababay ama uu xidhiidh toos ah oo la taaban karo la leeyahay naafanimada ardayga iyo haddii dhaqanka ardaygu uu ahaa mid toos uga dhashay guuldarada fulinta barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardayga. Marka ardayga naafada ah ee leh barnaamijka waxbarashada gaarka ah laga saaro ama laga saaro anshax–xumo aan ahayn muujinta naafanimada ardayga, degmadu waa inay sii waddaa bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha inta lagu jiro ka saarida ama ka saarida. Minn. Stat. § 121A.43.

### Tilmaamaha Anshaxa ee SPPS ee Ardayda Naafada ah sida hoos timaada Sharciyada Gobolka iyo Xeerarka Federaalka

(Marka ardayga naafada ah loo tixgeliyo joojin ah inuu iskuulka banaanka ka joogo, maareeyaha kiiska IEP waa in lala tashadaa ka hor inta aan go'aan kama dambays ah la gaarin. Tusmeeyahani mahan mid u dhigma dhamaan xeerarka waxabarashada gaarka ah. Mar walba fiiri xeerarka gobolka ama kuwa federaalka si wax walba kuugu cadaato.)

| Inta sanad dugsiyeedka lagu jiro, ardayga naafada ah waa la saari doonaa[1] | Shirka Kooxda IEP baa loo Baahan yahay | Go'aanka Caddaynta ayaa loo Baahan yahay: Habdhaqanka mala xariiro naafonimo ama IEP mala dhaqangelin sida kuqoran. 34 C.F.R. § 300.530 (e) | Qiimaynta Habdhaqanka Waxqabadka Ardayga (FBA) ama Dib-u-eegis ayaa loo Baahan yahay 34 C.F.R. § 300.530 (f) | Beddelka Fariisinta ee Anshaxa awgiis: Qodob sharci ah oo 11 maalmood oo xiriir ah ama isku geyn ah ee saarintaanka. Waa in la siiyo waalidka Xuquuqda & Ilaalada Habraaca. 34 CFR § 300.536 | IAES): Goob ka duwan iskoolka ardayga ee u oggolaanaysa ardayga naafada ah inuu: (1) sii wado kaqeybgalka manhajka waxbarashada guud, (2) inuu sameeyo horumar ku aaddan buuxinta himilooyinka iyo ujeeddooyinka IEP iyo (3) inuu helo adeegyo loogu talagalay in looga hortago soo noqnoqoshada hab-dhaqanka aan wanaagsaneyn. Go 'aaminta IAES ku habboon baahida ardayga waxaa sameeya kooxda IEP ee ardayga iyadoo arday walba loo eegayo goonidiisa. 34 CFR §300.530(d)(1)-(5) |
|---|---|---|---|---|---|
| Waxaa loo saaray 1–10 maalmood iskugeyn ah[2, 3] | MAYA | MAYA | MAYA | MAYA | Ma Khusayaso |
| Waxaa loo saaray 6 maalmood AMA KA BADAN xiriir ah[2, 3] | HAA | MAYA | HAA, haddii joojintu ay ka badan tahay 10 maalmood oo xiriir ah oo habdhaqanku uu ahaa mid muuqda[3] | MAYA | SPPS waa in ay ku bixiso adeegyo waxbarasho oo ka duwan goobta IAES ka 6 maalmood ama ka badan oo isku xigta oo saaritaan ah. Tirada maalmaha saarista waa inay raacdaa Buug–gacmeedkan Xuquuqda & Waajibaadka ee SPPS ee ku aaddan hab-dhaqanka uu ardaygu muujiyay. |
| Waxaa loo saaray 11 maalmood iskugeyn ah[3] | HAA | HAA u dheh eryid walba ama joojin walba inta ka harsan sanad dugsiyeedka | HAA (ama dib u eeg FBA da jirta hada) | HAA | SPPS waa inay bixiso adeegyo waxbarasho oo kale IAES ka dib cayrin walba ama ka joojinta inta ka dhiman sanad dugsiyeedka. Tirada maalmaha saarista waa inay raacdaa Buug–gacmeedka Buug–gacmeedkan Xuquuqda & Waajibaadka ee SPPS ee ku aaddan hab-dhaqanka uu ardaygu muujiyay. UMA isticmaali karo ilaa 45 maalmood ilaa mid ka mid ah 3da dabeecadood ee hoose mid ka mid ah ay dhacdo "xaalad gaar ah". |
| La galiyay joojinta iskuul dhexdiisa[4] | MAYA | MAYA | MAYA | MAYA | Ma Khusayaso |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Waxaa loo saaray marxalado qaas ah[6] ( Dhacdo Anshax oo dhab ah) | HAA | HAA | Dhaqanka ugu wacan | HAA | Goob Waxbarasho Kale oo Ku Meel Gaar ah (ilaa 45 maalmood oo dugsiyeed) ayaa la isticmaali karaa oo keliya haddii ardayga naafada ah uu ku sameeyo waxyaabaha soo socda dugsiga, dhismaha dugsiga ama hawlaha dugsiga (34 CFR § 300.530(g)): (1) Sitaa hub khatar ah ama haysta hub khatar ah (oo lagu qeexay hub, qalab, wax–gooya, shay, ama walax, nool ama aan noolayn, kaas oo loo isticmaalo, ama awood u leh, keenista dhimasho ama dhaawac jireed oo halis ah, marka laga reebo in qodobka noocaan ah uusan ku jirin mindi jeebka la gashto oo leh daab ka yar 2 ½ inji oo dherer ah) 18 USC §930(g)(2) (qeexidda); (2) Si bareer ah u haysto ama isticmaalo daroogo sharci darro ah, ama iibiya ama dalbada iibinta walaxda la kantaroolay (34 C.F.R. § 300.530 (qeexidda)); ama (3) Dhaawac jidheed oo halis ah u gaysta qof kale (oo lagu qeexay khatar weyn oo dhimasho ah; xanuun jidheed oo aad u daran; qaab–beddelid wakhti–dheer oo muuqda; ama luminta ama daciifnimada wakhti–dheer shaqada xubin jidhka ah, xubin ama maskaxda) 18 USC §1365 (h)(3) ( qeexid). Isbeddelkan 45–ka maalmood ah ee fariisinta ayaa laga yaabaa in la hirgeliyo iyada oo aan loo eegin haddii dhaqanku yahay muujinta naafonimada ardayga. |

[1] Ka saarida waxaa ka mid ah cayrin (wax ka yar maalin dugsi) iyo joojin (maalin dugsiyeed buuxa). Dhammaan ka saaridda waxa ay ku xisaabsan yihiin maalmaha ka saaridda. Tusaale, 11 cayrin waa 11 maalmood iskuxiga oo cayrin ah.

[2] Haddii ka saaridda ay keento wadarta maalmaha isugaynta iskuxiga ee sannad dugsiyeedka in ka badan 10 maalmood, eeg "laga saaray 11 maalmood dugsiyeed oo isku xiga." Minn. Stat. §§ 121A41, subd.10, 121A.43.

[3] Haddii arday naafo ah uu gaadiidka ku lahaa barnaamijka IEP oona laga saaro baska dugsiga, maalmaha laga saaray baska waa in loo xisaabiyaa dhinaca 6 maalmood ama kabadan oo isku xiga ama 11 maalmood oo isku xiga oo ka saarid ah ilaa degmada dugsiga ay ka bixiso gaadiid kale mooyaane.

[4] Ka joojinta dugsiga dhexdiisa ah looma tixgeliyo ka saarid waa haddii ardaygu awooday fursada uu kusii wadanayo inuu si ku habboon usii horumariyo manhajka guud, uu sii wato inuu qaato adeegyada barnaamijka IEP oo uuna sii wato inuu kala qeybqaato ardayda aanan naafada ahayn ilaa xadka ay ka yeelan lahaayeen meeleynta hadda jirta.

[5] Adeegyada waxbarashada ee kale waxaa ku jiri laakiin aanay ku koobneyn, barid gaar ah, manhaj la hagaajiyey, waxbarid la hagaajiyey, hagaajimaha kale ama la–qabsi, waxbarasho lagu gudbinayo warbaahinta elektaroonigga ah, adeegyada waxbarashada ee gaarka ah sida lagu tilmaamay qiimaynta habboon, waxbaridda guriga, kormeerka shaqada–guri , ama diiwaangelinta degmo kale ama xarun waxbarasho oo kale oo loo doortay inay oggolaato ardayga si loo horumariyo buuxinta heerarka qalin–jabinta inkastoo ay tahay goob kale. Minn. Stat. § 121A.41, subd. 11

[6] Shaqaalaha dugsiga waxa ay tixgelin karaan duruufo walba oo gaar ah oo ku saleysann kiisba kiis marka ay go'aaminayaan in beddelka meeleynta, uu waafaqsan yahay shuruudaha kale ee ku jira qeybtan, uu ku habboon yahay canug naafo ah oo ku xadgudbay xeerka anshaxa ardayga. "Shuruudaha kale ee ku jira qeybtan" ma oggolaadaan 45 maalmood iskuul oo ku meel gaar ah ee goob kale marka laga reebo sida hoos timaada saddexda duruufood ee gaarka ah. 34 C.F.R. § 300.530(g).

## Tilmaamaha Ammaanka Baska ee Saint Paul Public Schools

Dugsiyada Saint Paul Public Schools waxay adeegyo gaadiid siiyaan ardayda dhigato SPPS iyo barnaamijyo kale ama aaddo iskoollada aan aheyn kuwa dadweynaha, iyo qaar ka mid ah iskoollada jaartarka ah, ee ku yaal gudaha Magaalada Saint Paul. Gaadiidka waxaa la siiyaa ardayda buuxisa shuruudaha u-qalmidda ee ku xusan Xeerka Guddiga Waxbarashada ee U-qalmidda Gaadiidka Ardayda (Board of Education Policy 707.00, Eligibility for Student Transportation).

Degmada SPPS ayaa mas 'uul ka ah ka warhaynta ardayga isla markii ay soo galaan baska subaxdii ilaa iyo xilliga ay ka degayaan baska, ama xilliga la sii daayo oo ay raacayaan waalidka/masuulka. Darawaliinta baska iyo shaqaalaha iskoolka waxay mas 'uul ka yihiin inay ardayda oo dhan baraan, tusiyaan, isla markaana dabaqaan hab-dhaqanka wanaagsan iyo filashooyinka la iska doonayo. Waaliddiinta/mas 'uuliyiinta waxay masuul ka yihiin inay hubiyaan in ardaydu ay yaqaannaan oo fahansan yihiin xeerarka iyo habdhaqanka laga filayo inta ay baska saaran yihiin. Baska dugsiga iyo goobaha uu basku istaago waxaa loo tixgeliyaa inay qayb ka yihiin deegaanka dugsiga. Haddii ardaygu ku kaco dhaqan aan habboonayn baska, dugsigu wuxuu qaadi karaa tallaabooyin maamul.

Ardayda sii daa'into habdhaqanka xun waxay waayi karaan mudnaanta raacidda baska, taasoo ay ku jirto raacidda gaadiidka baska xilliga la aadayo safarada gaaban ee iskoolka. Maamulaha dugsiga ayaa go'aamin doona tallaabooyinka ku habboon iyadoo lagu salaynayo tilmaamaha siyaasadda.  "Ogaanshaha nooca ficilka" ayaa dhici doona si loo helo waxa sababay habdhaqanka ka hor inta aan la go' aamin luminta mudnaanta raacidda baska ee ardayga naafada ah (Minn. Stat. § 121A.43(d)). Haddii ay dhacdo in la lumiyo mudnaanta raacidda basaska, waxay taasi ku taxalluqi doontaa dhammaan adeegyada basaska ee SPPS, haddii uusan shaqaalaha iskoolka war kale sheegin.

Marka loo eego Xeerka Guddiga Waxbarashada ee SPPS (SPPS Board of Education Policy), arday walba oo lumiyay mudnaanta raacidda baska (sababo la xiriira habdhaqan aan la aqbali karin awgood) waa inuu ka qeybgalaa Fasalka Bed-qabka Baska ee Iskoolka (School Bus Safety Class) oo uu si guul lehna u muujiyaan fahankooda ku saabsan bed-qabka baska iskoolka. Waaxda Gaadiidka ayaa iskoolka ka caawin doonta fududeynta tababarkan.

Qaanuunka Xeerka Minnesota 121.59 wuxuu dhigayaa in adeegga gaadiidku uu yahay mid mudnaan lagu helo ee uusan ahayn xuquuq, adeeggaas oo la siiyo ardayga iyadoo lagu saleynayo habdhaqanka saxda ah sida ku xusan (laakiin aan ku xaddidnayn) heerarka habdhaqanka Degmada ee hoos ku qoran:

### Tilmaamaha Habdhaqanka iyo Tallaabooyinka Maamulka PreK-12[aad]

**Xadgudubyada Heerka Koowaad (I)**

1. Candhuuf-tufidda
2. Sharqan xad dhaaf ah oo laga sameeyo gudaha baska
3. Ciyaarta is-qabqabsiga iyo gees-isku-riixidda ah, habdhaqan xumo, habdhaqan carqaladeynayo dadka kale
4. Wax cunidda, cabitaanka, tuuridda qashin ee baska gudihiisa ah
5. Ka tagidda kursiga, istaagidda iyadoon la heysan ogolaanshaha darawalka, socodka hore iyo gadaal ee gudaha baska
6. Si xun u isticmaalidda weelasha dareeraha ku jiraan sida dhalooyinka biyaha, kuwa cabitaanka fudud, iwm ee qaab walba leh
7. Af-xumada, dhibaataynta iyo xadgudub afka laga sameeyo, sameynta dhaqdhaqaaqyada foosha xun ama haysashada sheeyaad aan la aqbali karin
8. Ka been-sheegidda aqoonsiga, diidmada inuu cunuggu sheego magaca ardayga
9. Raacidda bas aan kaagii aheyn ama isticmaalidda meesha baska istaago oo aan taada aheyn
10. Furitaanka daaqadda adigoo dhaafinaayo khadka ammaanka ah/xadka dhexe ee macquulka ah
11. Raacidda ama isku dayga inaad raacdid baska adigoo lumiyay mudnaanta raacidda baska
12. U-hoggaansanaan la'aanta amarka darawalka, shaqaalaha saaran baska, dadka qaabilsan ammaanka baska
13. Si xun u isticmaalidda tiknoolojiyadda

**Tallaabooyinka Maamulk : Xadgudubyada Heerka Koowaad (I)**

Darawalliinta basasku waxay la xiriiri doonaan oo ay la shaqeyn doonaan maamulayaasha taasoo quseysa habdhaqan-xumada ardayga.

| Xadgudubyada Heerka Koowaad (I) | Cawaaqibka laga Mudanayo Xadgudubka |
|---|---|
| **Xadgudubka Koowaad:** | Digniin |
| **Xadgudubka Labaad:** | 1-5 maalin oo la lumiyo mudnaanta raacidda baska |
| **Xadgudubka Saddexaad:** | (1) ugu yaraan 5-10 maalmood oo la lumiyo raacidda mudnaanta baska<br>(2) Luminta dhammaan adeegyada gaadiidka<br>(3) Kulan u dhexeeyo Waalidka/Maamulaha/Shaqaalaha Qaabilsan Hawlgallada Ammaanka Gaadiidka |
| **Xadgudubka Afaraad:** | Luminta guud ee suurtagalka ah ee ku aaddan isticmaalka adeegyada gaadiidka |

**Xadgudubyada Heerka Labaad (II)**

1. Ardayga oo iska soo laadlaadsho daaqadda, arday fadhiyo daaqadda oo ku qaylinaya bannaanka
2. Ku tuuridda ama xooridda shay walba ama ha noqoto gudaha baska ama bannaanka baska
3. Handadaad iyo/ama weerar jireed/xoogsheegasho qof walba lagu sameeyo
4. Af-xumo iyo hanjabaado ku wajahan darawalka/shaqaalaha iskoolka
5. Haysashada iyo/ama isticmaalka tubaakada, sigaarka elektarooniga ah ama walxaha kale ee la xakameeyo
6. Burburinta/halleynta qayb baska ka mid ah (waxaa laga yaabaa inay u baahato lacag-bixin magdhow ah)
7. Qabsashada, ama isku dayga la qabsado, qayb ka mid ah bannaanka baska
8. Xadgudub walba oo ku aaddan "Aagga Khatarta" ah ee la dhaho “Danger Zone” (waa inuu ardaygu 10 tallaabo ka fogaadaa gadaasha iyo horada baska iskoolka si darawalku uu u arko ardayga mar walba)
9. Shididda taraqa, kan sigaarka lagu shido, ama shay walba ama walax walba oo guban kara
10. Gelitaanka ama ka degidda baska iyadoo la isticmaalayo albaabka arrimaha degdegga ah iyadoon sidaas la is-farin
11. Farogelinta qalabka baska ku rakiban.
12. Haysashada ama ku hanjabidda hubka, walxaha qarxa, walxaha olola, iwm.
13. Haysashada ama isticmaalka qalinka (laser) iftiinka guduudan sameeyo/afkiisu nalka guduudan leh
14. Xadgudub walba oo lagu dhex sameeyo bas walba xilli ka baxsan xilliga caadiga ah ee gaadiidka loo raaco loogana yimaado iskoolka (sida xilliyada ciyaaro jiraan, safarka gaaban ee waxbarasho, basaska qaaska ah ee iskoolku marmar soo ijaarto, iwm.) oo waxay xudgudubyadaasi keeni doonaan ciqaabta ugu yar ee Xadgudubka Koowaad ee Heerka Labaad (II) ee la dhaho Class II First Violation.

**Tallaabooyinka Maamulk : Xadgudubka Heerka Labaad (II)**

Darawalliinta basasku waxay la xiriiri doonaan oo ay la shaqeyn doonaan maamulayaasha taasoo quseysa habdhaqan-xumada ardayga.

| Xadgudubyada Heerka Koowaad (II) | Cawaaqibka laga Mudanayo Xadgudubka |
|---|---|
| **Xadgudubka Koowaad:** | 5 maalin oo la lumiyo mudnaanta raacidda baska |
| **Xadgudubka Labaad:** | 10 maalmood oo la lumiyo mudnaanta raacidda baska |
| **Xadgudubka Saddexaad:** | (1) ugu yaraan 10 maalmood oo la lumiyo raacidda mudnaanta baska<br>(2) Luminta dhammaan adeegyada gaadiidka<br>(3) Kulan u dhexeeyo Waalidka/Maamulaha/Shaqaalaha Qaabilsan Hawlgallada Ammaanka Gaadiidka |
| **Xadgudubka Afaraad:** | Luminta guud ee suurtagalka ah ee ku aaddan isticmaalka adeegyada gaadiidka |

## Tilmaamaha loogu talagalay iPad–yada iyo Qalabyada Lumay / La Xaday/ Waxyeeloobay Dulmarka Guud ee Buug–gacmeedka iPad–ka

Buug–gacmeedka iPad–ka waxa uu dhigayaa in kolka ardaygu iPad–kiisa lumo, la xado, ama si ula kac ah loo waxyeeleeyo, cawaaqibka ka dhalan kara waxaa ka mid ah luminta mudnaanta uu u leeyahay in uu iPad u qaato guriga iyo tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka habboon ee iPadka. Cawaaqibtan waxaa lagu dabaqi doonaa haddii:

- Shaashadddu jabto kolka si ula kac ah loo tuuro ama loo sii daayo;
- La warfiyo boorso ay ku jirto aaladdu; lagu istaago aaladda;
- Si ula kac ah aaladda loogu dul shubo dareere; lagu garaaco aaladda qof kale ama shay kale;
- Waxyeello loo gaysto aalad usan saarnayn galkii ay degmadu bixisay;
- La cilladeeyo qaybaha gudaha ku jira ee iPad ka;
- Lagu sameeyo waa ka beddelid aan la oggolayn nidaamka uu ku shaqeeyo, oo la yaqaan jabsashada aaladda;
- La waayo ama la waxyeelleeyo xarigga dabka, madaxa dabka lala galiyo ee cabbirkisu yahay 12W, iyo galka.

### Khidmadaha/Ganaaxyada lama oggola

Xeerka Gobolka Minnesota qaybaha 123B.34 ilaa 123B.39 ayaa nidaaminaya khidmadaha laga yaabo in dugsiyada dadwaynaha ay ka qaadaan ardayda iyo qoysaska. Iyada oo ku saleysan tarjumaadda Waaxda Sharciga ee Degmada SPPS ee qaybahan, goobuhu waxay codsan karaan, maahan ka dalbadaan, qoysaska inay bixiyaan agabka dhaawacan ama maqan ama iPads. Dhaqaale walba oo la ururiyo waxaa habeeya karraaniga dugsiga hadiyad ahaan waxaana lagu shubaa xisaabta guud ee dugsiga. Wakhtil xaadirkan, ma jiraan wax ganaax ah iPad–yada maqan ama waxyeelloobay. Tilmaamayaashani waxay raacayaan qawaaniinta gobolka MN ee ururinta ganaaxyada iyo khidmadaha.

- Ma jiraan wax ganaax ah oo la dalban karo. Qoysaska waxaa laga yaabaa in laga codsado inay wax ku biiriyaan kharashyada wax beddelka ah.
- Wax ganaax ah loogama baahna iPadka sababtoo ah heshiisyada kiraynta ee Apple iyo qawaaniinta gobolka MN.

### Dhammaadka Sannad–dugsiyeedka Soo–Celin La'aanta

Cawaaqib ahaan ku guuldaraysiga in la soo celiyo iPad yada iyo agabyada, dugsiyadu ma diidi karaan helitaanka shahaado ama buundo xisaabin..  Waxaa laga yaabaa iney xaddidaan ka qayb galka hawlaha sannadka dhammaadka sida:

- Dalxiiska iskuulka
- Dabaaldegga safarka bannaanka

### Kor u qaadida Hab–dhaqanka Wanaagsan & Maamulida iPadka

Dugsiyadu waxay kor u qaadeen oo ay dhiirigeliyeen daryeelka habboon ee iPad–ka iyo maamulka iyada oo loo marayo doorashooyinka iyo xeeladaha soo socda. Fadlan u isticmaal xulashooyinka hoose hage iyo dhiirigelin ahaan markaad habaynayso xalalka dabooli doona baahiyaha ardayda dhismahaaga.

- Si firfircoon uga qayb galka maamulayaasha dhismaha, maamulka iyo kooxaha PBIS marka aad wax ka qabanayso aaladaha lumay/waxyeelloobay/ maqan.
- Abuur ama wax ka beddel xeeladda PBIS oo ay tahay ardaygu inuu buuxiyaa si uu dib ugu helo mudnaanta.
- Xaddid ama yaree ogolaanshaha guriga–u–qaadashada iPadka.
- Abuur siyaasadaha "Hubinta" ee Xarunta Warbaahinta ama meel la mid ah si loo xaddido helitaanka aaladaha aan la kormeerin.
- Suurtagali Xaddidaadaha ama sifooyinka kale ee maamulka.

- Dhamaystirka "Warbaahinta Dareenka Guud" ama qaybaha kale ee intarneedka ee kor u qaadaya habdhaqanka wanaagsan iyo isticmaalka anshaxa ah ee qalabka dhijitaalka ah.

## Siyaasadaha Amniga ee Aaladaha Lumay/Laxaday/ Waxyeeloobay

- Marka iPad loo diiwaangeliyo inuu "Lumay" ama "Laxaday" astaanta maareynta sugitaanka amniga ayaa lagu dajiyaa taasoo kadhigaysa iPad–ka mid aan u lahayn faa'iido in dib loo iibsado ama si shakhsi loo isticmaalo.
- Ka dib marka ipad–ka SPPS "la masaxo", shaashada waxa ay soo badhigi doontaa "Hello (Waad Salaaman Tahay" waxa ayna u muuqaneysaa in lagadan karo ama loo isticmaali karo si shakhsi ahaaneed.
- Inta lagu jiro habka lagu dajinayo, astaanta maareynta SPPS ayaa laga shaqeysiin doonaa waxa ayna weydiin doontaa aqoonsiyada Hagaha Furan. Dejinta iPad–ka masii socon karo ilaa aqoonsiyada ciwaano furan oo ansax ah la bixiyo.
- Haddii iPad–ka inuu lumay/la xaday/waxyeeloobay loogu diiwaangeliyo Fuji/Destiny oona aqoonsiga ciwaanada Hagaha Furan la bixiyo, iPadka waxaa lagu dari doonaa qaabka "Lumay" waxaana laga dhigayaa mid aan waxtar lahayn.
- **iPad–yada ma awoodaan in la iibiyo ama dib loogu soo celiyo isticmaal shakhsi ahaaneed.**

## Qaamuuska Ereyo Bixinta

**Maqnaanshaha –**

- **Googoysnimada Dugsiga ee Joogtada ah –** Ka maqnaanshaha 10% ama in ka badan maalmaha dugsiga, sabab kasta ha ahaatee.
- **Daahitaanka –**Imaanshaha ka daahitaanka dugsiga ama fasalka.
- **Cudurdaar la'aan –** Ka maqnaanshaha aan la ogolayn ee dugsiga ama fasalka. Ardayda si isdaba joog ah uga maqnaata dugsiga iyada oo aan cudur daar jirin waxaa loo gudbin karaa Kooxda Maamulka Imaanshaha ee dugsiga, waxaana sidoo kale loo gudbin karaa Barnaamijka School Attendance Matters (SAM) iyadoo lagu eedeeyo maqnaansho sharci darro ah ama dayacaad waxbarasho.

**Meelaynta Maamulka –** Isbeddelka meelaynta ardayga oo loo sameeyay sababo aan anshax ahayn.

**Wareejinta Maamulka –** Arday in laga beddelo iskuul oo loo beddelo iskuul kale inta badana ah wax ka qabasho ka dhalatay xadgudubyada halista ah ama soo noqnoqda ee Buug–gacmeedkan.

**Haysashada/Isticmaalka/Ku sarkhaansanaanta, Khamrada –** Haysashada, isticmaalka, ama ku sarkhaansanaanta wax badeeco khamri ah inta lagu jiro dhulka dugsiga ama hawlaha uu soo qabanqaabiyo dugsiga. Ardayga waxaa loo gudbin karaa qiimaynta isticmaalka kiimikada. Wixii  macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 504 barta onlaynka [spps.org/boardpolicies](spps.org/boardpolicies).

**Qaab kale oo Eryidda lagu Beddelo (A2E) –** Deegaan waxbarasho oo beddel u ah ardayda lagu taliyay in laga saaro ee fasallada 2–12. Qaabka A2E waxa uu u oggolaadaa ardayda inay helaan buundooyinka dhibcaha dugsiga inta ay isu diyaarinayaan inay ku laabtaan goobta dugsiga caadiga ah. Ardayga sameeyay xadgudub ku aaddan habdhaqan la isku eryi karo waa inuu ka qeybgalaa barnaamijka A2E ka hor intuusan ku soo noqon goobta iskoolkiisa caadiga ah. Tani waxaa ka mid ah ardayda doorta inay si ku meel gaar ah uga baxaan degmada ka dib markii lagu taliyay in la eryo kuwaasoo ka dibna doorta inay ku soo noqdaan degmada. Markii ay soo noqdaan, waa inay dhammaystiraan barnaamijka A2E.

**Wax Gubidda –** Burburinta ula kaca ah ama waxyeeleynta hantida iyadoo la qabadsiinayo dab ama qaraxyo. Haddii loogu aqoonsanayo xadgudubkan inuu yahay Heerka 5, waa in ardaygu isticmaalay dareeraha wax gubi kara ama shey holci kara. Wixii  faahfaahino dheeraad ah, akhri: Minn. Stat. § 609.561, Minn. Stat. § 609.562, Minn. Stat. § 609.563, Minn. Stat. § 609.5631, Minn. Stat. § 609.5632 (Gubitaanka ku jira darajooyinka 1aad ilaa 5aad oo leh qeexitaano).

**Weerar –** Waxyeello ula kac ah oo jidhka ah oo loo geysto qof aan xubin ka ahayn shaqaalaha SPPS, iyada oo aan qofka oggolaansho laga haysan. Sidoo kale ka eeg Weerarka lagu qaado Shaqaalaha.

**Weerar, ka Daray (waxyeello wayn ama la taaban karo ee jireed) –** Si ula kac ah oo dhaawac weyn oo jireed ama dhaawac weyn loo geysto qof kale oo aan ahayn xubin shaqaalaha SPPS. Sidoo kale ka eeg Weerarka lagu qaado Shaqaalaha, Ka sii daray.

**Weerar, ka Daray (hub, hub khatar ah, ama hub kale) –** Ku–samaynta fal qori, hub khatar ah, ama hub kale iyadoo ujeedadu tahay in lagu sameeyo cabsi mid kale oo ah dhaawac jidheed ama dhimasho degdeg ah.

**Weerar lagu qaado Shaqaalaha–** Waxyeello ula kac ah oo jidhka ah oo loo geysto shaqaalaha SPPS, iyada oo aan qofka oggolaansho laga haysan. Sidoo kale ka eeg Weerarka.

**Weerar, ka Daray (waxyeello wayn ama la taaban karo ee jireed) –** Si ula kac ah oo dhaawac weyn oo jireed ama dhaawac weyn loo geysto xubin shaqaalaha SPPS iyada oo aan qofka oggolaansho laga haysan. Sidoo kale ka eeg Weerarka, Ka sii daray.

**Aaladda Feejignaanta Maqalka –** Qalab walba oo loogu talagalay in loo isticmaalo soo saarista calaamadaha maqalka oo ujeeddooyinku tahay si la iskaga caabbiyo weerar ama faragelin dadka kale.

**Tababarka Xirfadaha Habdhaqanka –** Ardaydu waxa ay tababarka xirfadaha habdhaqanka ka helaan xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga hal ama dhowr xiisadood inta lagu jiro maalinta dugsiga si ay u bartaan, dib ugu bartaan oo ayna ugu dhaqmaan habdhaqano dugsiga ku habboon oo wanaagsan, sida caadiga ah iyada oo laga jawaabayo dhacdo edbin ah.

**Waxyeelada Jirka –** Xanuun jireed ama dhaawac, jirro, ama wax walba oo naafonimo ah oo xaalad jireed ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.02. subd. 7.

**Xoog u sheegashada –** Qeexitaanada ku saabsan Xoog u sheegashada, ka eeg Xeerka Dugsiga 505. Tusaalooyinka xoog u sheegashada waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn: (1) arday oo ku celcelinaya gaf aanan run ahayn, oo ujeedo laga leeyahay, kutiri–kuteeno iskuulka dhan ah oo ku saabsan arday kale; (2) arday weyn oo si isdaba joog ah ugu baaqaya arday kayar sidii in ardayga weyn uu qorsheynayo inuu waxyeeleynayo ardayga ka yar; (3) arday si dhab ah ama loo arko inuu aad caan u yahay oo ku qancinayo arday badan oo kale inaysan saaxiib la noqon arday kaas oo si dhab ah ama loo arko inuu ka caanimo yar yahay; (4) arday baraha bulshada soo dhigayo sawir ceebeyn ah halkaas oo ardayda kale ay ka arki karaan, iyadoo ay ku keeneyso ardayga sawirka ku jira dhibaato uu ardaygu ku joojiyo dhigashada dugsiga; ama (5) arday ku hanjabaya inuu garaacayo arday kale iskuulka ka dib, iyadoo ay ku keeneyso ardayga inuu aad uga cabsado inuu midna kaqeybqaato hawlaha iskuulka kadambeeyo.

**Xoog u Sheegashada Iyadoo la Isticmaalayo Tiknoolajiyada (Xoog Ugu Sheegashada Intarneedka) –** Xoog u sheegashada noocaan ah waxa ay dhacdaa iyadoo la isticmaalayo tiknoolajiyadda ama isgaarsiinta elektarooniga ah ee kale. Ka eeg Xeerka Guddiga 505 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**).

**Xadgudubyada Baska –** Xadgudub walba ee Buug–gacmeedkan oo ka dhaca ama ka ag dhaca baska dugsiga ama boosteejada baska dugsiga. Habdhaqanka carqaladeynta ee baska dushiisa waxaa loo sheegaa inay tahay ‘Habdhaqanka Carqaladeynta ee marka loo socdo ama laga soo noqdo Dugsiga.’ Xadgudubki kale ee walba ee baska ah waa in la beddelaa nooca dhacdada ee la xariira falalka ardayga, xitaa haddii ay ka dhaceen baska dushiisa. Tusaale ahaan, dagaal baska dushiisa kadhaca waa in loo qoraa ‘isdagaalid,’ oo aan loo qorin ‘Habdhaqanka Carqaladeynta ee marka loo socdo ama laga soo noqdo Dugsiga.’ Wixii  macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 707.02 barta onlaynka **spps.org/board-policies**.

**Xashiishad, Haysashada/Isticmaalka/Codsiga/Iibinta/Sarkhaansanaanta**
Isticmaalka iyo/ama haysashada xashiishadda iyadoo la joogo iskoollada ama goobta shaqo. Ka eeg Xeerka Guddiga 504.00 **spps.org/board-policies**.

**Qiimeynta CARE -** Hannaanka CARE (La-tashiga, Qiimaynta, Ka-jawaabista, iyo Qiimaynta Natiijada) wuxuu qiimeeyaa khataraha rabshadaha, waxyeellada, ama dhaqan handadaad leh ee qof u geysto naftiisa ama dadka kale, wuxuuna go’aamiyaa suuragalnimada in qofku ku lug yeesho fal waxyeello leh. Ujeeddada habkan CARE waa in lagu hago koox ku salaysan goobta (dugsiga) si ay u ururiyaan xogta lagama maarmaanka ah taasoo horseedaysa samaynta qorshe taageero oo lagu xoojinayo badbaadada ardayda, lana hubiyo in arday kastaa helo taageerada uu u baahan yahay. Xafiiska Ammaanka iyo Maareynta Masiibooyinka ee SPPS (SEM) iyo Kooxda CARE ee Degmada ayaa bixiya tababbarro, kheyraad, iyo caawimaad goobta ah marka la codsado.

**Taleefannada Gacanta iyo Aaladaha Korontada ee Shaqsiga ah -** Aaladaha korontada ee shaqsiga ah waxaa ka mid ah, laakiin aan ku ekeyn: taleefannada gacanta, tablet-yada, laabtoob-yada, Qalabka Bluetooth iyo kuwa xarigga leh (tusaale: earbuds), pager-rada, Walkie-talkies-yada, qalabyada korontada ee fariimaha dira, MP3 players, saacadaha smart-ka ah, iyoqalabyada ciyaaraha ee shaqsiga ah. Eeg Siyaasadda Guddiga 504.00 ee ku qoran: spps.org/board-policies.

**Qishka ama Been–abuurka tacliinta –** Daacad–xumada tacliinta oo ay ku jirto, laakiin aanay ku koobneyn, soo koobiyeynta shaqada dadka kale ee shaqooyinka dugsiga ama imtixaanada iyo isticmaalka fikradaha ama qoraallada qof kale. Qishka waxaa ka mid ah in si khaldan loo isticmaalo tiknoolajiyada oo lagu sawiro, si sharci darra ah lagu koobiyeeyo ama wax loogala soo dago intarneedka, ama u isticmaalka aalada elektarooniga ee gaarka loo leeyahay in farriimaha jawaabaha lagu diro, iwm.

**Qiimaynta Caafimaadka Kiimikada –** Ardayga waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo inuu si ikhtiyaari ah u galo qiimayn, oo ay dhamaystiraan wakaalad bulsho, si loo go'aamiyo heerkooda ku lug lahaanshaha khamriga ama isticmaalka kiimikada ee kale.

**Habdhaqanka Lagu Maareeyo Fasalka –** Habdhaqan lagu maareeyo goobta fasalka dhexdeeda iyadoo la isticmaalayo wax ka qabashooyin fasalka ah oo isdaba joog ah iyo cawaaqib uu taageeray Qorshaha Anshaxa Dugsiga oo dhan ee dhismaha.

**Qasbidda** - Qasbiddu waxay dhacdaa marka qofku uu qof kale ku kaco fal ka dhan ah rabitaankooda ama uu ka reebo samaynta fal sharci ah isagoo ugu hanjabaya qaab ah hadal ama qoraal, si uu:

- Waxyeello jireed u geysato ama xiro qof (marka aysan ahayn dhac ama isku day dhac);
- Waxyeelo u gaysan hantida qof;
- Waxyeelleyn ganacsi, ganacsi ama xirfad;
- Soo bandhig arrin ah cillad ama sir, daabacid hadal meel ka dhac ah, ama haddii kale qofka u soo jiido wax lagu bahdilo ama ceebeeyo;
- Sameeyo ama sababo in lagu soo oogo dambi run ama been ah; ama
- Sameeyo xadgudub sida waafaqsan Qeybta 617.261 (Faafinta Sawirada Galmada oo Sir ahaa oo aan Raali laga ahayn).

**Xallinta khilaafaadka –** Hab labo dhinac ama ka badan ay ku gaarayaan xal nabadeed oo ayna ooga wada xaajoodaan xallinta khilaafka.

**Heshiis –** heshiis habdhaqan oo qoraal ah oo ay kala saxiixdeen ardayga, macalinka ama maamulaha, iyo/ama waalidka/qofka masuulka ka ah.

**Fal dambiyeed –** Ku galitaanka dambi, hantida dugsiga ama inta ay socoto hawl dugsigu soo qabanqaabiyey ama dugsiga la xariirta, oo noqoneysa dambi haddii uu galo qof qaangaar ah.

**Waxyeeleynta Hantida Dadka kale –** Waxyeeleynta ula kaca ah ee loo geysto hantida xubnaha ka tirsan shaqaalaha iyo/ama dadka kale.

**Waxyeeleynta Hantida Dugsiga –** Si ula kac ah u jaridda, qaab ka beddelidda, ama haddii kale si un u waxyeeleynta hanti mid dhab ah ama shakhsi ahaaneed, oo ay leedahay ama ay isticmaasho degmada dugsiga. Waalidka/Qofka masuulka ka ah waxa uu masuul ka noqon doonaa dhammaan waxyeeleynta uu geystay ardayga.

**Amar ka Diididda Maamulka –** Diidmada ula kac ah ee in la raaco amarada uu bixiyo xubin ka tirsan shaqaalaha. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn:

- Marka ardayga ay u caddahay waxa laga filayo ka dib marki la xasuusiyey, oo ka dibna si ula kac ah u sameeyo cagsiga saxda ah si uu u kasbado in loo jawaabo.
- Marka ardayda aysan raaceynin amarada dadka waaweyn laakiin aanay ku haboonayn qayb kale. Tusaale ahaan, waxaan ardayda ku dhahnay, “ha dagaalamin,” laakiin haddii ay isdagaalaan maku dareyno qeybta “amar ka diididda maamulka,” Tusaalooyinka waxaa ku jiri kara shaqo diididda iyo si af ahaan ah ugu jawaabidda macalinka inaysan raaceynin amaradooda ("Ma ii diri kartid;" "Ma aha inaan ku dhageysto;" "Maya").
- Marka ardaydu si joogto ah u diidaan inay fasalka galaan.

**Xiridda –** Shuruuda kaga baahan ardayga inuu Dugsiga ku haro ama uu dhigto dugsiga wax ka baxsan marka la joogo wakhtiga fasalka ama saacadaha dugsiga.

**Takoorid –** Takoorka ama takooridda waxaa ka mid ah dhammaan in si aan loo sinneyn loola dhaqmo qof walba sababo la xiriira isir, caqiido, jinsi, xaalad guur, asalka qarankiisa, da'diisa, midabka, diinta, abtirsiinyo, heerkiisa nolosha marka la eego helidda kaalmada dadweynaha, dhanka uu qofku u janjeero ama cidda uu ka helo jaceyl ahaan, siduu isu arko xagga jinsiga iyo muujinta arrinkaas, xaaladda xagga qoyska, ama naafannimada. Ujeeddooyinka takoorka ee ku saleysan jinsiga, waxaa ka mid ah dhibaateynta jinsiga la xiriiro. Wixii faahfaahin dheeraad ah, Xeerka Guddiga 102.00 iyo Xeerka Guddiga 415.00 ka akhri bogga spps.org/boardpolicies.

**Cayrinta (ama ka saarida dugsiga) –** Waa tallaabo ay qaaddo maamulka dugsigu, taas oo ardayga dhigta fasallada 4-aad ilaa 12-aad looga dalbanayo inuu dugsiga ka baxo muddo gaaraysa ilaa hal maalin oo dugsi oo buuxda. Marka ay timaaddo ardayda dhigata fasalka 3-aad ama ka hooseeya, ka-saarista (ama dirista guriga) waa inay ahaataa mid ka gaaban hal maalin oo dugsi oo buuxda.

**Habdhaqanka Carqaladeynta –** Xaaladaha iyo/ama ficilo oo shaqaaluhu aaminsan yihiin inay faragalin ku yeelanayaan, ama suuragalka ah inay faragalin ku yeeshaan waxbarashada waxtarka leh iyo/ama hawlaha dugsiga.

**Habdhaqanka Carqaladeynta, Daran –** Xaaladaha iyo/ama ficilo khatar galin kara ama khatar galiyey bedqabka dadka kale; ama si aad u weyn rabsho ah, ama habdhaqan hanjabaad ah oo si aad u daran u carqaladeeya iskuulka, hawl iskuulku soo qaban qaabiyey, ama hawl iskuulku kormeero oo lagu hayo meel ka baxsan iskuulka.

**Habdhaqanka Carqaladeynta ee marka Loo socdo ama laga Soo noqdo Dugsiga –** Habdhaqan khatar gelinaya ama dhibaateynaya ardayda marka ay u socdaan ama ay kasoo noqdaan dugsiga, ama ay joogaan boosteejada baska, ama darawalka baska dareenkiisa ka weecinaya inuu kaxeeyo baska. Ka eeg macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan qeexitaanada, wax ka qabashooyinka, iyo jawaabo bixinta barta onlaynka **spps.org/transportation**. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 707.02, iyo Habraaca Guddiga 709.01 barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**.

**Maandooriyaha ama walxaha la kantaroolo, Haysashada/Isticmaalka/Dalbashada/Iibinta –** Isticmaalka sharci–darrada ah, beerashada, samaynta, qaybinta, iibinta, iibsiga, haysashada, ama qaadista daroogooyinka ama walax walba oo la xakameeyey; si sharci darro ah ugu sarqaansan daroogo walba ama walax la xakameeyey; ama haysashada qalabka ama aaladda loo isticmaalo diyaarinta ama qaadashada daroogada ama walxaha la xakameeyey. Ardayga waxaa loo gudbin karaa qiimaynta isticmaalka kiimikada. Wixii faahfaahin dheeraad ah ka eeg Minn. Stat. § 152.01, subds. 1–23 (Qeexitaanka daroogada la xakameeyo), Minn. Stat. § 152.02, Minn. Stat. § 152.021, Minn. Stat. § 152.022, Minn. Stat. § 152.023, Minn. Stat. § 152.024, Minn. Stat. § 152.025 (Dambiyada daroogada la xakameeyo ee darajada 1–aad ilaa 5–aad), iyo Xeerka Guddiga 504.00 barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**.

**Ka Saaridda Iskoolka –** Tallaabo ay qaadaan Guddiga Waxbarashadu si ay uga hortagaan diiwaan gelinta ama dib–u–diiwaangelinta ardayga muddo aan ka badnayn sannad dugsiyeedka hadda.

**Walax Qarxa, Haysashada/Isticmaalka/ Ama Ujeedka in lagu Isticmaalo –** Haysashada, isticmaalka, ama ujeedka in lagu isticmaalo qalabka qarxa sida bambada, bam–gacmeed, miino, sayruuq, gantaal, bamka tuubada, ama qalab la mid ah oo loo qaabeeyey inuu qarxo oo awood u leh inuu geysto waxyeelo jireed ama burburka hantiyeed.

**Eryidda –** Xeerka sharciga ah ee ay qaadeen Guddiga Waxbarashadu si ay uga mamnuucaan arday diiwaangashan in uu sii xaadiro ilaa 12 bilood laga bilaabo taariikhda ardayga la cayriyey si waafaqsan Xeerarka Minnesota §121A.40 ilaa 121A.56.

**Shirka Kooxda Qoyska Eryidda –** Shirarka Kooxda Qoyska ku salaysan ee dugsiga waa dhaqan xiriir wanaajin ah oo taageerta shaqaalaha dugsiga inay la yimaadaan ardayda iyo qoysaska si ay u horumariyaan qorshe lagu taageerayo ka qaybgalka ardayga, isla-xisaabtanka, iyo guusha.

**Isla–diririd –** Wax laga wada qayb galay oo labada dhinacba ay xaaladda wax ka gaysteen iyagoo af ama addin adeegsanaya.

**Qori–gacmeed –** Qori–gacmeedyada waa laga mamnuucay dhammaan hantida ay leedahy ama ay koontorosho Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul. Qori–gacmeed waxaa lagu qeexay Minn. Stat. § 609.666, subd.

1 (a) sida qalab loogu talagalay in loo isticmaalo hub ahaan, kaas oo wax laga rido taasoo ka dhalata xoogga qaraxa ama xoogga gubista. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg Xeerka Guddiga 903.00, iyo Minn. Stat. §121A.44.

**Dabka iyo Qaylo–dhaanta Dabka ee Beenta ah** (**Fires and False Fire Alarms)**

(1) Ku guuldareysiga in la sameeyo taxadar caadi ah, taasoo keenaysa dab ka kacay dhismo dugsi ama waxyeelo soo gaartay hantida dugsiga.

(2) Qalabka digniinta dabka ee beenta ah – bixinta digniinta dabka ee beenta ah ama cilladayntya ama faragelinta qalabka qaylo–dhanaanta dabka. Shaqaalaha waxaa looga baahanyahay inay ogeysiiyaan booliska ama waaxda dab–damiska. Cawaaqibka ardayga waxaa ka mid ah joojinta, wareejinta maamulka ee suurtogalka ah iyo magdhowga waxyeellada.

**Khamaarka –** Dheelista ciyaar baqtiyo–nasiib ah.

**Howlaha Burcad –** Dhaqan-xumada ardaygu waxa kale oo laga yaabaa inay ka koobnaato hawl burcad haddii ay buuxiso dhammaan shuruudaha soo socda: (1) Ardayga/ka qaybqaataha waxa uu ka tirsan yahay ama ku xidhan yahay (2) koox ka kooban saddex qof ama in ka badan oo ku midoobay astaan lagu garan ogtahy, calaamad, ama magac, iyo (3) ka qaybqaataha, isagoo ay hoos imanaya ilaalinta Saint Paul Shaqaalaha Dugsiga Dadweynaha, waxay ka qaybqaataan xad–gudub gaar ah oo ku taxan buug–gacmeedkan si ay u sii fogeeyaan hadaf cad ama maldahan ee burcadda/kooxda. Ka qayb noqoshada burcadda waxay xadgudub dheerad ah ku tahay.

**Waxyeellada Jirka ee Weyn –** Dhaawaca jirka kaas oo abuura ixtimaal sare oo dhimasho ah, ama keena cillad joogto ah oo dhab ah, ama keena khasaare joogto ah ama daba dheeraada ama daciifa shaqada xubin walba ama xubin ama dhaawac kale oo jireed oo halis ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.02, subd. 8.

**Dihibatayn salka ku haysa Maqaam la Ilaaliyey –** Dhibaataynta waxa ka mid ah dhaqan af ama gacan ka hadal ah, ama hadal lagu hagayo shakhsiga kaas oo ah:

(1) mid ku saleysan isirka qofka, caqiidada, jinsiga lab ama dhedig, xaalada guurka, wadanka uu kasoo jeedo, da'da, midabka, diinta, abtirka, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, heerka qoysnimo, aqoonsiga iyo cabiridda jinsiga, ama naafonimada; iyo

(2a) mid leh ula jeeddo ama saamayn lagu abuurayo bay'ad cabsi–galinaysa, cadaawada, ama gaf ku ah marka loo eego shaqsigaas; ama

(2b) haddii kale si xun ay u saamayso fursadaha shaqo ama waxbarasho ee shaqsi, ama helitaanka faa'iido ka imaatay degmada iskuulka.

Tusaalooyinka dhibaataynta aqoonsiga jinsiga waxaa ka mid ah diidmada isticmaalka magaca saxda ah iyo magac–u–yaalka, ku xad–gudubka arrimaha gaarka ah ee shakhsi ahaaneed ama xogta gaarka ah oo ay ku jirto "ka bixida" ardayga, xannibaadda jir ahaan ama siyaabo kale oo adkeynaya helitaanka tas–hiilaadka waafaqsan aqoonsiga ama ismuujinta ardayga.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.03, iyo Siyaasadaha Guddig 415.00, 510.00.

**Ciyaarta leh Waxyeelleyn –** Gelitaanka fal ka dhan ah arday, ama ku qasbidda arday inuu fal geysto, taasi oo halis weyn ku abuureysa qofka si ardayga loogu bilaabo ama lagu xiro koox, ama ujeedadi walba ee kale. Dhaqanka anshaxa la mamnuucay waxaa ka mid ah laakiin aanay ku koobneyn, nooc walba oo axmaqnimo jireed ah, sida uleynta, garaacista, karbaashka, calaameynta jirka, koronto kuqabashada, ama gelinta jirka walxaha waxyeellada leh. Xeerkani waxa uu khuseeyaa dhaqanka ardayga ee ka dhacaya hantida dugsiga ama meel ka baxsan iyo inta lagu jiro saacadaha dugsiga iyo ka dib. Marka falalka noocaan ah ay ka dhacaan meel ka baxsan hantida iskuulka, mamnuucista ka dhanka ah waxyeeleynta ayaa khuseysa haddii wax xiriir ah oo ay la leedahay Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul uu yahay mid qarsoon ama cad. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 501 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**. Sidoo kale, eeg Weerarka.

**Faro-ka-cayaar** - Ciyaar qallafsan oo ay ardaydu riixaan oo wax ku dhuftaan midba midka kale

**Qalabka Curyaamínta –** qalab loo qaabeeyey ama uu ugu talagalay soosaaraha in loo isticmaalo in si ku meel gaar ah uusan qofka u dhaqdhaqaaqin ama u curyaamiso
(1) dadka iyadoo la isticmaalayo garaaca elektarooniga ah ama koronto;

(2) aalad walba oo u hoggaansan xanuun; ama gaaska ilmada keena, ama walax walba oo loogu talagalay inay u shaqeyso si la mid ah sunta dadka ka ilmeysiisa.

Wixii faahfaahin dheeraad ah ka eeg Minn. Stat § 624.731.

**Adeegga bulshada ee dugsiga dhexdiisa ah –** Tallaabo uu qaadayo maamulka dugsiga halkaas oo arday looga baahan yahay inuu sameeyo shaqo isxilqaan ah si uu bulshada dib wax ugu biiriyo.

**Korjoogteynta Dugsiga Dhexdiisa ah –** Arday ayaa joogi kara dugsiga waxaana loo ogolaadaa inuu dhigto xiisadaha, laakiin waa inuu hubiyaa shaqaalaha loo xilsaaray wakhtiyada ku habboon. Shaqaalaha ayaa ku wehlin doona ardayga hoolka dhexdiisa ama qolka nasiinada marka ay ku habboon tahay.

**Ka joojinta Dugsiga Dhexdiisa ah –** Tallaabo uu qaadayo maamulka dugsiga si uu uga mamnuuco arday inuu ka qeybgalo xiisadaha in muddo ah (in kabadan kalabar maalinta dugsiga) isagoo isla mar ahaantaana ku jira kor-joogteynta shaqaalaha dugsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga.

**Ujeedo, Si ula kac ah, ama Ula kac –** "Oo looga jeedo" ama " si ula kac ah" ama " ula kac" micnaheedu waxa ay tahay in ardayga / qofka geystay falka uu leeyahay ujeedo uu ku sameeyo shayga ama uu ku keeno natiijada la cayimay, ama uu aaminsan yahay in falku, haddii lagu guuleysto, uu keeni doono sababta natiijadaas. Wixii faahfaahin dheeraad ah ka eeg Minn. Stat. § 609.02, subd. 9.

**Si ula kac u Waxyeeleynta Agabka Tiknoolojiyadda Degmada –** Burbur ula kac ah oo loo geysto qalabka, nidaamka softiweerka ama agabka kale.

**Faragelin/Carqaladayn –** Tallaabo walba oo loo qaado si looga hortago in xubin ka mid ah shaqaaluhu uu guto waajibaadkiisa sida sharciga ah loogu idmaday, oo ay ku mid tahay baadhista dhinaca maamulka.

**Goob Waxbarasho Ku meel gaar ah oo Kale –** Tallaabo ay qaadaan maamulka dugsiga iyo degmada si ay ooga saaraan ardayga waxbarashada gaarka ah oo ayna u geeyaan goob waxbarasho ku meel gaar ah oo kale wax aanan ka badneyn 45 maalmood. Goob Waxbarasho Kale oo Ku Meel Gaar ah (ilaa 45 maalmood oo dugsiyeed) ayaa la isticmaali karaa oo keliya haddii ardayga naafada ah uu ku sameeyo waxyaabaha soo socda dugsiga, dhismaha dugsiga ama hawlaha dugsiga (34 CFR § 300.530(g)):

(1) Sitaa hub khatar ah ama haysta hub khatar ah (oo lagu qeexay hub, qalab, wax–gooya, shay, ama walax, nool ama aan noolayn, kaas oo loo isticmaalo, ama awood u leh, keenista dhimasho ama dhaawac jireed oo halis ah, marka laga reebo in qodobka noocaan ah uusan ku jirin mindi jeebka la gashto oo leh daab ka yar 2 ½ inji oo dherer ah) 18 USC §930(g)(2) (qeexidda);

(2) Si bareer ah u haysto ama isticmaalo daroogo sharci darro ah, ama iibiya ama dalbada iibinta walaxda la kantaroolay (34 C.F.R. § 300.530 (qeexidda)); ama

(3) Dhaawac jidheed oo halis ah u gaysta qof kale (oo lagu qeexay khatar weyn oo dhimasho ah; xanuun jidheed oo aad u daran; qaab–beddelid wakhti–dheer oo muuqda; ama luminta ama daciifnimada wakhti–dheer shaqada xubin jidhka ah, xubin ama maskaxda) 18 USC §1365(h)(3)(g)(2) (3) ( qeexid).

Go'aaminta goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah oo kale oo habboon waxaa sameeya kooxda IEP ee ardayga iyadoo kiis walba gooni loo fiirinayo.

**Wax ka qabashada –** Fursad ardayda lagu barayo habdhaqanka ku habboon iyadoo hadafka laga leeyahay uu yahay fududeynta isbeddel habdhaqan oo wanaagsan. Wax ka qabashada waxaa ku lug yeelan kara shaqaalaha dugsiga iyo sidoo kale shaqaalaha taageerada ee bulsho weynta.

**Qeybaha Cawrada –** waxaa ka mid ah agagaarka xubnaha taranka ee aasaasiga ah, gumaarka, bawdada gudaha ah, barida ama naaska, iyo sidoo kale dharka daboolaya aagga u dhow ee qeybaha cawrada). Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.341, subds. 5, 11.

**Luuqada –**

- **Aflagaado –** Ardaygu waxa uu soo gudbiyaa farriimaha afka ah oo ay ku jiraan luuqad gaf ama hanjabaad ah.
- **Aan habboonayn –** Dhaarasho ama ereyada oo si xushmad la'aan ah loo adeegsado.

**Ka Tagista Dhulka Iskuulka, Aan la Fasaxin –** Ka Tagista dhulka iskuulka inta lagu jiro saacadaha iyada oo aan la ogolayn. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 503.03 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**.

**Guddiga Maxalliga –** hay'ad magaalo, degmo, ama kooxo degmo loo sameeyey si waafaqsan sharciga, xallinta guddiga degmada, xeerka magaalada, ama xeerka degmada ujeeddaduna tahay wax ka qabashada takoorka ku salaysan jinsiyada, midabka, caqiidada, diinta, wadanka uu kasoo jeedo, jinsiga, da'da, naafonimada, xaalada guur, heerka la xiriira kaalmada dadweynaha, cidda uu ka helo galma ahaan, ama heerka qoys. Dabaqad la ilaaliyey ka ahaan, ma faquuqi karno ama maka aarsan karno qof walba oo u adeegga guddiga maxaliga sida lagu qeexay Minn. Stat. § 363A.03

**Waayitaanka Mudnaanta Baska** - Mamnuucid ku meel gaar ah ama muddo dheer ah ee la xiriiro ardayga inuu raaco baska iskoolka ama inuu baska u raaco munaasabado kale oo ku lug leh raacitaanka baska iskoolka.

**Waayitaanka Mudnaanta –** Tallaabo uu qaado maamulka dugsiga si uu arday ooga hor istaago inuu kaqeybqaato hawl, ama waayitaanka mudnaanta oo kadhashay xadgudub.

**Go'aaminta Naafannimada Ardayga ee Muuqato** - Kulan ay waalidiinta arday leh galka IEP iyo shaqaalaha iskoolku ay dib ugu eegaan xogaha la xiriiro ubadka oo ay ka jawaabaan laba su'aalood: 1. Dhaqanku ma waxaa sababay, ama xiriir toos ah oo la taaban karo la lahaa naafinnamada ubadka? 2. Dhaqanku ma wuxuu ahaa natiijada tooska ah ee iskoolka ku guuldarreystay inuu fuliyo IEP-ga ubadkaa? Haddii ay jawaabtu "haa" u tahay mid ka mid ah su'aalaha kor ku xusan, markaas dhaqanka waxaa lagu go'aamiyaa inay noqoto mid ah naafanimada ubadka oo isa soo muujisay.

**Ku Xad–gudubka Xeerka Daawada –** Ardeyda isticmaalayaan ama qaybinayaan daawoyinka dhakhtar qoray ama kuwa aan dhakhtar qorin si aan la ogolayn. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 516 barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**. Sidoo kale ka eeg Haysashada/Isticmaalka/Kuqancinta/Iibinta, Daroogooyinka ama Daroogo Xakameysan.

**Dhexdhexaadinta –** Ardayda wax u geysta arday kale waxaa laga yaabaa in laga codsado inay ka qeyb galaan kulan dhexdhexaadin ah oo uu hor kacayo dhexdhexaadiye si uu u xalliyo arrimaha keenaya khilaafka.

**Barnaamijka La talinta –** Iyadoo la haysto oggolaanshaha waalidka/qofka masuulka ka ah, ardayga ayaa si is–xilqaan ah ula kulmi kara qof weyn oo lagu kalsoon yahay oo la heli karo si uu u bixiyo taageero iyo hagitaan. Bixiyaha la-talinta waxa uu noqon karaa qof shaqaale dugsi ah ama qof ka socda bulshada. Tiro dugsiyo ah ayaa leh barnaamijyada la-talinta.

**Xeerka Cayrinta Caddaalada ah ee Ardayga Minnesota –** Xeerka Cayrinta Caddaalada ah ee Ardayga waa sharci gobolka u dagsan oo ka ilaalinaya dhammaan ardayda, kuwa naafada ah ama aanan ahayn naafo, ka joojinta, eryidda, iyo dacwad ka saarista. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.40 to § 121A.56.

**Xeerka Ciqaabta aan Ardayga laga Saarin Iskoolka iyo Tallaabooyinka Iskoolku ku Dhaqmo** - Xeerarka iyo tallaabooyinka beddelka u ah in ardayga laga eryo iskoolka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobneyn, shaqaalaha oo arrinka faraha la soo galo iyo taageero ku aaddan habdhaqanka wanaagsan taasoo ku saleysan cilmi-baaris, adeegyada xag bulsho iyo xag shucuur, adeegyada caafimaadka dhimirka ee iskoolka ku xiran, adeegyada la-talinta, adeegyada qofka qaabilsan shaqada bulshada, baaritaanka tacliinta ee adeegyada Title 1 ama u soo gurmashada xagga akhriska, iyo adeegyada kale ee waxbarashada. Xeerarka Ciqaabta aan Ardayga laga Saareyn Iskoolka iyo tallaabooyinka iskoolka waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn xeerarka iyo tallaabooyinka hoos yimaada Minn.Stat. § 120B.12 ee kala ah (Reading Proficiency No Later Than The End Of Grade 3), Minn.Stat. § 121A.575 (1) and (2)(Alternatives To Pupil Suspension); Minn.Stat. § 121A.031, Subd. 4(a)(1)(School Student Bullying Policy), Minn.Stat. § 121A.61, Subd. 3(r)(Discipline And Removal Of Students From Class), and Minn.Stat. § 122A.627(3)(Positive Behavioral Interventions And Supports).

**Foomka Gudbinta Anshaxa Xafiiska (ODR) –** Foomka caadiga ah ee SPPS ee ODR waxa uu la socdaa Buug–gacmeedka Xuquuqda iyo Waajibaadyada SPPS, Nidaamka Xogta Ardayga, iyo Nidaamka Macluumaadka Dugsiga–Weyn (SWIS). Waxaa ka mid ah aagaga loo baahan yahay si loogu aqoonsado oo wax looga qabto arrimaha la xariira arrimaha hab–dhaqanka dugsiga oo dhan ay ku jirto isu dheelitirnaan la'aanta.

**Habdhaqanka Lagu Maareeyo Xafiiska –** Habdhaqan lagu maareeyo meel kabaxsan goobta fasalka (iyadoo la isticmaalayo taageero joogta ah, labadaba jawaabo wax kaqabasho iyo edbin ah, oo ay isticmaalaan shaqaalaha taageerada habdhaqanka iyo maamulayaasha) taasoo keenta luminta wakhtigi waxbarashada waxaana lagu diiwaangeliyaa Foomka Gudbinta Anshaxa ee Xafiiska SPPS.

**Xafiiska Amniga iyo Maareynta Degdegga ah –** Xafiiskani waxa uu u go'an yahay bixinta deegaan waxbarasho oo bedqaba oona ammaan ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul dhexdooda. Waxa ay dib u eegaan oo ay kor u qaadaan bedqabka iyo qorshayaasha xaaladaha degdegga ah ee ka jira dhammaan goobaha SPPS si joogto ah waxa ayna kormeeraan shaqaalaha amniga si ay gacan ooga geystaan inay ka hortagaan oo ay xaliyaan dhibaatooyinka suuragal ah guud ahaan degmada. Xafiisku waxa uu shaqadiisa ku xiraa ilaha kala duwan ee bulshada sida waaxda booliska, dabdamiska, iyo ka jawaabayaasha gurmadka degdegga ah. La xariir xafiiska adiga oo wacaya 651–767–8370.

**Waxyaabaha kale ee la mamnuucay –** Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara (laakiin aan ku xaddidnayn): rasaasta, dabka sigaarka lagu shido (iyada oo aan la haysan badeecadaha kale ee tubaakada), katiinadaha booliiska ee gacmaha, iyo wixii kale ee ah alaabta lagu ciyaaro ama walxaha kale (oo ay ku jiraan qoriga ilmuhu ku ciyaaraan ee aan dhab u buuxin qeexitaanka qoriga aan qatarta aheyn, mindiyaha caagga ah, seefaha caagga ah, iwm.) oo aan loo aqoonsan doonin hub ahaan balse iskoolka u keeni kara carqalado. Looma tixgelinayo waxyaabahan inay hub yihiin.

**Waalidka –** Qofka ardayga si sharci masuul ooga ah sida ugu kuqoran bogga waalidka ee CAMPUS.

**Ogeysiiska/Shirka Waalidka/Qofka masuulka ka ah –** Wadahadal maamul ama wadaxariir oo lala yeesho waalidka ama qofka masuulka ka ah ardayga si wax looga qabto arrimaha tacliinta ama habdhaqanka ee ardayga.

**Xadgudubka Baakinka –** Ku baakimida meel aan la oggolayn ku dhex taal hantida iskuulka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 501.02 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**.

**Daandaansi Gacan ka hadal ah (Waxyeelo Jirka ah) –** Fal ula kac ah oo keenaya waxyeelo jirka ah oo ardaygu keeno.

**Daandaansi Gacan ka hadal ah (Waxyeelo Wayn oo Jirka ah) –** Fal ula kac ah oo keenaya waxyeelo wayn oo jirka ah oo ardaygu keeno. "Waxyeello wayn oo jirka ah" waxaa loola jeedaa dhaawac jirka ah oo ku lug leh ku meel gaar ah laakiin cillad la taaban karo, ama keena ku meel gaar ah laakiin khasaare weyn ama dhaawac ku ah shaqada xubin walba oo jireed ama xubin walba, ama sababa jabka xubin walba oo jirka ah. Minn. Stat. § 609.02, subd 7a.

**Daandaansi Gacan ka hadal ah oo shaqaalaha lagula kaco –** Fal ula kac ah oo keenaya gacan qaad aan la jeclayn oo ardaygu keeno. Waxaa ka mida, balse aysan ku koobnayn, kala–tuurid, dharbaaxyo, cabsi–galin, iyo candhuufid.

**Gacan Qaad (Ma leh Waxyeelo Jirka ah) –** Ardeydu waxay galaan gacan isku qaadid aan habboonayn, sida riixid iyo candhuufid, faro-ka-cayaar, iyo cago-jugleyn

**Ogeysiinta Booliiska –** Haddii maamuluhu aaminsan yahay in ardaygu ku xad–gudbay sharciga, booliiska waxaa loo yeeri karaa si ay u xareeyaan warbixin iyo/ama ay ku caawiyaan sida loo baahdo.

**Haysasho/Isticmaal –**

- **Hubka Khatarta ah ee aan ka ahayn qori ama bastoolad –** “Hubka khatarta ah oonan ahayn qori ama bastoolad” micnaheedu waxaa weeye
  - aalad ama qalab walba loo naqshadeeyay hub ahaan awoodna uleh inuu keeno dhimasho ama waxyeello jireed oo aad u wayn
  - Aalad loo sanceeyay ama loo qaabeeyay hub ahaan kasoo awood u leh inuu keeno dhimasho ama waxyeello jireed oo aad u wayn
  - Dareere walba oo guban kara ama holci og ama qalab kale kaasoo, qaabka loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo isticmaalo, loo xisaabiyo ama ay u badan tahay inay keento dhimasho ama dhaawac weyn oo jireed
  - Dab walba oo loo isticmaalo inuu keeno dhimasho ama dhaawac weyn oo jirka ah
  - minddi walba oo kirkir le'eg ama ka weyn dhererkiisu yahay 2.5 inji
  - Qori–u–eke, qoriga kuulaha laga rido, ama qoriga saalada la rido
  - birta feerka

Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat § 609.02, subd 8 (qex. waxyeello wayn oo jireed), Minn. Stat § 609.02. subd 6 (qex. hubka khatarta ah), Minn. Stat § 609.66 subd. 1d 18 U. S. C. § 930(g)(2) (qex. hubka qatarta ah), St. Paul Legis. Koodhka § § 225.01, 225.02, iyo Xeerka Guddiga 903.00.

- **Hub kale ama Shay, aan ahayn hub oo aan buuxin qeexitaanka hubka khatarta ah ee Xeerka Minnesota**
- **Hubka kale waxaa ka mid ah aalad walba ama qalab walba –** oo uu ku jiro hub walba oo aan caadi ahayn – kaas oo, habka loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo isticmaalo, loo xisaabiyo ama ay u badan tahay inuu keeno waxyeello jireed ama waxyeello weyn oo jireed, ama cabsi laga qabo heer walba oo waxyeelo jireed ah. (Hubka kale waxaa ka mid ah mindiyo leh kirkir ka hooseeya 2.5 inji, mindiyo been abuur ah, hub u ekeyaal, kartoon jarto, rasaasta, iwm.). Eeg Minn. Stat. § 609.02 subds. 7, 7a, 9, and 17; Minn. Stat. § 609.713, subd. 3(b) (qeex. qoriga kuulaha laga rido & qori–u–eke); iyo Minn. Stat. § 624.713 (rasaasta).

**Aaladaha buleer ka, Haysashada iyo/ama Qarxinta –** Buleer ama buleerka dhawaaqa dheer kaasoo dab dhalin kara.

**Dhibaataynta isireed ama diineed –** Dhibaataynta isireed ama diineed waxay ka kooban tahay dhaqan afeed ama jireed ama wadahadal la xidhiidha isirka ama diinta shakhsiga oo dhaqankaasu:

(1) leeyahay ula jeeddo ama saamayn uu ku abuurayo cabsi gelin, cadaawad, sharaf dhac, ama bay’ad shaqo, waxbarasho oo aflagaaddo badan, amaba bay’adda degmada iskuulka

(2) leeyahay ula jeeddo ama saamayn si wayn ama aan macquul ahayn loo faragaliyo shaqada ama waxbarashada shaqsi ama

(3) haddii kale si xun ay u saamayso fursadaha shaqo ama waxbarasho ee shaqsi, ama helitaanka faa’iido ka imaatay degmada iskuulka.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.03, iyo Xeerka Guddigs 415.00.

**Rabshad isir ama diineed –** Rabshadaha isir ama diineed waa fal daandaansi gacan ka hadal ah ama weerar ama hanjabaad daandaansi ama weerar qof kale oo ay ugu wacantahay, ama qaab macquul ah oo la xiriirtaa, isir ama diin. Falka noocan oo kale ah waxa uu sidoo kale noqon karaa ku xad–gudbi sharciga ciqaabta. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.03, Xeerka Guddigs 415.00.

**Darawalnimo Taxaddar la’aana–** Ku dhex wadista baabuur hantida iskuulka qaab khatar galinaysa dadka ama hantida.

**Fasalka oo lagu Hayo Ardayga Xilliga Ciyaarta Bannaanka –** Ardayga oo laga joojiyo fasaxa yar ee bannaanka lagu ciyaaro taasoo ka dhigan jawaab-celin habdhaqankiisa lagula tacaalayo ama mid edbin ah. Ardayga oo fasalka lagu hayo xilliga fasaxa yar ee bannaanka lagu ciyaaro waa mamnuuc haddaysan u badneyn in ardaygu uu waxyeello u geysanayo ardayda ama shaqaalaha; hadduu waalidku/mas 'uulku nagu raaco arrinkaas; ama haddii ay kooxda IEP go' aamiyaan in ay habboon tahay in ardayga laga joojiyo fasaxa yar ee bannaanka lagu ciyaaro. Waa mamnuuc in ardayga laga joojiyo fasaxa yar ee bannaanka lagu ciyaaro sababo la xiriiro ardayga oo aan soo dhammeystirin shaqadii iskoolka awgood.

**Ka Been sheegid Diiwaanka iyo Aqoonsiga–** Ka been sheegid ama beddelid saxiixa ama xogta, diidid inaad bixiso aqoonsi saxsan, ama inaad shaqaalaha siisid aqoonsi been ah.

**U Gudbinta Adeegyo Kale ama Banaanka–** Qiimaynta isticmaalka kiimicada, shaqaale bulsho, caafimaadka dhimirka, iwm.

**Ka Saarida Fasalka –** Talaabada uu qaado macalinka, maamulaha ama shaqaalaha kale ee degmada si looga mamnuuco ardayga in uu xaadiro fasalka in muddo ah (waa in uu ka yar yahay maalin badhkeed). Fadlan ogow: Wixii ka badan maalin barkeed waxay noqotaa Ka–joojinta Dugsiga dhexdiisa ah.

**Soo celinta –** Dayactirka waxyeelada ama bedelida alaabta la xaday ama waxyeellooday ama bixinta qiime cadaalad ah oo suuq ah magdhow ama adeeg ahaan. Waxay u baahan tahay arday inuu bixiyo ama hagaajiyo waxyeelada ama lunsiga hantida waxaana loogu soo rogi karaa si gaar ah ama waxay dheeraad ku tahay cunaqabatayn kale.

**Xeeladaha Xiriir Wanaajinta –** Siyaabaha lagu martiqaado ardayda, qoysaska, xubnaha bulshada iyo shaqaalaha si loo dhiso dareenka iska warqabka, daryeelka iyo xirfadaha isgaarsiinta. Xiriir wanaajintu waxay diiradda saaraan dhisidda ka mid ahaanshaha bulshada iyo xoogga iyo awoodda ka qaybgalayaasha. Marka xiriir wanaajintu guuleysato, dhammaan waxay dareemaan ammaan dugsiga, sababtoo ah xiriir qoto dheer oo waara ayaa ka dhex dhisan saamilayda. Fadhiyada lagu dhiso bulshada, fadhiyadda hagaajinta waxyeelada, sheekeysiga soo celinta, dhexdhexaadinta asxaabta, iyo shirarka kooxda qoyska ayaa ah tusaalayaal xeeladaha xiriir wanaajinta

**Dhac/Baad–** Helitanka hantida qof kale iyadoo la isticmaalayo xoog ama hanjabaad xoog. Haddii xoog ama hanjabaad xoog aan la isticmaalin, eeg Tuugnimo.

**Iskuulka Sabtida–** Iskuulka Sabtida waxaa u beddel u noqdaa ka joojinta iskuulka.

**Umuuraha Xaadirista Iskuulka (SAM)** – Tan waxaa loola jeedaa habraacyada xaadirista iskuulka ee SPPS. Eeg [spps.org/attendance](spps.org/attendance).

**Qorshaha Anshaxa Dugsiga oo dhan (SWD) –** Sawir–hage kala saaraya qorshaha dhismaha iyo habraacyada maaraynta hab–dhaqannada fasasalku maamulo iyo kuwa xafiisku maamulo. Qorshaha Anshaxa Dugsiga oo dhan ee SPPS waa naqshad la tayeeyay oo ay isticmaalaan dhammaan dugsiyada SPPS. Nashqada qaabaysan waxa laga heli karaa Schoology ee Wakiilada PBIS iyo xafiiska Office of School Support.

**Hab–dhaqanka galmada–**Ku lug lahaanshaha hab–dhaqanka galmada oo ay ka mid tahay, laakiin aanay ku koobnayn, galmada tooska ah ama galmada galinta xubinta taranka, isku tag galmo, astur xumida cawrada, ama siigaysiga. Sidoo kale eeg Qeybaha Cawrada iyo Isutagga Galmada.

**Isutag Galmo –** Waxaa ka mid ah taabashada is–afgaradka iyo midka aanan is–afgaradka ahayn ee qof kale la taabto qeybihiisa cawrada ama ku qasbida qofka inuu taabto qof kale qeybihiisa cawrada, oo lagu sameeyo ujeedo galmo ama gardarro. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.341, subds. 5, 11. Eeg Qeybaha Cawrada.

**Dhibaateynta Galmo–**Dhibaateynta galmo waxaa ka mid ah galmo ugu tagidda qofka ee uusan soo dhaweyn, codsashada galmo wax ku beddelashada, akhlaaqda dhaqan ahaan galmo ku saleysan ama dhaqanka afka ah ama jirka ah ee kale ama ka wada xariirka hab galmo markii:

(1) habdhaqankaas ama wada xariirkaas uu yeeshay ujeedada ama saameynta si weyn ama aan caqli gal ahayn u faragalineysa shaqada ama waxbarashada qofka, ama ku abuureysa cabsigelin, cadowtinimo, ama aflagaado lagu geysanayo deegaanka shaqada ama waxbarashada ama deegaanka degmada iskuulka

(2) galitaanka habdhaqanka ama wada xariirka noocaas ah lagu xiro ama lagu shuruudeeyo, midkood si cad ama si dadban, ku helitaanka ama sii haysashada shaqo, ama ku helitaanka waxbarasho ama faa'iido ka imaanaysa degmada iskuulka ama

(3) galitaanka ama diidmada dhaqanka ama wada xariirka noocaas ah ee uu sameeyo shakhsi loo isticmaalo arrin looga gaarayo go'aan saameynayo shaqada ama waxbarashada qofka ama helitaanka faa'iido ka imaanaysa degmada iskuulka. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.03, Xeerka Guddigs 415.00.

**Anshax–xumada Galmada, Ka sii dartay –** Xadgudub walba oo lagu sameeyo Minn. Stat. § 609.342 (fal dambiyeedka galmada ee darajada 1aad) iyadoo la sii marayo Minn. Stat. § 609.345 (fal dambiyeedka galmada ee darajada 4aad). Fal dambiyeedka galmoodka ah ee gaaraya xad–gudubka waxaa ka mid ah "xiriir galmo" ee dembiga ah ama fal galmo walba oo kale oo noqon kara fal dambiyeed haddii uu galo qof weyn (1) kaas oo lagu fuliyo xoog, jujuub, ama hanjabaad hub khatar ah, (2) Taas oo ka dhan ah qofka uu dambiiluhu garanayo ama uu haysto sabab lagu ogaado in uu maskaxiyan liito, maskaxiyan tabar daran tahay ama jir ahaan aan tabar lahayn, ama (3) si kale ugu xad gudba Minn. Stat. § § 609.342– 609.345. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.342–.345. Eeg Qaybaha Cawrada ah, Xiriirka Galmada, iyo Xadgudubyada Galmada.

**Xadgudub Galmo –** Xadgudub galmo waa fal jireed oo gardaro ah ama xoog ama hanjabaad oo ku lug leh taabashada qof kale qaybtiisa cawrada ah (iyo sidoo kale marada dabooolaysa qaybaha cawrada) ama ku qasbida qofka inuu taabto qof walba qaybtiisa cawrada ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 121A.03, Minn. Stat. § 609.341, iyo Xeerka Guddig 415.00. Falka noocan oo kale ah waxa uu sidoo kale noqon karaa ku xad–gudbi sharciga ciqaabta. Eeg Weerarka, Qaybaha Cawrada ah, Hab–dhaqanka Galmada, Isku tag Galmo, Anshax–xumada Galmada, Ka Dartay.

**Kooxda Kaalmada Ardayga (SAT) –** Waa hindise waxbarasho guud kaas oo taageero siiya macallimiinta si ay ula kulmaan caqabadaha waxbarashada iyo hab–dhaqanka ee gooni u ah ardaydooda. Hadafka SAT waa in la caawiyo ardaydaas u baahan waxbarid kala duwan, taageerooyinka hab–dhaqanka, ama waxqabadyada kale si loo xaqiijiyo guusha goobta waxbarashada guud. Waxa diiradda lagu saarayo waa ka hortag iyo baridda xirfadaha cusub ee goobta waxbarashada guud.

**Shirka Ardayda –** Wadaxaajood ama wadahadal maamulku wado ee ardayda lala sameeyo si wax looga qabto arrimaha la halmaala waxbarashadooda ama hab–dhaqankooda.

**Labbiska Ardayga –** Habka labiska ama is qurxinta shaqsiga ah ee aan ku habboonayn siyaasadaha ama hab–raaca lagu dhaqmo dugsiga ama degmadu. Wixii faahfaahin dheeraad ah, eeg Xeerka Guddiga 501.03, iyo Xeerka Guddiga 501.04 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**).

**Kooxda Gurmadka Ardayga –** Horey loogu yaqiiney "Guddiga Dhibaatada Ardayga" Haddii ay jiraan tabashooyin xaga hab–dhaqanka oo dhab ahi, guddigani wuxuu la kulmaa si uu u xalliyo dhibaatada iyo tallaabooyinka xiga.

**Waxyeello Wayn oo Jirka ah –** Dhaawac jirka ah oo ku lug leh ku meel gaar ah laakiin cillad la taaban karo, ama keena ku meel gaar ah laakiin khasaare weyn ama dhaawac ku ah shaqada xubin walba oo jireed ama xubin walba, ama sababa jabka xubin walba oo jirka ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka eeg Minn. Stat. § 609.02, subd. 7a.

**Ka joojinta –** Tallaabo uu qaado maamulka dugsiga si uu arday ooga mamnuuco inuu dhigto dugsiga muddo ka badan hal (1) maalin iyo muddo aanan ka badneyn toban (10) maalmood oo dugsiyeed. Shan maalmood oo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa haddii ka reebidda ama ka eryidda la tixgeliyo, ama haddii joogitaanka arday ay abuureyso khatar degdeg ah oo la taaban karo. Eeg Minn. Stat. § 121A.41, iyo Xeerka Guddiga 506.03.

**Daahitaanka –** Imaanshaha ka daahitaanka dugsiga ama fasalka. Sidoo kale ka eeg Maqnaanshaha.

**Jees–jeeska iyo magac ku caayid –** Dhacdooyinka jees–jeeska ama magac ku caayidda ama halaga lahaado ama yaan laga lahaan ujeeddo lagu dhaawacayo, bahdilaayo, ceebaynayo, ama lagu cabsi galinayo dadka kale oo aanan buuxineynin qeexitaanka Xoog u sheegashada.

**Isticmaal Xumada/Xadgudubka Teknoolojiyadda –** Ardayga ku lugta yeesha isticmaalka aanan habbooneyn ee tiknoolajiyadda oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn iPad–ka, aalada moobeelka, aalada elektarooniga ee gaarka loo leeyahay, kaamirada, kumbiyuutarka iyo/ama kuwa kale. Kasaarista ardayga uu kaarka keydka maskaxda ama batariga ka saarayo kaamiradda, taleefanka, ama aalada moobeelka marka lagu jiro habka looga qaadayo ayaa loo tixgeliyaa inay sabab u tahay inuu tillaabo edbin ah ka qaado dugsiga. Si aad u hesho faahfaahino dheeraad ah ku dhufo eeg Xeerka Guddiga 520 Isticmaalka Tignoolajiyadda iyo Bedqabka.

**Isticmaalka Tiknoolajiyadda, Aan la fasaxin ama Aanan Habbooneyn ee Agabyada Tiknoolajiyada Degmada –** Fal walba oo ku xadgudbaya sharciga Gudiga Waxbarashada ee Isticmaalka Tiknoolojiyadda iyo Xeerka Bedqabka ama ku dhaqaaqa isticmaal aan la aqbali ama sharci darro ah oo lagu sameeyo qalabka kombiyuutarada ee degmada, nidaamyada, qadadka ama softiweerka. Tani waxaa ka mid ah diritaanka ama soo dhigista farriimo qoraal ah ama sawiro khatar ah iyadoo la isticmaalayo khadka intarneedka, taleefanada aanan xargaha khadka lahayn, ama aaladaha kale ee isgaarsiinta. Siyaasadani waxa ay khuseysaa falalka ardayga ee kadhacaya hantida dugsiga ama meel kabaxsan iyo inta lagu jiro saacadaha dugsiga ama ka dib ee la isticmaalayo agabka tiknoolajiyadda degmada.

Tallaabooyinka maamulka waxaa ka mid noqon kara xaddididda isticmaalka tiknoolajiyadda, ka joojin ama ka saarid dugsi, ogeysiinta booliiska, iyo/ama bixinta magdhowga khasaaraha. Wixii faahfaahino dheeraad ah eeg: Xeerka Guddiga 520.00. Eeg Xoog u sheegashada, Xoog ugu sheegashada Intarneedka, Dhibaateynta.

**Xatooyo –** Qaadasho/haysasho aan la fasixin ee hantida iskuulka degmada iyo hantida mid kale oo ka mid tahay laakiin aan ku koobnayn jaakado, aaladaha elektronikada ee qaaliga ah, iwm.

**Hanjabaadaha –** Hadal walba, qoraal, ama muujin muuqata oo leh ujeedo lagu doonayo in waxyeello ama rabshad loo geysto qof kale ama hanti kale. Tusaalooyinka hanjabaadaha ee ku xadgudbaya siyaasadan waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn, hanjabaadaha lagu waxyeeleynayo hantida shakhsiga, sida gaariga ama kumbiyuutarka, hanjabaadaha weerar loogu geysanayo shakhsi kale, ama hanjabaadaha aanan gaarka ahayn ee dhaawac loogu geysanayo shakhsi kale. Tusaalooyinka muujinada aanan soo hoos galeynin hanjabaada waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn, kaftanka, faalooyinka kajanta ah, foorjeynta saaxiibtinimada ah, ama caro lasoo boodida aanan ujeedo lahayn. *Maamulayaasha waa inay si taxadar leh u qiimeeyaan ujeedka ardayga uu u sameynayo muujinta oo ayna tixgeliyaan arrimaha lagu aqoonsaday bogga 14–aad. *  Hanjabaadaha waxaa loo soo sheegaa iyadoo la isticmalayo saddexda qeybood ee soo socdo:

- **Hanjabaado, Qof Ahaan –** Muujin walba oo niyaddeedu tahay in lagu sababo waxyeelo ama rabshad qof kale ama qof kale hantidiisa oo ka imaatay qof masaafo ahaan aad ugu dhow qofka looo hanjabaayo. Dhici-karnimada waxyeelada degdega ah ama rabshadaha waa inay jirtaa.
- **Hanjabaado, Aan Ahayn Qof Ahaan –** Muujin walba oo la doonayo in lagu sababo waxyeelo ama rabshad qof kale ama qof kale hantidiisa taasoo hawada la soo mariyo ama qaab kale ku imaaday.
- **Hanjabaadaha, Kasii Daray –** Hanjabaad walba oo rabsho:

  (i) la sameeyay iyadoo ujeedku yahay in la sababo cabsi xad-dhaaf ah ama walwal laguna dhex abuuro qayb wayn oo ka mida bulshada iskuulka;

  (ii) la sameeyay iyadoo ujeedku yahay in la sababo daad-gurayn ama albaabada la iskugu dhufto dhisme, meel la iskugu yimaado, xaflad iskuul, ama baabuur;

  (iii) la sameeeyay marar badan oo looga soo hor jeedo shaqsi ama urur; AMA

  (iv) muujin walba oo aanan buuxin qeexidda hanjabaad, laakiin loo sameeyay iyadoon dan laga lahayn khatarta, oona dhab ahaantii sababaysa cabsida xad-dhaafka ah, walwalka, daad-guraynta, ama xiritaanka lagu maleeyay (i) iyo (ii).

Tusaalooyinka hanjabaada ka sii dartay waxaa ku jiri kara, laakiin aanay ku koobneyn, arday ku baaqaya hanjabaad bam, arday baraha bulshada soo dhigaya inuu rabo inuu toogasho ka geysto dugsiga, arday ku hanjabaya inuu gubo dhismaha dugsiga ama dugsiga, ama arday sameeya kaftan keenaya in dhismaha dugsiga la xiro.

*** Maamulayaasha tixgelinaya xad-gudubkan waa in ay si taxadar leh dib u eegaan qeexida hanjabaadda uu isticmaalo buug-gacmeedkan si loo go'aamiyo in xadgudubka ku habboon uu yahay Hanjabaado; Hanjabaado, Ka sii daray; ama Luuqad Afxumo leh.***

**Haysashada/Isticmaalka Tubaakada iyo Aaladaha kale ee Tubaakada la xiriira, –** Ardayda waxaa laga mamnuucay inay haystaan tubaako, qarxiso, tarraq, sigaarka elektarooniga ah, aaladaha lagu geeyo ee elektarooniga ah, iyo haysashadooda aaladaha la xariira tubaakada. Haysashada ama isticmaalka wax walba oo nooc badeeco tubaako ah oo uu haysto arday waxaa maamuli doona Xeerarka Minnesota iyo Xeerka Guddida Waxbarashada ee SPPS ee ku saabsan Deegaanka Xorta ka ah ee Tubaakada. Saddex xadgudubyo oo iskuxiga waxaa ka dhalan doonta in loo gudbiyo Qareenka Degmada Ramsey. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Xeerka Guddiga 414.00 (barta onlaynka **spps.org/boardpolicies**.

**Gacan Udhaafka –** Ku sii nagaanshaha dhismaha dugsiga ama hawlaha dugsiga ka dib markii uu ku amray maamulaha dugsigu ama qof kale oo si sharci ah mas'uul ka ah xakamaynta dhismaha inuu ka tago iskuulka. Joogitaanka dhismaha dugsiga inta lagu jiro muddada cayrinta ama ka joojinta waxaa loo tixgeliyaa gacan dhaaf. Wixii faahfaahin dheeraad ah ka eeg Minn. Stat. § 609.605, subd. 4; St. Xeer-Dejinta Paul. § § 283.01-283.03.

**Adeegsiga Aanan La Fasaxin ee Hantida Dugsiga –** Isticmaalka aanan la fasaxin ama sharci darrada ah ee hantida dugsiga ee hawlaha uusan soo qaban qaabin.

**Xadgudubka –** Sameynta wax lagu mamnuucay siyaasada, sharciga, ama anshaxa habdhaqanka.

**Digniin –** Wadaxariir afka ah ama qoraal ah oo lagu joojinayo habdhaqan faragalin ku yeelanaya deegaanka waxbarashada ama aanan badbaado ahayn.

# Lifaaqqa I’aad - Siyaasadaha Guddiga Waxbarashada

## 501.00 Mamnuucida Waxyeeleynta

1. Ma jiro arday, macalin, maamule, isxilqaame, qandaraasle, shaqaale kale ee Degmada Dugsiga ama xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada oo qorsheyn kara, amri kara, dhiirigelin kara, caawin kara, ama ku lug yeelan kara waxyeeleyn.
2. Ma jiro macalin, maamule, isxilqaame, qandaraasle, shaqaale kale ee Degmada Dugsiga ama xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada oo oggolaan kara, dusha ka daawan kara ama u dulqaadan kara waxyeeleyn.
3. Oggolaanshaha muuqda ama ogolaanshaha qofka la waxyeeleeyey kama dhimayso mamnuucida ku jirta xeerkan.
4. Mamnuucista waxyeeleynta waxa ay gaarsiisan tahay habdhaqanka ka dhaca hantida dugsiga ama meel ka baxsan inta lagu jiro saacadaha dugsiga ama ka dib.
5. Qofki ku lug yeesha fal ku xadgudbaya mamnuucista degmada ee waxyeeleynta ama sharci walba oo mamnuucaya waxyeeleynta si loogu bilaabo ama loola xariiriyo urur arday waxaa laga qaadi doonaa edbinta falkaas.
6. Degmada Dugsiga waxa ay baari doontaa dhammaan cabashooyinka waxyeeleynta waxa ayna edbin doontaa arday walba, macalin, maamule isxilqaame, shaqaale kale ee Degmada Dugsiga ama xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada oo lagu helo inuu ku xadgudbay Xeerkan.

### Qeexitaanada

1. “Waxyeelleyn” micnaheedu waa fal ka dhan ah arday, ama ku qasbidda arday inuu fal geysto, taasi oo halis weyn ku abuureysa qofka, si ardayga loogu bilaabo ama lagu xiro koox, ama ujeedadi walba ee kale. Ereyga waxyeelleyn waxaa ku jira, laakiin aanay ku koobneyn:
    a. Nooc walba oo axmaqnimo jireed ah sida uleynta, garaacista, karbaashka, calaameynta jirka, koronto kuqabashada, ama gelinta jirka walxaha waxyeellada leh.
    b. Nooc walba oo shaqo jireed ah sida kaxaqiridda hurdada, istaajinta cimilo daran, ku xiridda meel xaddidan, jimicsi ama hawl kale oo ardayga ugeysaneysa waxyeelleyn aan macquul ahayn ama si daran u saameyneysa caafimaadka maskaxda ama jirka ama bedqabka ardayga.
    c. Hawl walba oo ku lug leh isticmaalka khamrada, daroogada, badeecada tubaakada ama cunto kale ee walba, dareere, ama walxo ardayga u keenaya halis waxyeello oo aan macquul ahayn ama si daran u saameyneysa caafimaadka maskaxda ama jirka ama bedqabka ardayga.
    d. Hawl walba ama wadaxariir cabsi gelinaya ama ugu hanjabaya ardayga faquuq, ugeysanaya ardayga walbahaar maskaxeed oo aad u daran, yaxyax, ceebeyn ama bahdil, oo si daran u saameynaya caafimaadka maskaxda ama sharafta ardayga ama ka niyad jebinaya ardayga inuu kusii sugnaado iskuulka.
    e. Hawl walba oo ku keeneysa ama kaga baahaneysa ardayga inuu qabto hawl ku lug yeelaneysa ku xadgudubka gobolka ama dawladda dhexe ama siyaasadaha ama qawaaniinta Dugsiga Degmada.
2. “Ururka ardayda” micnihiisu waa koox ama naadi ama urur xubnihiisa aasaasiga ah ama ka qeybgalayaashiisa ay yihiin arday. Waxaa ka mid ah heerarka darajada, fasallada, kooxaha, hawlaha ama dhacdooyinka gaarka ah ee iskuulka. Ururka ardayda ma ubaahna inuu ahaado urur rasmi ka ah iskuulka si uu u soo galo qeexitaankan.

### Habraacyada Soo Sheegitaanka

1. Qof walba oo aaminsan inuu dhibane u yahay waxyeelleyn ama qof walba oo ka warhaya ama aaminsan in fal lageystay uu noqon karo waxyeelleyn waa inuu ficilada la sheegay sida ugu dhakhsaha badan ugu sheegaa masuulka ku habboon ee Degmada Dugsiga ee loo xilsaaray xeerkan.
2. Maamulaha dhismaha waa qofka masuulka ka ah in loo soo sheego warbixinada ku saabsan waxyeelleyn ka dhacday heerka dhismaha. Qof walba waxa si toos ah ugu soo sheegi karaa Waaxda Maareynta Shaqaalaha ama Xafiiska Kormeeraha Guud.
3. Macallimiinta, maamulayaasha, isxilqaamayaasha, qandaraaslayaasha, shaqaalaha kale ee Dugsiga Degmada iyo xubnaha ka tirsan Guddiga Waxbarashada waa inay si gaar ah ooga digtoonaadaan xaaladaha suurtagalka ah, daruufaha ama dhacdooyinka laga yaabo inay ku jiraan waxyeelleyn. Qof walba oo noocaan ah, oo hela warbixin ah, soo indha-indheeya, ama taasi ay keeni karto waxyeelleyn, waa inuu si degdeg ah kusoo wargeliyaa maamulaha dhismaha.

4. Gudbinta cabasho daacad ah ama warbixinta waxyeelleynta saameyn kuma yeelan doonto shaqaaleysiinta mustaqbalka, darajooyinka, ama shaqada qofka soo gudbiyey cabashada ama warbixinta.

**Tallaabada Degmada Dugsiga**

Marka ay soo gaarto cabasho ama warbixin waxyeelleyn ah, Degmada Dugsiga waxa ay qaadi doontaa ama ay oggolaan doontaa baaritaanka maamulaha cidda uu maamulaha ooga warbixiyo ama daraf saddexaad oo ay u xilsaartay Degmada Dugsiga. Degmada Dugsiga waxaa laga yaabaa inay qaado tallaabooyin degdeg ah oo ay ku ilaaliso qofka soo gudbiyey cabashada, wariyaha, ardayda ama kuwa kale inta laga dhammeystirayo baaritaanka waxyeelleynta. Marka la dhammeystiro baaritaanka, Degmada Dugsiga waxa ay qaadi doontaa tallaabada ku habboon. Tallaabada noocani ah waxaa ku jiri kara, laakiin aanay ku koobneyn, digniin, fiijin, ka saarid, cayrin, beddel, dib u dhexdhedhexaadin, joojin ama burin. Cawaaqibta edbinta waxa ay noqon doontaa mid si ku filan aad u daran si wax looga qabto xadgudubyada oo si ku habboona looga edbiyo habdhaqanka la mamnuucay.

**Aargoosiga**

Degmada Dugsiga waxa ay edbin doontaa ama tallaabo ka dhan ah ka qaadi doontaa arday walba, macalin, maamule, is-xilqaame, qandaraasle, shaqaalaha kale ee Degmada Dugsiga ama xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada oo ka aarsada cid walba oo si daacadnima ah u soo sheegta waxyeelleynta la sheegay ama mid ka dhan ah qof walba oo ka marqaati fura, ka caawiya ama ka qeybqaata baaritaan, ka dhan ah qof walba oo ka marqaati fura, ka caawiya ama ka qeybqaata dacwadaha ama dhageysiga la xariira waxyeelleynta noocaan ah.

Aargoosiga waxaa ku jira laakiin aanay ku koobneyn, nooc walba oo caga jugleyn ah, aarsasho ama dhibaateyn.

**Xeerka Faafinta**

Siyaaddani waxa ay ka muuqan doontaa buug-gacmeedka arday walba iyo iskuul walba dhismihiisa iyo buug-gacmeedyada shaqaalaha.

**Tixraacyada Sharciga:**

- Minn. Stat. § 121A.69

**Isdhaafsiga Tixraacyada:**

- Xeerka Guddiga 506.00 Anshaxa Ardayga
- Xeerka Guddiga 415.00 Dhibaataynta, Shaqaaqada iyo Habdhaqan Xumada Kale

## 505.00 Mamnuucida Xoog u Sheegashada

**Ujeedada**

Deegaan bedqaba oo taageero leh waxa uu muhiim u yahay Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul ("Degmada") si loogu taageero guusha tacliinta iyo bulshada ee dhammaan ardaydooda. Ardayda iskuulka ka dhigta Degmada waxaa laga filayaa inay ixtiraamaan nafsadooda, deegaanka waxbarshada, ardayda kale, waaliddiintooda/dadka masuulka ka ah, qoysaskooda iyo dhammaan shaqaalaha. Xoog u sheegashada waxa ay si adag mamnuuc ooga tahay Degmada. Xeerkani waxa uu wax ka qabtaa xoog u sheegashada ardayda; siyaasadaha kale ee khuseeya la dhaqanka shaqaalaha.

Dadaal lagu bixinayo dhaqan iskuul oo bedqaba oona wanaagsan oo ay helaan dhammaan ardaydiisa, waa ujeedada Degmada:

- Inay barto, tusaaleyso, oo ay xoojiso habdhaqanka, iyo
- Inay baarto, kajawaabto, dhexdhexaadiso, oo ayna edbiso habdhaqanka xoog u sheegashada ee aan si guul ah loogaga hortagin.

**Qeexitaanada**

A. "Xoog u sheegashada" micnaheedu waa cagajugleyn, aflagaado, ama dhaqan waxyeelleyn oo si ula kac weerar u ah iyo:
    (1) inay jirto isu dheellitirnaan la'aan awoodda dhabta ah ama la dareemayo ee u dhaxeysa ardayga ku lug yeelanaya anshaxa la mamnuucay iyo habdhaqanka bartilmaameedka oo dhaqankana uu soo laalaabtay ama uu noqdo taxane; AMA
    (2) xajmi ahaan iyo baaxad ahaan faragalin kuyeelaneysa fursadaha waxbarasho ee ardayga ama waxqabadka ama awoodda uu ooga qeybgalayo hawlaha dugsiga ama waxqabadyada ama awoodda uu kuqaadanayo gunnooyinka iskuulka, adeegyada ama mudnaanta.

B. “Xoog ugu Sheegashada Intarneetka” micnaheedu waxa ay tahay xoog ugu sheegashada iyadoo la isticmaalayo tiknoolajiyada ama isgaarsiinta kale ee elektarooniga ah, oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn gudbinta, calaamad, astaan, qoraal, sawir, cod, ama xog, oo ay ku jiraan qoraal lasoo dhigo madasha goobta Shabakada Intarneedka ee iskuxirka bulshada, oo lagu gudbiyo iyadoo lasii marsiinaayo kumbiyuutar, taleefan, ama qalab kale oo elektaroonig ah.
C. "Akhlaaqda la mamnuucay" micnaheedu waxa ay tahay xoog u sheegashada ama xoog ugu sheegashada intarneetka sida lagu qeexay siyaasadan dhexdeeda ama aargoosi lagu sheegayo, lagu eedeynayo, ama lagu bixinayo macluumaad ku saabsan akhlaaqda noocaan ah ama si bareer ah oga been abuuridda warbixin ku saabsan xoog u sheegasho.
D. "Jawaabta hagaajinta" micnaheedu waxa ay tahay tallaabo lagu jooinayo oona lagu saxayo akhlaaq la mamnuucay, looga hortagayo akhlaaq la mamnuucay inay soo laalaabato, oona looga hortago, lagu taageero, oo waxna looga qabto iyadoo wakiil laga yahay ardayga bartilmaameedka u ah akhlaaqda la mamnuucay.
E. Akhlaaqda cagajugleynta, hanjabaada, aflagaadada ama waxyeeleynta ah waxaa ka mid ah laakiin aanay ku koobneyn, akhlaaq:
    - waxyeello jireed u keeneysa ardayga ama hantida ardayga ama ku keeneysa ardayga inay gasho cabsi macquul ah oo uu kaqabo waxyeeleynta qof ama hanti; ku xadgudbeysa asturnaanta sirta ee filashada macquulka ah ee ardayga;
    - magac dileysa ardayga;
    - waxaa soo hoos galaya ugeysashada dhibaato ka dhan ah dareenka ardayga; ama
    - loo geysto arday walba, oo ay ku jiraan kuwo lagu saleynayo waxa dhabta ama laga ogyahay qofka ee jinsiyada, isirka, midabka, caqiidada, diinta, wadanka uu kasoo jeedo, xaalada socdaalka, jinsiga, xaalada guurka, heerka qoysnimo, heerka dhaqan-dhaqaale, muuqaalka jirka, cidda uu ka helo galmo ahaan, oo ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo fikir cabbirida, heerka tacliinta ee la xariirta waxqabadka ardayga, naafonimada, ama xaalada la xiriirta kaalmada dadweynaha, da’da, ama sifo walba oo dheeraad ah oo lagu qeexay cutubka 363A.
    - u abuureysa ardayga deegaan waxbarasho oo colaadeed, ama
    - u horseedeysa ardayga cagajugleyn, jeej-jees, ceebeyn ama faquuq bulsho.
F. “Aargoosiga” micnihiisu waa aarsi, cagajugleyn, ama nooc walba oo si ula kac ah oo aanan loo aaba yeelin loola dhaqmo cid walba oo si daacadnima ah warbixin oga soo gudbisa xoog u sheegashada la sheegay ama mid ka dhan ah cid walba oo ka marqaati furta, ka caawisa, ama ka qeyb qaadata baaritaanka, dacwada ama dhageysiga la xariira xoog u sheegashada noocaas ah.

**Mamnuucida**

A. Xoog u sheegashada ama xoog ugu sheegashada intarneetka oo kadhan ah arday, oo uu geysto shakhsi ama koox, waa laga mamnuucay Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul.
B. Aarsiga ama aargoosiga ee arday walba ama shaqaale walba oo Degmada ka tirsan uu ugeysto qof walba oo si daacadnima ah u sheega, ku eedeeya, ama u soo sheega akhlaaq la mamnuucay ama keena macluumaadka ku saabsan akhlaaqda noocaan ah waa mamnuuc.
C. Si bareer ah oga been abuuridda warbixin ku saabsan xoog u sheegasho waa mamnuuc.
D. Akhlaaqda la mamnuucay waa ka mamnuuc:
    1. Dhismaha dugsiga, gaadiidka dugsiga ay degmadu bixiso, ama goobaha loo qoondeeyey ardayda inay ku sugaan gaadiidka dugsiga ee ay degmadu bixiso.
    2. Inta lagu jiro barnaamij walba, hawl, dhacdo ama safar uu maalgaliyey ama fasaxay dugsiga.
    3. Isticmaalka kumbiyuutarada dugsiga, tiknoolajiyada elektaroonigga ah,shabakadaha khadka, shirarka, ama liisaska boostada.
    4. Isticmaalka tiknoolajiyada elektaroonigga ee kabaxsan dhismayaasha dugsiga maadi ahaan iyo awood ahaan u carqaladeeya waxbarashada ardayga ama deegaanka dugsiga.
E. Siyaasadani waxa ay khuseysaa shakhsiyaadka oo sida tooska ah ugu lug yeesha fal xoog u sheegasho ah, iyo sidoo kale shakhsiyaadka, habdhaqankooda, si dadban ugu taageera falka xoog u sheegashada ee uu geysto qof kale.
    1. Shaqaalaha, isxil-qaamayaasha, iyo qandaraaslayaasha Degmada waa inaysan oggolaan xoog u sheegashada. Shaqaale walba oo iskuul, oo arka akhlaaq la mamnuucay, ama haya macluumaad la isku halleyn karo oo u horseedi kasrta qof macquul ah inuu ka shakiyo in arday uu bartilmaameed u yahay

akhlaaq la mamnuucay, waa inuu sameeyaa dadaalo macquul ah oo uu wax ooga qabanayo oo uuna ku xallinayo akhlaaqda la mamnuucay. Xeerkani waxa uu sidoo kale khuseeyaa shakhsiyaadka, habdhaqankooda dadban, ku taageera qofkale fal xoog u sheegasho ah.

2. Oggolaanshaha muuqda ama ogolaanshaha ardayga loo xoogsheegtay kama dhimayso mamnuucida ku jirta xeerkan.

**Baaritaanada**

A. Maamulaha waajibku ka saaran yahay dhaqangelinta, iyo su'aalaha ku saabsan, siyaasadani dhisma walba oo iskuul waa maamulaha dhismaha, maamulaha goobta, ama cidda uu u xilsaaro maamulaha dhismaha ama maamulaha goobta.
B. Qof walba oo aaminsan isaga ama iyada inuu ahaa dhibane loo xoog sheegtay, ama qofki walba oo garanaya ama aaminsan akhlaaqda, oo ay soo hoos galeyso xoog u sheegashada, waa inuu u soo sheegaa falalka la sheegay sida ugu dhakhsiyaha badan, ama sida ugu dhakhsiyaha badan dhacdada ka dib.
C. Maamulaha waajibku ka saaran yahay waa inuu baaritaan ku bilaabaa dhammaan warbixinnada ku saabsan akhlaaqda la mamnuucay muddo saddex maalmood ka dib warbixinta.
D. Inta la sugayo dhammeystirka baaritaanka, Degmadu waxa ay qaadi doontaa tallaabooyin degdeg ah oo lagu ilaalinayo bartilmaameedka, wariyaha, ardayda, goob joogayaasha, iyo kuwa kaleba sida lagama maarmaanka ah oona waafaqsan sharciga lagu dabaqi karo.
E. Inta uu socdo baaritaanka, shakhsiga lagu eedeeyey inuu ku lug yeeshay akhlaaqda la mamnuucay waxaa loo oggolaan doonaa inuu iska difaaco.
F. Cabashooyinka iyo baaritaannada cagajuglaynta waxaa lagu diiwaangeliyaa iyadoo la isticmaalayo foomka 415.00.1: Soo Sheegista Takoorka, Dhibaataynta, Rabshada, Cagajuglaynta iyo Hab-dhaqanka kale oo Gafka ah. Maamulaha waajibku saaranyahay wuu dhawri doonaa dhammaan diiwaannada ku saabsan cabashada iyo baaritaanka si waafaqsan habraacyada uu sameeyay Kormeeraha guud.
G. Baaritaanka waxaa loo qaban doonaa si waafaqsan Xeerkan iyo hab-raacyada uu abuuray Kormeeraha Guud.
H. Soo sheegista dhaqan la mamnuucay waxaa loo samayn karaa qaab qarsoodi ah. Hayeeshee, Maamulaha Waajibku saaranyahay waxaa dhici karta inuusan ku tiirsanaan oo kaliya warbixin qarsoodi ah si uu u go'aamiyo anshaxa.
I. Marka la go'aaminayo in dhacdo la soo sheegay ku jirto cagajugleyn, iyo jawaabta ku habboon, Degmadu waxay ku xisaabta ku darsan kartaa dhammaan xaaladaha khuseeya oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, arrimaha soo socda:
    1. Da'da, qaan-gaarnimada, iyo heerka fahamka dhinacyada ku lugta leh;
    2. Heerarka waxyeellada, duruufaha ku xeeran, iyo dabeecadda hab-dhaqanka;
    3. Dhacdooyin hore ama qaabab habdhaqan oo hore ama sii socdo;
    4. Xiriirka ka dhexeeya dhinacyada ku lugta leh; iyo
    5. Macnaha xaalada guud taasoo dhacdada la sheegay ay ku dhacday.
J. Xogta ay soo uruurisay Degmada inta uu baaritaanka socday waxa ay hoos tageysaa Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dawlada Minnesota iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta Xogta.

**Jawaabaha**

A. Marka qofka cabashada kasoo gudbiyey dhaqan la mamnuucay la cadeeyo, maamulaha waajibku saaran yahay waxa uu tixgelin doonaa dhammaan jawaabaha lagu daweynayo ee la heli karo waxa uuna kaqaadi doonaa tallaabada iyo/ama wax ka qabashada ku habboon si waafaqsan Buug-gacmeedka Habdhaqanka Ardayga: Xuquuqda iyo Waajibaadka iyo habraacyada uu sameeyey Kormeeraha Guud.
B. Halki ay ku habboon tahay canuga naafada ah si uu uga horago ama uga jawaabo habdhaqan la mamnuucay, barnaamijka waxbarashada shakhsi ahaaneed ee canuga ama qorshaha qeybta 504 ayaa wax ka qaban doona xirfadaha iyo aqoonta uu canugu ubaahan yahay si uu uga jawaabo ama uusan uga qeyb qaadan dhaqan la mamnuucay.

**Daabacaada, Xogta, iyo Tababarka**

A. Xeerkan waxaa lagu shaacin doonaa iyada oo loo marayo: (1) agabyada cusub ee shaqaalaha; (2) Iyadoo lagu darayo Buug-gacmeedka Habdhaqanka Ardayga: Xuquuqda iyo Waajibaadka loogu talagalay Ardayda, Waaliddiinta, Masuuliyiinta iyo Shaqaalaha; (3) iyadoo lasoo dhigayo webseedka Degmada; (4) iyadoo la siinayo shaqaale walba ee iskuulka iyo qandaraaslaha, haddii uu si joogta ah ula macaamilo ardayda, wakhtiga shaqada uu la leeyahay Degmada; iyo (5) iyadoo si cad loo soo dhigayo xafiisyada maamulka ee Degmada oo dhan.
B. Degmadu waxa ay ubaahan doontaa hormarka xirfadeed ee socda, si waafaqsan sharciga, si ay u xaqiijiso hirgelinta xeerkan.

C. Degmadu waxa ay bixin doontaa macluumaadka ku saabsan agabyada bulshada ee loo heli karo bartilmaameedka dhaqanka la mamnuucay, qofka ku kacay, iyo shakhsiyaadka kale ee ay saameysay, sida ku habboon.

**Tixraacyada Sharciga:**
Minn. Stat. § 121A.031 (Xeerka Xoog Usheegashada Ardayga ee Dugsiga)
Minn. Stat. § 121A.03 (Xeerka Daraasadda)
Minn. Stat. §§ 121A.40-121A.56 (Sharciga Eryidda Ardayga ee Caddaalada ah)
Minn. Stat. § 121A.69 (Xeerka Waxyeeleynta)

**Isdhaafsiga Tixraacyada:**
102.00 Fursadda Siman/Takoor La'aanta
415.00 Dhibaataynta, Shaqaaqada iyo Habdhaqan Xumada Kale
501.00 Mamnuucida Waxyeeleynta
506.00 Anshaxa Ardayga
Buug-gacmeedka Habdhaqanka Ardayga: Xuquuqda iyo Waajibaadka
520.00 Isticmaalka Tignoolajiyadda iyo Bedqabka

## 415.00 Takoorka, Dhibaataynta, Rabshadaha, iyo Aargoosiga

### Ujeedada

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul ("Degmada") waxa ay aaminsan yihiin sharafta ardaydooda, shaqaalaha, iyo dhammaan shaqaalaha kale ee Degmada. Sababtaas darteed, Degmadu waxa ay ku dadaaleysaa inay ilaaliso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo xor ka ah takoorka, cagajugleynta ama shaqaaqada lagu saleynayo isirka, midabka, wadanka uu ka soo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03. Degmadu waxa ay sidoo kale ku dadaaleysaa inay ilaaliso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo xor ka ah aargoosiga. Degmadu waxa ay baaritaan ku sameyn doontaa dhammaan cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada siyaasadan. Inta lagu guda jiro jawaab ka bixinta xad-gudubyada Xeerkan, Degmadu waxay qaadi doontaa tallaabo ku habboon oo saami ah si ay u ilaaliso dhammaan dhibbanayaasha, go'aamiso dabeecadaha mustaqbalka ee la midka ah, oo ay fuliso himilada udub-dhexaadka ah ee Degmada ee wax-barid iyo kor u qaadida koritaanka.

### Bayaanka Guud ee Xeerka

A. Xeerkani waxa ay khuseysaa ardayda, macallimiinta, maamulayaasha, iyo dhammaan shaqaalaha kale ee Degmada.

B. Xeerka Degmadu waa inay ilaaliso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo xor ka ah takoorka, cagajugleynta ama shaqaaqada lagu saleynayo isirka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu ka helo galmo ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03. Degmadu waxa ay mamnuuceysaa nooc walba oo ah takoorka, cagajugleynta ama shaqaaqada lagu saleynayo isirka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03.

C. Xeerka Degmadu waa inay ilaaliso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo xor ka ah aargoosiga. Degmadu waxa ay mamnuuceysaa nooc walba oo ah aargoosi.

D. Ku xadgudubka siyaasadani waxa uu dhacaa marka arday walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ay takooraan ama ay dhibaateeyaan arday, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ama ay u geystaan koox ah arday, macallimiin, maamulayaal, ama shaqaalaha kale ee Degmada iyadoo lagu saleynayo jinsiyada qofka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, galmada ama cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, xubin ka mid noqoshada ama la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03.

E. Ku xadgudubka siyaasadani waxa uu dhacaa marka ardaygi walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ay wax ugeystaan, ku hanjabaan inay wax u geysanayaan, ama ay iskudayaan inay u geystaan shaqaaqo arday walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ama ay u geystaan koox ah arday, macallimiin, maamulayaal, ama shaqaalaha kale ee Degmada iyadoo lagu saleynayo jinsiyada qofka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, galmada ama cidda uu ka helo galmo ahaan ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, xubin ka mid noqoshada ama la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03.

F. Ku xadgudubka siyaasadani waxa uu dhacaa marka arday walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ay ku kula kacaan aargoosi ama ugu hanjabaan aargoosi qof walba oo ama la rumeysan yahay (1) inuu soo sheegay, carabka ku dhuftay, soo eedeeyay in lagu xad-gudbay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale; (2) sameeyay warbixin si niyad sami ah oo ku eedaynaysa qof inuu ku xadgudbay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale; (3) n noqday marqaati baadhis walba oo ku saabsan cabasho ah in lagu xad-gudubay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale; (4) ka marag furay, caawiyay, ama ka qaybqaatay baadhis xaqiiqo raadin ah, dhegaysi, ama dacwad ku saabsan ku xadgudub lagu eedeeyay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale; iyo/ama (5) ka caawiyey samaynta ama fulinta ficilka sixitaanka ee ka jawaabaya xadgudubka Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale.

G. Ku xadgudubka siyaasadani waxa uu dhacaa marka arday walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ay si ula kac ah ay warbixin been abuur ah ka sameeyaan takoor, dhibaateyn, xadgudub, ama aargoosi.

H. Degmadu waxa ay baari doontaa dhammaan cabashooyinka, ha ahaadaan kuwo rasmi ah ama kuwo aan rasmi ahayn, hadal ama qoraal, oo ah takoorka, cagajugleynta ama shaqaaqada ku saleysan isirka qofka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu kahelo galmo ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03. Degmadu waxa ay baari doontaa dhammaan cabashooyinka, ha ahaadaan kuwo rasmi ah ama kuwo aan rasmi ahayn, hadal ama qoraal, oo ah aargoosi. Degmadu waxa ay ku dhaqaaqi doontaa inay edbiso ama tallaabooyinka ku habboon ka qaado oo kadhan ah ardaygi walba, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada ee lagu helo inuu ku xadgudbay Xeerkan.

**Qeexitaanada**

A. <u>Shaqaalaha Degmada</u>, ujeedada siyaasadani oo kaliya awgeed, waxaa ka mid ah xubnaha ka tirsan Guddiga Waxbarashada, shaqaalaha Degmada, wakiilada, isxilqaamayaasha, qandaraaslayaasha, shakhsiyaadka soo hoos galaya kormeerka iyo maamulka Degmada.

B. <u>Dhibaataynta</u> ay mamnuucday Xeerkani waxay ka kooban tahay akhlaaq jir ama hadal ah, oo ay ku jirto, laakiin aan ku koobneyn, wadaxariirka elegtarooniga ah, ee la xiriirta shakhsi ahaanta ama shakhsi ahaanta kooxda ee isirka, midabka, wadanka uu kasoo jeedo, caqiidada, diinta, xaalada guur, heerka qoys, jinsiga, cidda uu ka helo galmo ahaa ama uu jeclaado, aqoonsiga jinsiga iyo aragti cabiridda, xaalada la xariirta kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama xubin ka mid noqoshada la-hawlgalidda guddi maxalli ah sida uu qeexayo Minn. Stat. § 363A.03 marka dhaqanka akhlaaqda:

1. uu leeyahay ujeedo ama saameyn cagajugleyn, cadowtinimo, ama aflagaado ku abuureyso deegaanka shaqada ama tacliinta;
2. uu leeyahay ujeedo ama si weyn u saameyneysa ama si aan caqli gal ahayn u faragalineyso shaqada ama tacliinta ee shakhsi gaar ah; ama
3. haddii kale si xun u saameyneysa fursadaha shaqada ama tacliinta ee shakhsi gaar ah.

C. <u>Isla markiiba</u> micnaheedu waxa ay tahay sida ugu dhakhsiyaha badan wax aanan ka badneyn 1 maalin shaqo. Maalin shaqo waxaa qeexa kalendarka dawladda federaalka, oo ma ahan kalendarka dugsiga Degmada.

D. <u>Qeexitaanada; Kala-soocidda Dadka La-ilaaliyo</u>

1. "Naafo" micnaheedu waxa ay tahay xaalad walba ama sifo walba oo kadhigeysa qofka qof naafo ah. Qofka naafada ah waa qof walba oo:
    a. leh naafonimo jireed, dareen, ama maskaxeed oo awood ahaan qofka ka xadideysa mid ama kabadan hawlaha nolosha ee waaweyn;
    b. leh diiwaan naafonimo noocaan ah; ama
    c. loo arko inuu leeyahay naafonimo noocaan ah.

2. “Heerka qoys” micnaheedu waxa ay tahay xaalada hal canug ama in kabadan ay si joogta ah ula dagan yihiin:
    a. waalidkooda ama waaliddiintooda ama qofka masuul sharci ka ah ilmaha; ama
    b. qofka uu u xilsaaray waalidka ama waaliddiinta ama uu u xilsaaray qofka masuulka ka ah oo oggolaansho qoraal ah ka haysta waalidka ama waaliddiinta ama qofka masuulka ka ah ilmaha. Dadka lasiiyey ilaalinta ka dhanka ah dhibaateynta ku saleysann heerka qoys waxa ay khuseysaa qof walba oo uur ah ama ku guda jira habka si sharci ah lagula wareegayo shakhsi aanan gaarin da’da qaangaarka.
3. “Jinsiga” micnihiisu waxa ay tahay doorarka loo aasaasay bulsho ahaan, habdhaqanka, hawlaha, iyo sifooyinka oo bulsho gaar ah ay ku asteyso dumarnimada ama raganimada.
4. “Cabbirida Jinsiga” micnaheedu waxa ay tahay habka ay shakhsiyaadku jinsiga raganimada ama dumarnimada ugu muujiyaan ama ugu soo bandhigaan dadka kale, inta badan iyadoo lagu soo bandhigayo habdhaqan, labis, qaabka dhismeedka timaha, waxqabadyada, cod, ama habdhaqan.
5. “Aqoonsiga Jinsiga” micnaheedu waxa ay tahay dareenka gudaha ah ee qofka uu qabo ama uu ka og yahay jinsigooda raganimo ama dumarnimo.
6. “Xaalada guur” micnaheedu waxa ay tahay in uu qofku yahay doob, guursaday, dib u guursaday, furay/la furay, lakala tagay, ama lammaane nool iyo, kiisaska shaqada, waxaa ka mid ah ilaalinta ka dhanka ah dhibaateynta lagu saleynayo aqoonsiga, xaalada, ficilada, ama aaminsanaanta lammaane ama lammaane hore.
7. “Wadanka uu ka soo jeedo” micnaheedu waxa ay tahay goobta uu ku dhashay qofka ama mid walba oo ka mid ah awoowayaasha uu ku abtirsado qofka.
8. “Isir” waa mid ka mid ah astaamaha la xiriiro isirka, kuwaasoo ay ku jiraan balse aan ku koobneyn nooca timahu yihiin iyo qaababka timaha loo qaabeeyo sida in la tidco, kuus ahaan la isugu xiro, iyo la isku laalaabo.
9. "Jinsiga" waxaa loola jeedaa waxa uu yahay qofka iyo waxa guud ahaan loo kala saaro lab, dheddig, ama labeeb. "Jinsiga" waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn, uurka, dhalashada canuga, iyo naafonimada la xariirta uurka ama dhalashada canuga.
10. “Cidda uu u janjeero jaceyl ahaan” micnaheedu waxa ay tahay yeelashada ama in laguu arko inaad dareen ahaan, jir ahaan, ama galmo ahaan xiriir la yeelato qof kale iyada oo aanan loo eegeynin jinsiga qofkaas ama yeelashada ama in laguu arko inaad ka hesho la yeelashada noocaas ah, ama yeelashada ama in laguu arko inaad isu muujiso ama laguu aqoonsado inaad dhaqan ahaan aadan ugu xirneen raganimadooda ama dumarnimadooda ay ku dhasheen. “Cidda uu u janjeero jaceyl ahaan” kuma jirto xiriir la yeelashada jireed ama galmo ee carruurta oo uu la yeesho qof qaangaar ah.
11. “Xaalada la xariirta helidda kaalmada dadweynaha” micnaheedu waxa ay tahay xaalada lagu qaadanayo kaalmada federaalka, gobolka, ama deegaanka, oo ay ku jiraan kaalmada caafimaadka, ama inaad tahay qof kireystay guri oo qaadanaya dhaqaalaha kabista federaalka, gobolka, ama deegaanka, oo ay ku jiriaan kaalmada kirada guriga ama kabka kirada guriga.

E. Jawaabta wax lagu saxayo macneheedu waa cabbir lagu joojiyo oo lagu saxo falalka takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga, looga hortago falalka takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga iney soo noqnoqdaan, iyo in la ilaaliyo, la taageero, la soo dhex galo iyadoo lagu hadlayo magaca arday ama shaqaale ah bartilmaameedka ama dhibanaha falalka takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga.

F. Dhibaataynta xaga galmada; Qeexidda

1. Dhibaateynta galmo waxaa ka mid ah galmo ugu tagidda qofka ee uusan soo dhaweyn, codsashada galmo wax ku baddelashada, akhlaaqda dhaqan ahaan galmo ku saleysann ama dhaqanka afka ah ama jirka ah ee kale ama ka wadaxariirka hab galmo markii:
    a. galitaanka habdhaqanka ama wadaxariirka noocaas ah lagu xiro ama lagu shuruudeeyo, midkood si cad ama si dadban, ku helitaanka shaqo ama waxbarasho; ama
    b. galitaanka ama diidmada habdhaqanka ama wadaxariirka noocaas ah ee uu sameeyo shakhsi loo isticmaalo arrin looga gaarayo go’aan saameynayo shaqada ama waxbarashada qofka; ama
    c. habdhaqankaas ama wadaxariirkaas uu yeeshay ujeedada ama saameynta si weyn ama aan caqli gal ahayn u faragalineysa shaqada ama waxbarashada qofka, ama ku abuureysa

cabsigelin, cadowtinimo, ama aflagaado lagu geysanayo deegaanka shaqada ama waxbarashada.

2. Dhibaateynta galmada waxaa ku jiri kara, laakiin aanay ku koobneyn:
    a. Dhibaateyn afka ah ama xadgudub ah oo aan la soo dhaweyn;
    b. Cadaadis aanan lasoo dhaweyn oo hawl galmo ah;
    c. salaaxid, qanjaruufo, ama isu-tag jireed oo aan lasoo dhaweyn, galmo soo jiidaneyso, ama aanan habbooneyn, aanan ka ahayn xakameynta ardayga(da) lagama maarmaanka ah ee macallimiinta, maamulayaasha, ama shaqaalaha kale ee Degmada si looga ilaaliyo inay waxyeello jireed u geystaan dadka ama hantida;
    d. habdhaqan galmo ama ereyo oo aan la soo dhaweyn, oo ay ku jiraan dalbashada in galmo wax lagu bedesho, oo ay la socoto hanjabaado qarsoon ama cad oo ku aadan xaalada shaqo ama waxbarasho ee shakhsiga;
    e. habdhaqan galmo ama ereyo oo aan lasoo dhaweyn, oo ay ku jiraan dalbashada in galmo wax lagu beddesho, oo ay la socoto balanqaadyo qarsoon ama cad oo ah la dhaqan eexasho oo ku aadan shaqada ama waxbarashada shakhsiga; ama
    f. habdhaqan galmo ama ereyo oo aan lasoo dhaweyn oo lagula kacay shakhsi iyadoo loo eegayo cida uu ka helo galmo ahaan, oo ay kujirto aqoonsiga iyo cabbirida galmo.

G. <u>Qeexitaanka: Xadgudub Galmo</u>
1. Xadgudub galmo waa fal jireed oo gardaro ah ama xoog ama hanjabaad oo ku lug leh taabashada qof kale qaybtiisa cawrada ah ama ku qasbida qofka inuu taabto qof walba qaybtiisa cawrada ah. Qaybaha cawrada, sida lagu qeexay Minn. Stat. § 609.341, waxaa ka mid ah agagaarka xubnaha taranka ee aasaasiga ah, gumaarka, bawdada gudaha ah, barida ama naaska, iyo sidoo kale dharka daboolaya meelahaan.
2. Xadgudubka galmada waxaa ku jiri kara, laakiin aanay ku koobneyn:
    a. taabashada, salaaxidda, qabashada, ama qanjaruufada qeybaha cawrada qofkale, ha ahaado qof aad isku jinsi tihiin ama jinsiga kaa soo horjeedo;
    b. juujuubidda, ku qasbidda, ama isku dayidda in loo juujuubo ama lagu qasbo cid walba in la taabto qeybaha cawrada;
    c. juujuubidda, ku qasbidda, ama isku dayidda in loo juujuubo ama lagu qasbo qofkale galmo toos ah ama fal galmo; ama
    d. ugu hanjabidda in lagu qasbo ama loo juujuubo falal galmo, oo ay ku jiraan taabashada qeybaha cawrada ama galmo, lagu sameeyo qof kale.

H. <u>Maamule Waajibku saaranyahay</u>
1. Kolka dhismaha iskuulka la joogo, Maamulaha Waajibku saaranyahay waa maamulaha ama wakiilka maamulaha.
2. Koolka la joogo dhismo ama waax Degmo uusan ka jirin maamule, Maamulaha Waajibku saaran yahay waa kormeeraha dhismahaas ama waaxdaas ama wakiilka kormeerahaas.

I. <u>Ficil Xajmi Ahaan Aad u Daran</u>

Ficil walba oo keenaya ama ugu hanjabaya dhaawac ama waxyeeleyn weyn inuu ku keenayo warbixiye, qofka cabashada soo gudbiyey ama qof kale oo la daboolo taas oo ay u badan tahay in ay ka joojiso arday macquul ah ama shaqaale Degmo inuu sameeyo ama taageero warbixin daacadnimo ah oo laga gudbiyo xadgudubka la sheegay ee Xeerkan. Ficil aad u daran kuma jiro ficil, ay ku jiraan shaqo ama tallaabo tacliimeed, oo la qaadi lahaa iyada oo aan loo eegeynin warbixinta daacadnimada ah ee dhaqanka.

J. <u>Masuulka Xuquuqul Insaanka Degmada</u>
1. Masuulka Xuquuqul Insaanka Degmada waa Agaasimaha Fursadda Shaqo ee Loo Siman Yahay.
2. Guddiga Waxbarashada waxa ay halkan ugu xilsaarayaan Agaasimaha Fursadda Loo Siman Yahay inuu noqdo Masuulka Xuquuqul Insaanka Degmada si uu u helo warbixinada ama cabashooyinka takoorka, dhibaataynta, rabshada, ama aargoosiga ay mamnuucday Xeerkan.
3. Marka ay dhacdo in jagada Agaasimaha Fursadda Shaqo ee Loo Siman Yahay uu bannaan yahay, Masuulka Xuquuqul Insaanka Degmada ee ku meel gaarka ah ayaa ah shakhsiga uu u xilsaaray kormeeraha guud.

**Habraacyada Soo Sheegitaanka**

A. Qof walba oo aaminsan in qofka noocaas ah uu ahaa bartilmaameed ama dhibbane takoor, dhibaatayn, rabshad, ama aargoosi oo xad-gudub ku ah Xeerkan uuna sameeyay arday, macalin, maamule, ama shaqaalaha kale ee Degmada, ama qof walba oo ogaansho u leh ama aaminsan inuu jiro dhaqan kaasoo noqon kara takoorid, dhibaatayn, rabshado, ama aargoosi ay mamnuucday Xeerkan oo lagula dhaqmay arday, macalin, maamulka, ama shaqaalaha kale ee Degmada ama koox arday ah, macallimiin, maamulayaal, ama shaqaalaha kale ee Degmadu waa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan falalka eedda ah sarkaalka Degmada ku habboon oo Xeerkan lagu magacaabay. Qofku waxa laga yaabaa inuu soo sheego dhaqan ka samaysan takoor, dhibaatayn, rabshad, ama aargoosi si qarsoodi ah. Hayeeshee, Degmadu waxaa dhici karta ineysan ku tiirsanaan oo kaliya warbixin qarsoodi ah si ay u go'aamiso anshaxa ama jawaabaha kale ee hagaajinta.

B. Degmadu waxay ku dhiirri-gelinaysaa qolada warbixinta ama qofka cabanaya inay isticmaalaan foomka 415.00.1, laakiin warbixinnada afka ah ayaa sidoo kale loo tixgelin doonaa cabashooyin. Hayeeshee, dhamaan warbixinnada afka ahi waa in si dhaqsa leh Maamulaha Waajibku saaranyahay uu u beddelaa qoraal isagoo isticmaalaya foomka 415.00.1.

C. Ma jiro wax Xeerkan ka mid ah oo ka hor istaagaya qofna inuu si toos ah ugu soo sheego takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga Sarkaalka Xuquuqul Insaanka ee Degmada ama kormeeraha guud. Haddii cabashadu ay ku lug leedahay Maamulaha Waajibku saaranyahay, cabashada waa in loo sameeyaa ama si toos ah loogu xareeyaa kormeeraha guud ama Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada taasna waxaa samaynaya qolada warbixinta ama qofka cabanaya.

D. Heerka dhismaha ama waaxda kolka la joogo Maamulaha Waajibku saaranyahay waa qofka ka mas'uulka ah helitaanka warbixino af ama qoraal ah oo ku saabsan takoorid, dhibaatayn, rabshad, ama aargoosi ay mamnuucday Xeerkan. Shaqaale walba oo qaan gaar ah oo Degmada u shaqeeya oo hela warbixinta takoorka, dhibaataynta, gacan ka hadalka, ama aargoosiga ay mamnuucday Xeerkani waa in ay si degdeg ah u wargeliyaan Maamule Waajibku saaranyahay, haddii aanay cabashadu ku lug lahayn eedaymo ka dhan ah Maamulaha Waajibku saaranyahay. Haddii cabashadu ay ku lug leedahay eedeymaha ka dhanka ah Maamulaha Waajibku saaranyahay, cabashada waa in loo sameeyaa ama si toos ah loogu xareeyaa kormeeraha guud ama Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada isla markiiba. Maamulaha Waajibku saaranyahay iyo Sarkaalka Xuquuqul Insaanka ee Degmada waa in ay hubiyaan in Xeerkan iyo habraaceeda, ku-dhaqankeeda, cawaaqibkeeda, iyo cunaqabataytuba si cadaalad ah oo dhammaystiran loo fuliyay.

E. Macallinka, maamulka dugsiga, tabaruce, qandaraasle, ama shaqaale kale oo dugsigu waa inay si gaar ah uga feejignaadaan xaaladaha, duruufaha, ama dhacdooyinka ay ku jiraan falalka takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga. Qof walba oo noocaas ah oo ka marag kaca, fiirsada, helaya warbixinta, ama leh ogaansho kale ama aaminsan inuu jiro dhaqan kaasoo noqon kara takoor, dhibaatayn, rabshad, ama aargoosi waa inuu sameeyaa dadaal macquul ah oo uu wax kaga qabanayo kuna xalliyo takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga waana in uu si degdeg ah u ogeysiiyaa Maamulaha Waajibku saaranyahay, hadddii uusan qofka noocaasihi garanayn ama uusan u hayn sabab uu ku rumaysto in Maamulaha Waajibku saaranyahay uu ku kacay dhaqanka ay mamnuucday Xeerkan. Xaaladahan oo kale, warbixinta waa in si toos ah loogu gudbiyaa kormeeraha guud ama Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada isla markaaba. Shaqaalaha Degmada ee ku guul daraysta in ay u sheegaan Maamulaha Waajibku saaranyahay dhaqanka ay ku jirto takoorid, dhibaatayn, rabshado, ama aargoosi ama ku guuldareysta in ay sameeyaan dadaal macquul ah si ay wax uga qabtaan oo ay u xalliyaan takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga wakhtiga ku habboon ayaa laga yaabaa in lagu xukumo tallaabo anshaxeed.

F. Marka la helo warbixinta, Maamulaha Waajibku saaranyahay waa inuu si degdeg ah u ogeysiiyaa Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada, ka hor inta uusan u kuur-galin ama baarin warbixinta. Maamulaha Waajibku saaranyahay wuxuu codsan karaa, laakiin kuma adkeysan karo, cabasho qoraal ah. Warbixin qoraal ah oo ku saabsan xaqiiqooyinka lagu eedeeyay waxaa isla markiiba gudbin doona Maamulaha Waajibku saaranyahay wuxuuna u gudbinaya Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada. Haddii warbixinta lagu bixiyay afka, Maamulaha Waajibku saaranyahay waa inuu shakhsi ahaan u beddelaya qaab qoraal ah hal (1) maalin shaqo gudaheed. Ku guuldareysiga in la gudbiyo warbixin walba ama cabashada takoorka, dhibaataynta, rabsho, ama aargoosiga sida halkan lagu sheegay waxay keeni kartaa tallaabo anshaxeed oo ka dhan ah Maamulaha Waajibku saaranyahay.

G. Haddii cabashada habdhaqanka la mamnuucay ee Xeerkan ay ku lug leedahay eedeymo kadhan ah Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada, cabashada waa in isla markiiba si toos ah looga xareeyaa kormeeraha guud. Haddii cabashada habdhaqanka la mamnuucay ee Xeerkan ay ku lug leedahay eedeymo ka dhan ah kormeeraha guud, warbixinta waxaa si toos ah looga xareyn karaa Guddiga Waxbarashada.

H. Degmadu waxa ay si cad u soo dhajin doontaa magaca Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada, oo ay ku jiraan ciwaanka boostada iyo lambarka taleefanka.
I. Soo gudbinta daacadnimada ah ee cabasho ama warbixin ah takoor, dhibaateyn, xadgudub, ama aargoosiga lagu mamnuucay Xeerkan ma saameyn doonto qofka cabanaya ama weriyaha ah mustaqbalkiisa shaqada, darajooyinka, hawlaha shaqada, ama deegaanka waxbarashada ama shaqada.
J. Isticmaalka foomamka warbixinta rasmiga ah ma ahan qasab.
K. Warbixinada takoorka, dhibaateynta, xadgudubka, ama aargoosiga lagu mamnuucay Xeerkan waxaa loo kala saaraa xog waxbarasho oo gaar ah iyo/ama shakhsi ahaaneed iyo/ama xog baaris qarsoodi ah mana la shaacin doono marka laga reebo sida uu sharcigu oggol yahay.
L. Degmadu waxa ay ixtiraami doontaa asturnaanta sirta ee qofka(dadka) cabashada soo gudbiyey, shakhsiga(shakhsiyaadka) cabashada laga gudbiyey, iyo markhaatigaba ilaa inta suuragalka ah, si waafaqsan waajibaadka sharci ee degmada ka saaran inay baarto, inay ka qaaddo tallaabooyinka ku habboon, iyo inay u hoggaansanto iyo in loo hoggaansamo wax walba oo daah-furida ama bixinta waajibaadka ah.
M. Ka aargoosiga ka dhanka ah dhibane, qof si daacadnima ah u soo sheegay, qofka markhaatiga ka ahaa takoorka, xadgudubka, dhibaateynta, ka aargoosiga, ama shakhsiga ku lugta leh soo saarista ama dhaqangelinta tallaabooyinka sixitaanka ah waa la mamnuucay.
N. Ka been abuuridda ama warbixinaha takoorka, dhibaateynta, xadgudubka, ama aargoosiga ka dhanka ah qof kale waa la mamnuucay.
O. Qofki ku lug yeesha fal ah takoor, dhibaateyn, xadgudub, aargoosi, ama ka been abuuridda warbixinta takoorka, dhibaateynta, xadgudubka, aargoosiga, ama oggolaada, dusha ka daawada, u dul qaata takoor, dhibaateyn, xadgudub, ama aargoosi waa in lala tiigsadaa edbin ama jawaabaha kale ee lagu hagaajinayo falkaas si waafaqsan xeerarka iyo habraacyada Degmada.

**Baaritaanka**

A. Iyadoo la adeegsanayo awoodda Degmada, Maamulaha Waajibku Kasaaran yahay, muddo saddex (3) maalmood oo shaqo gudahood ee helitaan warbixinta ama cabashada sheegeysa takoorka, dhibaateynta, xadgudubka, ama aargoosiga lagu mamnuucay siyaasadan, waa inuu qaadaa ama uu ansixiyaa in la sameeyo baaritaan. Baaritaanka waxaa sameyn kara masuuliyiinta Degmada ama daraf saddexaad oo ay u xilsaartay Degmada.
B. Baaritaanka waxaa ku jiri kara wareysiyo shakhsi ahaaneed oo lala yeesho qofka soo gudbiyey cabashada, shakhsiga(shakhsiyaadka) cabashada laga gudbiyey, iyo kuwa kale ee laga yaabo inay wax ka ogyihiin dhacdada( dhacdooyinka) la sheegay ama xaaladaha keenaya cabashada. Baaritaanka waxaa sidoo kale ku jiri kara hababkii kale ee walba iyo dukumiintiyada ama faylasha elektarooniga ah iyo/ama fiidiyowyada loo arko inay khuseeyaan qofka baaraya.
C. Go'aaminta in akhlaaq la sheegay ay ka dhigan tahay xadgudubka xeerkan, Degmadu waa inay tixgelisaa daruufaha ku gadaaman, nooca habdhaqanka, dhacdooyinki hore, ama habdhaqanka taxanaha ah ee hore ama socdo, xiriirka ka dhexeeya dhinacyada ku lugta leh, iyo xaalada guud ee dhacdooyinka la sheegay ay ku dhaceen. In fal ama dhacdo gaar ah ay kadhigan tahay xadgudubka siyaasadan waxa ay u baahan tahay go'aaminta ku saleysann xaqiiqooyinka iyo daruufaha ku gadaaman iyadoo la adeegsanayo heerka caddaynta ugu sarreeya.
D. Intaa waxaa dheer, Degmadu waxa ay isla markiiba qaadi kartaa tallaabooyin, iyadoo adeegsaneysa ikhtiyaarkeeda, lagu ilaalinayao bartilmaameedka ama dhibanaha, qofka cabashada soo gudbiyey, iyo macallimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale ee Degmada inta laga soo dhammeystirayo baaritaanka eedeynta la sheegay ee takoorka, dhibaateynta, xadgudubka, ama aargoosiga lagu mamnuucay Xeerkan.
E. Baaritaanka waxaa lagu soo dhammeystiri doonaa muddo 30 maalmood oo shaqo ah gudahooda laga bilaabo markii la qabtay cabashada, ilaa aysan macquul ahayn in baaritaanka lagu dhammeystiro muddadan dhexdeeda. Qofka dhammeystiraya baaritaanka waa inuu diiwaangeliyaa baaritaanka iyo waxa lagu soo gabagabeeyey foomka 415.00.1. Warbixintu waa inay ku jirtaa go'aaminta in eedeymaha loo caddeeyey inay yihiin kuwo xaqiiqo ah iyo in ay muuqdaan kuwo ku xadgudbaya Xeerkan. Marka la dhammeystiro baaritaanka, Maamulaha Waajibku saaranyahay waa inuu xaqiijiyaa in foomka 415.00.1 iyo warbixinti walba ee kale ee baaritaanka loo gudbiyo labadaba Sarkaalka Xuquuqul Insaanka Degmada iyo qofka soo socda:
    1. Baaritaanka ku lugta leh eedeymaha kadhanka ah arday, waa in loo gudbiyaa kaaliyaha kormeeraha guud ee deegaanka; ama

2. Baaritaanka ku lugta leh eedeymaha ka dhanka ah shaqaalaha Degmada, waa in loo gudbiyaa Agaasimaha Fulinta Maamulka Shaqaalaha ama wakiilka Agaasimaha Fulinta.

**Talaabada Sixitaanka Degmada**

A. Degmadu waxa ay tallaabo sixitaan ah ka qaadi doontaa ku xadgudubka siyaasadan. Tallaabada sixitaanka noocaan ah waxa ay waafaqsanaan doontaa sharciga iyo xeerarka, siyaasadaha Degmada, iyo heshiisyada gorgortan wadareedka ee khuseeya.

B. Tallaabada sixidda waxa ay noqon doontaa mid si ku filan aad u daran si la isugu dayo in wax looga qabto xadgudubyada oo si ku habboona looga edbiyo habdhaqanka la mamnuucay.

   1. Talaabada sixitaanka ee ardayda ku kacda, ama qayb ka noqda, falalka mamnuuca ah ee takoorka, rabshad, dhibaataynta, ama aargoosiga, ama ku lug yeesha si ula kac ah warbixinta beenta ah ee takoorka, dhibaataynta, rabshad, ama aargoosiga waxaa ka mid ahaan kara, laakiin aan ku koobneyn. jawaababha hagaajinta, faragelinta dhaqanka wanaagsan, faragelinta iyo dhaqamada soo celinta ama jawaababha, digniinaha, wareejinta, ka joojinta, iyo/ama cayrinta.
   2. Talaabada sixitaanka ee shaqaalaha fasaxa, ogolaada, ama u dulqaata takoorka, dhibaataynta, rabsho, ama aargoosiga, ama ku lug yeesha si ula kac ah warbixinta beenta ah ee takoorka, dhibaataynta, rabshad, ama aargoosiga waxaa ka mid ahaani kara, laakiin aan ku koobneyn, jawaababha hagaajinta iyo/ama tallaabo anshaxeed ilaa iyo ay ku jirto joojinta ama ka saarista.
   3. Talaabada sixida ee shaqsiyaadka kale ee ku kaca falalka mamnuuca ah ee takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga, ama ku kaca warbixin been abuur ah oo ula kac ah ee takoorka, dhibaataynta, rabshadaha, ama aargoosiga waxa ku jiri kara, laakiin aan ku xaddidnayn, in laga dhex saaro hantida Degmada iyo dhacdooyinka iyo/ama laga joojiyo adeegyada iyo/ama qandaraasyada.

C. Degmadu sidoo kale waxa kale oo ay ku edbin kartaa arday walba, shaqaale, ama shaqaale walba oo degmada ka tirsan hadallo cay ah ama dhaqan ku salaysan sifooyinka lagu sheegay Qaybta I ee Xeerkan, sifooyinkaasoo aan ka dhignayn takoorid sharci-darro ah, dhibaatayn, rabshado, ama aargoosi laakiin markii si loo fiiriyo aanaan habboonayn.

D. Degmadu looma oggola inay u sheegto dhibbanaha xogta khaaska ah ee waxbarashada ama shaqaalaha ee ku saabsan dembiilaha la eedeeyay oo ah arday ama shaqaalaha Degmada, marka laga reebo sida uu sharcigu oggol yahay.

E. Si looga hortago ama looga jawaabo falalka takoorka, dhibaataynta, rabshada, ama aargoosiga uu sameeyay cunuga naafada ah ama isagaba lagu sameeyay, Degmadu iyadoo fiirinaysa meelaha ay go'aamisay barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmaha ("IEP") ama kooxda Qaybta 504 iney haboon yihiin, waa inay u oggolaataa qorshaha IEP-ga ee cunugga ama Qaybta 504 in loo diyaariyo si wax looga qabto xirfadaha iyo aqoonta cunuggu u baahan yahay taasoo ka dhalatay naafanimada cunugga si loogu oggolaado cunuggu inuu ka jawaabo ama aanu samaynin falal takoor, dhibaatayn, rabshado, ama aargoosi.

**Aargoosiga**

A. Degmadu waxay mar walba si aan leexleexad lahayn u mamnuucdaa aargoosiga, waxayna edbin doontaa ama qaadi doontaa tallaabo kale oo sixid ah, oo ka dhan ah qof walba oo Xeerkani khusayso ee ku kaca aargoosiga ama ku hanjaba aargoosi ka dhan ah qof walba oo leh ama la rumaysan yahay inuu:
   1. Soo sheegay, carabka ku dhuftay, soo eedeeyay in lagu xad-gudbay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale;
   2. Sameeyay warbixin si niyad sami ah oo ku eedaynaysa qof inuu ku xadgudbay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale;
   3. U noqday marqaati baadhis walba oo ku saabsan cabasho ah in lagu xad-gudubay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale;
   4. Ka marag kacay, caawiyay, ama ka qaybqaatay xaqiiqo-raadin ama baaritaan, dhegaysi, ama dacwad ku saabsan eedeeyn ah in lagu xadgudbay Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale; iyo/ama
   5. Uu ka caawiyay qaabaynta ama fulinta ficilka sixitaanka ee ka jawaabaya xadgubka Xeerkan ama siyaasad, sharci, ama xeer walba oo kale.

B. Aargoosiga waxaa ku jira laakiin aanay ku koobneyn, nooc walba oo cabsi-galin ah, aarsasho, dhibaateyn, ama ula dhaqmidda si ula kac oo aan lahayn wax loo kala aaba yeelayo. Aargoosiga sidoo kale macneheedu waa fal walba oo shay ahaan xun ama hanjabaad la aamini karo oo lagu hanjabo fal shay ahaan xun ay ku dhaqaaqdo Degmada, ama shaqaale walba oo ka tirsan, oo lagu qaado shaqaale ama arday walba oo sameeyay warbixin daacad ah oo ku saabsan dhaqan xumida Degmada. Cawaaqibta edbinta waxa ay noqon doontaa mid si ku filan aad u daran si wax looga qabto xadgudubyada oo si ku habboona loogu edbiyo shakhsiga(yaadka) ku lug yeeshay aargoosiga.

**Xeerka Faafinta iyo Tababarka**

A. Xeerkan waxaa si daahfurnaan ah loogu dhejin doonaa wakhti walba dhismo walbo ee Degmo oo ku yaal meelaha ay heli karaan ardayda iyo shaqaalaha degmadu.

B. Xeerkan waxaa la siin doonaa shaqaale walba oo Degmo ah iyo qandaraasle madax-bannaan oo si joogto ah ula falgala ardayda wakhtiga shaqaalaysiintisa hore ee Degmada.

C. Xeerka waxa ay ka muuqan doontaa Buug-gacmeedka Xuquuqda iyo Waajibaadka.

D. Degmadu waxay hormarin doontaa hab ay ugala hadasho Xeerkan ardayda iyo shaqaalaha.

**Tixraacyada Sharciga:**

Minn. Stat. § 120B.232 (Waxbarashada Horumarinta Dabeecadda)
Minn. Stat. § 120B.234 (Waxbarashada Ka hortagga Xadgudubka Galmada ee Carruurta)
Minn. Stat. § 121A.03, subd. 2 (Xeerka Dhibaateynta iyo Xadgudubka Galamo, Diimeed, iyo Jinsi)
Minn. Stat. § 121A.031 (Xeerka Xoog Usheegashada Ardayga ee Dugsiga)
Minn. Stat. Ch. 363A (Xeerka Xuquuqul Insaanka Minnesota)
Minn. Stat. § 609.341 (Qeexitaanada)
Minn. Stat. § 626.556 et seq. (Warbixinta si xun ula dhaqanka carruurta aan qaangaarka ahayn)
20 U.S.C. §§ 1681-1688 (Ciwaanka IX ee Wax ka Beddelka Waxbarashada ee 1972)
29 U.S.C. § 621 et seq. (Xeerka Shaqada ee Takoorka Da'da)
29 U.S.C. § 794 (Xeerka Dhaqancelinta ee 1973, § 504)
42 U.S.C. § 1983 (Talaabada Madaniga ah ee Duudsiinta Xaquuqda)
42 U.S.C. § 2000d et seq. (Ciwaanka VI ee Xuurka Xuquuqda Madaniga 1964)
42 U.S.C. § 2000e et seq. (Ciwaanka VII ee Xuurka Xuquuqda Madaniga)
42 U.S.C. § 12101 et seq. (Xeerka Ameerikaanka Naafada ah)

**Isdhaafsiga Tixraacyada:**

Xeerka 101.00: Sinnaanta Jinsiga
Xeerka 102.00: Fursad siman/Takoor la'aan
Xeerka 401.00: Fursad Shaqo oo loo siman yahay
Xeerka 500.00: Ka qeybgelinta Jinsiga
Xeerka 501.00: Mamnuucida Waxyeeleynta
Xeerka 505.00: Mamnuucida Xoog u Sheegashada
Xeerka 506.00: Anshaxa Ardayga
Xeerka 506.02: Anshaxa Ardayga: Eryidda & Ka saarida

Xeerka 506.03: Anshaxa Ardayga: Ka joojinta
Xeerka 520.00: Isticmaalka Tignoolajiyadda & Bedqabka
Xeerka 609.00: Diinta

## Lifaaqqa II’aad - Sharciga Cayrinta Ardayga ee Cadaalada ah ee Minnesota

**Sharciga Minn. § 121A.40 CITATION.**

Qodobada **121A.40** illaa **121A.56** ayaa loo xigsan karaa "Sharciga Cayrinta Ardayga ee Cadaalada ah."

**121A.41 QEEXITANNADA**

Qodob hoosaadka 1. **Ku Habboonaanta.** Sida lagu isticmaalay qaybaha **121A.40** illaa **121A.56**, qeexitaanka erayada ku qeexan qaybtaan waxay yeelan macanaha la siiyay.

Qdb.hsdka. 2. **Ka Saaridda**. "Dismissal" macnaheeda waa diidmada barnaamijyada waxbarshada ee arday kasta la siiyo, ee ay ku jiraan reebitaanka, ceyrinta, iyo laga joojioyo. Kuma ay jirto fasalka oo laga bixiyo.

Qdb.hsdka. 3. **Degmada.** "District" macnaheeda waa dugsi kasta ee degmada.

Qdb.hsdka. 4. **Rebitaanka.** "Exclusion" macnaheeda waa tallaabo ay qaadeen maamulka dugsiga ee loga hortagayo isku qoritaanka ama dib isku qoritaanka ardayga muddo aan la dhaafsiin sanad dugsiyeedka.

Qdb.hsdka. 5. **Ceyrinta.** "Expulsion" macnaheeda waa tallaabo ay qaadeen maamulka dugsiga ee lagu diidayo arday horay ugu qornaa inuu iska soo xaadiriyo muddo gaaraysa illaaiyo 12 bilood laga bilaabo taarikhda ardayga dugsiga laga ceyriyay.

Qdb.hsdka. 6. **Waalidka.** "Parent" macnahiisu waa (a) hal arday waalidkiisa, (b) marka uu jiro arrin ah furriin ama dalaaq, waalidka ama waalidiinta korsanaya ardayga, ay ku jiraan waalidka maqan balse ka haysta korinta sharciyaysan iyo degmada u gudbiyay cinwaanka uu hadda degganyahay iyo lambarka telefoonka, ama (c) ama qof loo magacaabay inuu ilaaliye yahay. Marka ay jirto xaalad in ardayga uu naafomimo qabo uuna ka yaryahay da’da 18 sano, waalidka waa in lagu daro kaaliye waalid oo degmadu magacawdo.

Qdb.hsdka. 7. **Ardayga**. (a) "Pupil" macnaheeda waa arday kasta:

(1) aan naafonimo qabin kana yar da’da 21 sano; ama

(2) naafonimo qaba kana yar da’da 21 sano oo aan la siin shahaada rasmiga ee dugsiga sare ama canug nafoonimo qaba oo gaaraya da’da 21 sano mudda sanad dugsiyeedka balse aan helin shahaada rasmi ah ee dugsiga sare, illaa dhammaadka sanad dugsiyeedkaas; iyo

(3) in uuu sii qalmo in uu aado dugsi hoose ama dugsi sare.

(b) "Arday naafonimo qaba" ama "dusigley naafonimo qaba" waxay la macna yihiin “canug naafonimo qaba” marka la eego qaybta **125A.02**.

Qodb.hsdka. 8. **Dugsiga.** "School" macnaheeda waa dugsi kasta ee ku qeexan **120A.05, qodob hoosaadyada 9, 11, 13, iyo 17.**

Qdb.hsdka. 9. **Guddiga Dugsiga.** "School board" macnaheeda waa guddiga dugsi kasta ee degmada.

Qdb.hsdka. 10. **Ka joojinta**. "Suspension" macnaheeda waa tallaabada ay qaadeen guddiga dugsiga, ayadoo la raacayo xeerar ay soo diyaariyeen guddiga dugsiga, kaaso lagu diidayo inuu ardayga dugsiga dhigto muddo aan ka badnayn toban cisho ee maalmaha dugsiga la dhigto. Haddii ka joojintu ay ka badantahay shan cisho guddiga ka joojinta xukumay waa inay maareeyaha siiyaan sababaha kallifay joojinta dheerarka badan. Qeexitaankan laguma dabbaqi karo marka dugsiga laga joojiyo hal maalin dugsiyeed ama ka yar, marka laga reebo waxa uu sharciga federaaliga ka leeyahay arday naafomimada qaba. Tallaabada ka joojinta walba waa in ay dabasocto qorshe dib ugu noqoshada leh. Qorshaha dib u noqoshada waxaa ku jira, halka ay ku habboontahay, helitaanka lagu hirgalinayo adeegyada waxbarashada duwan kaddib marka ay dib u noqoshada dhacdo iyo aan loo isticmaali in lagu dheereeyo ka joojinta hadda jirta. Ayadoo la raacayo qodobka 125A.091, qodob hoosaadka 5, qorshaha dib u noqoshada waalidka laguma qasbayo inuu siiyo daawada “sympathomimetic” ee waalidka canuggiisa ee shuruud looga dhigayo dib u noqoshada. Maamulka dugsiga ma saari karo laba ka joojin oo isku daba xigta isla ardayga ee dhaqan xumada aqlaaqda la xariira, ama aqlaaqdarrada ah, marka laga reebo haddii ardayga uu la imaan karo halis degdegga ee

wayn ee uu asaga ama dadka u dhow ama hantida gaarka, ama meesha halka ay degmadu ka bilaabayso ceyrinta, taaso marka sii dheereyn karta ka joojinta oo wadartu ay noqoto 15 cisho ee maalmaha dugsiga la dhigto.

Qdb.hsdka. 11. **Adeegyada waxbarashada baddalka ah.** "Alternative educational services" ay ku jiri karaan, balse aysan ku koobnayn, waxbarid qaas ah, manhaj wax laga baddalay, baddalaadyo kale ama qabatinyo, waxbarashada lagu kaashanayo warbaahinta eletronikada, adeegyada waxbarashada qaaska sida lagu sheegay qiimaynta ku habboonayd, waxbarashada guriga lagu qaadnayo, darasaadka guriga ee kormeeran, ama isku qorista dugsi kale ama waxbarashada baddalka ah ee xarun waxbarasho ee hoosimaanaysa qodobka 123A.05 doorashada ardayga gaarsiinaysa inuu qanciyo heeraarka qalinjabinta qodobka 120B.02, inkastoo ay ka dhacayso goob kale.

Qdb.hsdka. 12. **Siyaasadaha iyo dhaqannada edbin aan ka-reebeyn ahayn; beddelka ka-saarista iyo ka-eryidda ardayga.**
“Siyaasadaha iyo dhaqannada edbin aan ka-reebeyn ahayn” waxay la micno yihiin siyaasad iyo dhaqan beddel u ah in arday laga saaro dugsiga, kuwaas oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn hab-dhaqannada togan ee ku saleysan caddayn, adeegyada bulsho iyo dareen, adeegyada caafimaadka dhimirka ee dugsiga la xiriira, adeegyada latalinta, adeegyada shaqada bulshada, baaritaanka tacliimeed si loogu qalmo adeegyada Title I ama barnaamijyada akhriska, iyo adeegyada waxbarasho ee kale. Siyaasadaha iyo dhaqannada aan ka-reebeynka ahayn waxaa sidoo kale ka mid ah, balse aan ku ekeyn, kuwa lagu qeexay cutubyada kala ah 120B.12; 121.575 qodobada (1) iyo (2); 121A.031, qayb-hoosaad 4, faqradda (a), qodobka (1); 121A.61, qayb-hoosaad 3, faqradda (r); iyo 122A.627, qodobka (3).

Subd. 13. **Qorshaha oggolaanshaha bixitaanka ardayga.** "Qorshaha oggolaanshaha bixitaanka ardayga" waxay ka dhigan tahay heshiis hadal ah ama qoraal ah oo dhex mara maamule dugsi ama maamule degmada iyo waalidka ardayga si ardayga looga saaro degmadda waxbarashada si looga fogaado tallaabooyin ka saarid ama ka reebis rasmi ah. Muddada heshiiska bixitaanka ardayga ma dhaafi karto 12 bilood.

### 121A.42 NIDAAMKA.

Ma jiro dugsi guud oo u diidi kara hawlsocdsiinta ama difaaca loo simanyahay ee sharciga ee dugsi kasta ee guud oo ardgayga dugsiga kasta ee ku jira dacwadaha ka joojinta taaso sababi karta ceyrin, reebitaan, ama ka saarid.

### 121A.425 KA QAYBGAL BUUXA OO SINNAAN AH EE DUGSIGA BARBAARINTA IYO PREKINDERGARTEN.

Qayb-hoosaadka 1 **Cayrinta anshax-marinta ah ee la mamnuucay.**

a) Ardayga ka diiwaangashan barnaamijyada hoos ku xusan looma adeegsan karo ka saarid sida uu dhigayo cutubkan:
   (1) barnaamijka dugsi-hore ama hor-iskool, oo ay ku jiraan: barnaamijyada waxbarashada qoyska ee caruurta yaryar (early childhood family education), diyaarinta dugsiga (school readiness), diyaarinta dugsiga oo dheeraad ah (school readiness plus), dugsi-hore ikhtiyaari ah (voluntary prekindergarten), Head Start, ama barnaamij kale oo dugsi-ku-saleysan ah oo loogu talagalay caruurta da’doodu ka yar tahay dugsiga; ardayda dhigata fasallada ka bilaabanaya kindergarten ilaa fasalka 3aad.

(b) Qodobkan ma khuseeyo ka saarid dugsiga oo ka yar hal maalin dugsiyeed, marka laga reebo xaaladaha lagu xusay cutubka 125A iyo xeerarka federaalka ee khuseeya ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah.

(c) Iyadoo ay sidaas tahay, ka saarista rasmiga ah (expulsion) ama ka reebista (exclusion) ardayga waxaa loo adeegsan karaa oo keliya marka dhammaan kheyraadka lagu xusay qayb-hoosaadka 2aad la adeegsaday, isla markaana ay jirto halis amni oo dhab ah oo joogto ah oo khatar ku ah ardayga ama dadka kale.

Qayb-hoosaadka 2. **Anshax-marinta aan cayrinta ahayn**
Ujeeddooyinka qaybtan, anshax marinta aan cayrinta ahayn waa inay ku jirto ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:

(1) la shaqaynta qoyska ama mas'uulka ardayga, lataliyaha ama bixiyaha daryeelka caafimaadka maskaxda, khabiirka waxbarashada, ama taageerada kale ee bulshada ku salaysan;

(2) abuurista qorshe, lala qoray waalidka ama mas'uulka, kaas oo faahfaahinaya tallaabada iyo taageerada loogu baahanyahay ardaygu in uu si buuxda uga qaybqaato iskuulka barbaarinta ama barnaamijka prekindergarten; ama

(3) Bixinta u gudbinta adeegyada taageerada loo baahanyahay, oo ay ku jiraan barashada waalidnimada, booqashooyinka guriga, waxqabadyada kale ee waxbarashada taageerada ah, ama, marka ay ku habboontahay, qiimayn lagu go'aaminayo in ardaygu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ama adeegyada qaybta 504.

**121A.43 REEBITAANKA IYO CEYRINTA ARDAYGA NAAFONIMADA QABA.**

(a) Ayadoo la raaacayo sharciyada federaalka ee maamula maalmaha ka saaridda iyo qodobka **121A.46**,, shaqaalaha dugsiga waxay ka joojin karaan canug naafonimo qaba. Marka canugga naafonimada qaba laga joojiyo muddo ka badan wadar ahaan shan ama toban cisho isku xiga ee maalmaha dugsiga la dhigto ee ka jira isla sand dugsiyeedka, iyo in ceyrinta aysan ku jirin talooyin la xariira ka saarid ama reebitaan ama isbadallo kale ee meelaynta ah sida uu qorayo sharciga federaaliga, xubanaha muhiimka ah ee kooxda canugga barnaamijkiisa waxbarashada qaaska ah, uu ugu yaraan ku jiro mid ka mida canugga barayaahiisa, ay kulan ku yeeshaan meel la isla ogyahay iyo go’aan ka gaaraan illaa iyo heerka canugga uu u baahanyahay adeegyada si uu u sii wato ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada, taaso ka dhacaysa goob kale, iyo horumar laga sameeyo qancinta himilooyinka barnaamijka waxabarashada qaaska ah. Kulankaa waa in la qabto sida ugu dhaqsiyo badan, balse usan kor u dhaafin toban cisho wixii ka dambeeya maalin lixaadka ee xarrirka ee ka joojinta ama wadarta maalin tobanaadka ay joojintu dhammatay.

(b) Ka joojinta hal maalin dugsiyeed ama nus maalin ee ka joojinta haddii canugga naafonimada qaba uusan helin daraasadda waxbarshada caadiga ama midda qaaska ah muddada ka joojonta ay jirtay. Shardiyada ogaysiiska ee hoosimaada qodobka **121A.46**, wax ka sooqaad ah kuma yeelanayo ka joojinta hal cisho ama ka yar.

(c) Canugga naafonimada qaba waa in la siiyo adeegyada waxbarashada illaa iyo inta ay maalmaha ka joojinta ay kor u dhaafayaan shan cisho isku xigta ee maalmaha dugsiga la dhigto.

(d) kahor inta aan la bilaabin saaridda ama reebitaanka marka la eego waxa hoosimaanaya qodobada **121A.40** illaa **121A.56**, degmada, xubanaha muhiimka ah ee kooxda barnaamijka canugga waxbarashadiisa, iyo canugga waalidkiisa waxay samayn doonaan, ayaga oo raacaya sharciga federaaliga, lagu go’aaminayo haddii canugga aqlaaqdiisa ay sababtay ama ay cilaaqaad toos iyo weyn la xariirtay canugga naafonimadiisa iyo haddii canugga aqlaaqdiisa ay tahay wax toos uga yimid cillad ah inaan la hirgalin barnaamijika canugga waxbarashadiisa qaaska ah. Marka canugga naafonimada qaba ee haysta barnaamijka waxbarashada qaaska laga reebo ama laga saaro sida ay qorayaan qodobada **121A.40**, illaa **121A.56**, sababo aqlaaq darro ah oo aan ahayn wax ka imaanaya canugga nafoonimadiisa, degmada waxay sii wadi doontaa inay sii siiso waxbarshada qaaska iyo adeegyada la xariira muddada lagu jiro reebitaanka ama saaridda.

**121A.44 CEYRIDA SALKA KU HAYSA HAYSASHADA QORI GACAMEED.**

(a) Walow muddada xadiddaadaha ku jirta qodobka **121A.41, qodob hoosaadka 5**, qodob hoosaadka 5, gudddiga dugsiga waa inay ceyriyaan muddo ugu yaraan hal sano ah ardayga lagu sheegay inuu bastoolad dugsiga la yimid marka laga reebo in guddiga ay dhici karto inay wax ka baddasho shuruudaha ceyrintaan ayadoo arrin walba gaar ahaannimadeeda loo eegayo. Ujeeddo qaybtaan la xariirta awgeed, bastooladda waa sida ay ugu qeexantahay United States Code, magaca 18, qodobka 921.

(b) Walow cutubka 13aad, ardayga ceyrintiisa ama kala laabashada ama u wareejinta dugsi kaddib marka tallaabo ceyrin lagu bilaabo ardayga jabiyay sharciga hoosimanaya baragaraafka (a) waxaa siidayn kara dugsiga bilaabay dacwadda ceyrinta. Mar haddii siidaynta xogta aan shaaca laga qaadin, xogta waxaa keliya loo siidaynayaa degmada dugsiga keliya marka ay suurtogalayso in ardayga degmada kale laga aqbalo.

**121A.45 ASBAABAHA CEYRINTA.**

Qodob hoosaadka 1. **Helitaanka barnaamiyaj ka-duwan**.
Ma jiro dugsi ceyrin kara arday kasta ayaadoon marka hore laysku dayin in loo helo adeegyaa waxbarashada duwan

kahor inta aan hawlaha ceyrinta la bilaabin, marka laga reebo inay caddaato in ardayga uu abuuri karo xaalad halis ah uu isu geysto ama uu u geysto dadka ama hantida u dhow.

Qdb.hsdka. 2. **Asbaabaha ceyrinta**.
Ardayga waxaa la ceyrin karaa marka mid ka mida asbaabaha soo socda uu jiro:

(a) si ula-kac ah loo jabiyo xeer kasta si cagligala uu guddiga dugsiga u soo dejiyay. Xeerka nooca ah waa in uu ahaddo mid cad iyo qeexan kaaso ogaysiis u ah ardada inay aqlaaqdooda ku dhawran shuruudahooda;

(b) si ula-kac lagu dhaqmo taaso dhiibato u geysanaysa xaqa ay dadka kale u leeyihiin inay helaan waxbarasho, ama awoodda ay shaqaalaha dugsiga ku fulinayaan waajibaadkooda, ama hawlo kalo dheeraada ee dugsiga lagu qabanayo; ama

(c) si ula-kac halis u galiyo arday ama ardada kale, ama daadka u dhow, ay ku jiraan shaqaalaha degmada, ama hantida dugsiga.

Qdb.hsdka. 3. **Ogaysiinta waalidka iyo kulanka**.
Haddii wadarta ka saaridda ardayga maalmihiisa ay ka badanyihin iskudarka toban cisho muddo hal sano, dugsiga degmada waxa uu si caqligal ah uu iskudayayaa inuu kulan isugu keeno ardayga iyo ardayga waalidkeeda ama ilaaliyaheeda kahor inta lagu dhaqaaqin in ardayga dugsiga laga saaro iyo, ayadoo la haysto oggolaashada waalidka ama ilaaliyaha, in laysu dayo in canugga baaritaanka dhimirka laga qaado. Degmadu qasab kuma aha inay bixiso kharashka baaritaanka caafimaadka ku baxaya. Ujeeddada kulankaan ayaa ah in laysku dayo in la ogaado ardayga qiimaynta baahidiisa ama adeegyada kale ama haddi waalidka ama ilaaliyaha inuu ardayga qiimeeyo ama ogaado xanuunka haya si lagu ogaado haddii ardayga uu u baahanyahay daawaynta cudurka caafimaadka dhimirka.

### 121A.46 HAWLFULINNADA KA JOOJINTA (SUSPENSION).

Qodob hoosaadka 1. **Kulanka rasmiga aan ahayn ee maamulka ee ceyritaanka hortiisa**.
Maamulka dugsiga kama uu ceyrin karo dugsiga ayadoon uusan dhicin kulanka aan rasmiga ahayn ee ardayga lala qaadanayo. Kulanka aan rasmiga ahayn waa inuu dhaco ceyritaanka hortiisa, marka laga reebo inay caddaato in ardayga uu abuuri karo xaalad halis ah uu isu geysto ama uu u geysto dadka ama hantida u dhow, marka arrintaa ay jirto kulanka waxaa la qabanaya waqtiga suurtagalka kaddib marka ceyrinta ay dhacdo.

Qdb.hsdka. 2. **Maamulaha waxaa uu ardayga u sheegayaa asbaabaha ceyrinta**.
Inta lagu jiro kulanka aan rasmiga ahayn, maamulaha dugsiga ayaa ardayga u sheegi doona asbaabaha keenay ceyrinta, la siiyo sharaxaad waxa dhacay xukumadda ay ka hayso, iyo in ardayga uu dhinaciisa ka sheegto sida ay wax u dhaceen.

Qdb.hsdka. 3. **Ogaysiis qoraal ah ee asbaababa ceyritaanka u jeeda**.
Ogaysiis qoraal ah oo ay ku jiran asbaabaha ceyrinta, warbixin gaaban ee waxa dhacay, sharaxaadda maragga, qorshaha dib isku qoridda, iyo nuqulka qodobada **121A.40** illaa **121A.56**, waxa gacanta laga saaraya ardayga marka ay ceyrinta dhacayso ama kahor, iyo loo sheego ardayga waalidkiisa ama ilaaliyihiisa boostada ugu diraan muddo 48 saacadood ee uu kulanka dhacay. Degmadu waxay ku dadaalaysaa inay waalidka u sheegaan ceyrinta lagu dhawaaqay xag telefoon sida ugu dhaqso badan. Haddii ay dhacdo in arday la ceyriyo ayadoon la qaban kulanka degdegga ah asbaabo la xariira marka ay caddaato in ardayga uu abuuri karo xaalad halis ah uu u geysto dadka ama hantida u dhow, ogaysiiska qoraalka waxaa loo gudbinayaa ardayga ama ardayga waalidkiisa muddo 48 saacadood gudahooda ee ceyrinta ka dambaysa. Adegyada boostada waxay hirgalayaan marka warqadda boostada laga diro.

Qdb.hsdka. 4. **Bixinta Adeegyada Waxbarasho ee Beddelka ah; Ceyrinta la filayo inay sababto ka saarid ama ka reebitaan**.
(a) Adeegyo waxbarasho oo beddel ah waa in la siiyaa ardayga la hakiyay in ka badan shan maalmood oo dugsiyeed oo isku xiga.

(b) Iyadoo aan loo eegin qodobbada ku xusan qayb-hoosaadyada 1 iyo 3, ardayga waa la hakini karaa inta laga sugayo go’aanka guddiga dugsiga ee ku saabsan dhageysiga ka saarista ama ka reebista; si kastaba ha ahaatee, adeegyada waxbarasho ee beddelka ah waa in la hirgeliyaa marka hakinta ay dhaafto shan maalmood.

Qdb.hsdka. 5 **Adeegyada Waxbarasho ee Ugu Yar.** Maamulka dugsigu waa inuu siinayaa ardayga la hakiyay fursad uu ku dhammeystiro dhammaan shaqooyinka dugsiga ee loo xilsaaray inta uu hakintu socdo isla markaana uu helo dhibcaha buuxa haddii uu si wanaagsan u qabto shaqooyinkaas. Madaxa dugsiga ama qofka kale ee maamulka mas'uulka ka ah dhismaha dugsiga ama barnaamijka waxaa lagu dhiirrigelinayaa inuu magacaabo shaqaale degmada ama dugsiga ka tirsan oo u noqda xiriiriye si uu ula shaqeeyo macalimiinta ardayga, si ardayga la hakiyay uu u: (1) helo agabyada koorsooyinka iyo macluumaadka kale waqtigii loogu talagalay, (2) dhammeystiro shaqooyinka maalinlaha iyo toddobaadlaha ah, isla markaana uu helo jawaab celin macalimiinta.

**121A.47 HAWLOFULINTA KA SAARIDDA IYO KA REEBITAANKA.**

Qodob hoosaadka 1**. U bahaan dhagaysi; arday dhagaysiga waa uu baajin karaa**.
Ma jirto ka saarid ama ka reebid la qasbayo ayadoon dhegaysi dhicin, mar haddii xaqa loo leeyahay dhagaysiga in qoraal uu ku baajiyo ardayga iyo waaalidka ama ilaaliyaha. Tallaabada waxaa bilaabaya guddiga dugsiga ama wakiilkooda.

Qdb.hsdka. 2. **Ogaysiiska qoraalka ah**. Ogaysiiska qoraal ah ee lagu damacsanyahay in tallaabo la qaado waxaa:

(a) loo gudbinaya ardayga iyo ardayga waalidkiisa ama ilaaliyihiisa ama boostada lagu dirayaa;

(b) ku jira bayaan dhammaystiran ee waxa dhacay, tirada marqaatiyada iyo warbixinta maragfurkooda;

(c) lagu sheegaya taariikhda, waqtiga, iyo goobta uu dhagaysiga ka dhacayo;

(d) la socda nuqulka qodobada **121A.40** illaa **121A.56**;

(e) laga warbixinayaa adeegyada waxbarashada duwan ee la siinayo ardayga si looga hortago hawlfulinta ceyrinta; iyo

(f) loo sheegayo ardayga iyo waalidka ama illaaliyaha xaqa ay u leeyihiin:

(1) inay yeeshaan wakiil ardayga uu soo doorto, ay ku jiraan qareen, dhagaysiga yimaada. Degmadu waxay ardayga waalidkiisa ama ilaaliyihiisa inay heli karaan ilaha caaawimaad qareen ee lacagla'aan ah ama qiimo jaban iyo in magacyada laga helayo Waaxda Waxbarashada;

(2) inay eegaan ardayga xogtiisa inta uusan dhagaysiga dhicin;

(3) inay caddaymaha soo bandhigaan; iyo

(4) su'aalo celin kala hortagaan marqaatiyada.

Qdb.hsdka. 3. **Jadwalka dhagaysiga**.

Dhagaysiga waa in lagu qabto muddo toban cisho gudahood kaddib marka la helo ogaysiiska qoraalka ah waa haddii aan la codsan waqti dheeraad ah, oo aan ka badnayn shan cisho, sababo jira awgood uu sameeyo guddiga dugsiga, ardayga, waalidka ama ilaaliyaha.

Qdb.hsdka. 4. **Waqtiga iyo goob ku habboon dhagaysiga**.

Dhagaysiga waxaa la qaban doonaa waqti iyo goob uu si fudud ku tegi karo ardayga, waalidka ama ilaaliyaha.

Qdb.hsdka. 5.

**Dhagaysiga xiran ama furanl.** Dhagaysiga ma noqonayo mid dadka u furan waa haddii ardayga, waalidka ama ilaaliyaha aysan ka dhigin dhegaysi furan.

Qdb.hsdka. 6. **Dhagayste dhexdhexaad ah**.

Dhagaysiga waxuu ka dhici doonaa meel ay joogaan:

(1) sarkaalka dhagaysiga ee madaxbannaan;

(2) xubin ka tirsan guddiga dugsiga;

(3) koox ka socota guddiga dugsiga;

(4) guddiga dugsiga oo idil;

Sida ay ku go'aamisay guddiga dugsiga. Dhagaysiga waxaa uu u dhacayaa si xaqsoorid caddalad iyo dhexdhexaad ah.

Qdb.hsdka. 7**. Dhisidda xogta dhagaysiga.** Guddiga dugsiga waxay dhisi doonaan hawlfuinta dhagaysiga ay kharashkiisa degmada bixinayso, iyo hal dhinac uu helo qoraalka uu jeebkiisa lacag kala baxo. Maragfurka waa dhaar loo maro. Sarkaalka dhagaysiga ama xubin guddiga dugsiga ka socota ayaa awood u yeelanaya inay maxkamadda dad horkeenaan iyo dhaarta la mariyo.

Qdb.hsdka. 8. **Helitaanka ardayga xogtiisa**.

Marka waqti fiican la haysto dhagaysiga hortiis, ardayga, waalidka ama ilaaliyaha, ama wakiil, waxaa fursad loo siinayaa inay eegaan xogta idil ee nidaamdka dugsiga ku jirta ee ardayda qusaysa ay ku jiraan imtixaamo kasta ama warbixinno kuwaaso salka u noqonaya tallaabooyinka lagu taliyay in la qaado.

Qdb.hsdka. 9**. Ardayga xaqiisa ku khasbidda maragkaca**.

Ardayga, waalidka ama ilaaliyaha, ama wakiilka, waxay xaq u yeelan doonaan inay khasbaan imaanshaha shaqaale kasta ee rasmi ah ama wakiilka niaadmka dugsiyada guud ama masuul kasta ama qof kasta ay dhici karto inuu wax ka ogyahay waxna ka sheego waxa tallaabada la qaaday ay ku saleesayntahay, iyo kala hortagaan iyo su'aala ku celiyaan marqaatiyada dhinaca kale u maragfuray nidaamka dugsiyada guud.

Qdb.hsdka. 10. **Ardayga xaqiisa daliilka iyo maragkaca**.

Ardayga, waalidka ama ilaaliyaha, ama wakiilka, waxay xaq u yeelan doonaan inay la yimaadaan wixii daliil ah iyo maragkac ah, ay ku jiraan maragkaca aqoonyahan cilmi nafsiga ama maragkaca waxbarashada.

Qdb.hsdka. 11**. Ardayga kuma qasbana inuu maragkaco**.

Ardayga laguma khasbi karo inuu ka maragkaco hawlfulinnada ceyrinta.

Qdb.hsdka. 12. **Dhagaystaha talooyinkiisa ku jeeda daliilka kooban ee dhagaysiga**; **geyitaanka warqadaha waa in lagu dhammaystiro muddo laba cisho.**

Talooyinka ka imaanaya sarkaalka dhagaysiga ama xubin guddiga dugsiga ah ama guddiga waxay salaysnaan doontaa oo keliya caddaymaha la horkeenay dhagaysiga iyo inay taasi samayso in guddiga dugsiga iyo loo diro warqadaha shaksiyadka quseeyaan muddo laba cisho marka uu dhagaysiga dhammaado.

Qdb.hsdka. 13. **Sababta go'aanka guddiga dugsiga; fursadda laga faalloonayo**.

Guddiga dugsiga waxay go'aakooda ku salayn doonaan talada uu u soo jeediyo sarkaalka dhagaysiga ama xubin guddiga dugsiga ka socota ama guddiga iyo ay soo gudbiso go'aanka ka dhacay kulanka lagu qabtay muddo shan cisho gudaheeda kaddib marka ay helaan talada. Guddiga dugsiga waxay dhinacyada siin doonaan fursad ay ku horkeenaan xujooyin iyo faalloowyin u jeeda sarkaalka dhagaysiga talooyinkiisa aydoo aysan jirin in dhinacna daliil aan dhagaysiga la horkeenin. Go'aanka uu gaaray guddiga dugsiga waa inuu ku salaysnaado waxa la diiwaangaliyay, waa inuu qoraal ahaado, waana inuu sheego arrimaha dhacay ee aan laga leexan karin ee go'aanku uu ku salaysanyahay watana daliillo ku filan ee dhinacyada u sharaxaya iyo maareyaha waxbarashada asbaabaha iyo sababta go'aanka lagu gaaray.

Qdb.hsdka. 14. **Qorshaha ku qorista ama dib u qorista.**

(a) Agaasime dugsi ayaa diyaarin doono iyo fulin doona qorshaha ku qorista ama dib ugu qorista ee arday kasta ee laga reebay ama laga saaray dugsiga. Qorshaha waxaa ku jiri kara tallaabooyin lagu saxayo ardayga dabcigiisa, ay ku jiraan dhammaystirka barnaamij waxbarashada dabciga, kaaso la mid ah qodobka 120B.232, qodob hoosaadka 1, iyo loo baahanyahay ka qaybqaadashada waalidka hawlfulinta ku qoristsa ama dib ugu qorista, iyo ay ku caadayaan waxa ka imaan kara ee ku dhici kara ardayga haddii uusan ardayga toosin dabcigiisa.

(b) Qeexitaanka ceyrinta ee ku xusan qodobka 121A.41, qodob hoosaadka 10, shaqa kuma laha ardayga ka ceyrintiisa dugsiga wax gaaraya hal maalin dugsiyeed ama ka yar, marka laga reebo sida ay ku xusantahay sharciga federaaliga ee ardayga naafonimada qaba. Tallaabada ja joojinta waliba waan in ay la socoto qorshe dib ugu qoris ah. Qorshaha dib ugu qorista waa inuu bixiyo, halka ay ku habboontahay, adeegyada waxbarashada duwan, kaaso

loo isticmaali karin illaa iyo inta uu yahay muddada heerka ardayga ceyrintiisa. Ayadoo laa raacin karo qodobka 125A.091, qodob hoosaadka 5, qorshaha dib ugu qorista kuma uu qasbi karo waalidka daawoyinka maanka loo qaato inay ardaygooda siiyaan sababo la xariira dib isku qorista. Shaqaalaha dugsiga diidmada waalidka am ilaaliyaha uma ay qaadan karaan inay oggoladeen maamulka daawoyinka maskaxda dooriya (psychotropic drugs) inay ardaygooda siiyaan amaba in qiimayn xagga caafimaadka dhimirka, baaritaanka ama baaritaan caafimaad ee ardayga ay sabab uga dhigaan, in ardayga loo diido inuu tago fasallada ama uu ka qaybqaato hawlaha dugsiga ka socda, ama asbaab ahaan dacwad ah xadgudubka caruurta, dayaca caruurta ama daawo ama waxbarasho la'aan lagu dayacay.

### 121A.48 KA BAXSANAANTA SABAB JIRTA.

Jabinta qawaaniinta farsamada ee Pupil Fair Dismissal Act, oo sabab jirta awgeed loo sameyay, ma noqonayso difaac hawlfulinta sida uu sharciga xusayo waa haddii uusan ardayga muujin inaan laga fiirsan go'aanka ku aaddan dambiga.

### 121A.49 RACFAANKA.

Dhinaca ku jira go'aanka ka reebanaanta ama ka saaridda sida uu xusayo qodobyada **121A.40** illaa **121A.56** waxay racfaan u gudbin karaan maamulaha waxbarashada muddo 21 cisho ee maalmaha dugsiga la joogo tallaabada guddiga dugsiga. Kaddib marka loo soo gudbiyo ogaysiiska racfaanka, degmada waa inay maamulaha iyo waalidka ama ilaaliyaha u gudbiso nuqulka buuxa xogta dhagaysiga muddo shan cisho gudahood ee lagu helay ogaysiiska racfaanka. Dhammaan qorallada uu soo gudbiyaya racfaanlaha waa in loo gudbiyo iyo loo diro jawaabaha muddo toban cisho ee ka dambeeya marka qoraalka la helay. Qoraallada idil ee uu soo gudbiyay racfaansanuhu waa in la gudbiyo iyo loo diro racfaanlaha. Go'aanka guddiga dugsiga waa in lagu hirgaliyo muddada racfaanka lagu jiro loona diro maamulaha.

Marka racfaan lagu jiro sida qodobkaan uu xusayo, maamuluhu waxuu ku raaci karaa go'aanka hay'adda, ay dhici inuu go'aanka dib u dhigo si lagu helo macluumaad dheeraada,ama ay dhici karto inuu kahortago ama uu wax ka baddalo go'aankii hore haddii ay jiraan xuquuq wax ku oola oo codsadaha laga xayuubiyay sababo la xariira in baaritaanka maamulka, waxa lagu saleeyay, dhammaystiryoa, ama go'aannada ay yihiin kuwo:

(1) jabinayo qaanuunnada dastuuriga;

(2) kormareen awoodda uu sharciga u oggolyahay ama awoodda rasmiga ee go'aan looga gaaray degmada dugsiga;

(3) lagu sameeyay si hawlfulin sharcidarra ah, marka laga reebo waxa ku xusan qodobka **121A.48**;

(4) lagu sameeyay qalad xagga sharciga;

(5) aan taageero ka haysan caddaymo badan marka la eego xogta idil ee la hordhigay; ama

(6) aan sharciga la raacin ama isbad-baddal ah.

Maareeyaha ama maareeyaha walkiilkiisa ayaa gaaraya go'aanka kama dambaysta ah taaso ku salaysan xogta. Maareeyaha waxa u soo saari idoonaa go'aan muddo 30 cisho gudahood ee maalmaha caadiga kaddib marka uu helo xogta oo idil iyo dhinacyada qoraalladooda ee xaraynta racfaanka. Maareeyaha go'aankiisa waxaa uu

noqonayaa kama dambays iyo faraya dhinacyada inay dhowraan kaddib marka ay dhammaato xillliga racfaanka sida ku xusan qodobka **121A.50**.

### 121A.50 KA FIIRSASHADA GARSOORKA.

Go'aanka maareeyaha waxbarashada uu gaaray sida ku xusan qodobbada **121A.40** illaa **121A.56**. waa mid dib u eegid garsoor lagu samayn karou sida ku xusan qodobada **14.63** illaa **14.69**. go'aanka maareeyaha waxuu yahay mid wali racfaan laga qaadan karo sida ku hoos xusan qodobkaan.

**121A.51 WARBIXINTA LA GAARSIINAYO HAY'ADDA.**

Guddiga dugsiga waxay warbixinta gaarsiin doonaan tallaabo kasto la qaaday ayadoo la cuskanayo qodobada **121A.40** illaa **121A.56** hay'adda ku habboon, marka uu ardayga ay kormeerayso hay'addaas.

**121A.52 CODSIGA AAN KHASAB KU AHAYN ISXAADIRINTA.**

Qaanuunada ku xusan qodobka **120A.22, qodob hoosaadka 5,** ma saamaynayaan arday kasta muddada lagu jiro ceyrina ayadoo la raacayo qodobbada **121A.40** illaa **121A.56**.

**121A.53 WARBIXINTA GUDOOMIYAHA WAXBARASHADA.**

Qayb-hoosaadka 1 **Ka saarida iyo cayrinta; weerarrada jir ahaan ah**.

Guddida iskuulku waa inay guddoomiyaha waxbarashada uga soo warbixiyaan iyaga oo adeegsanaya nidaamka warbixinta elegtarooniga ah ee waaxda ka saaritaan ama cayrin kasta iyo gacan qaadka kasta oo arday u geysto shaqaalaha degmada 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda dhaqangalka ficilka cayrinta ama weerarka. Warbixintan waa inay ku jirto bayaanka adeegyo waxbarasho beddelaada ah, ama cunaqabatayn, wax ka qabasho, ama xallin kale oo lagaga jawaabayo gacan qaadka ardaygu gaystay oo ardayga la siiyey iyo sababta loo siiyey, taariikhda ay dhaqangalayso, iyo muddada ka saaritaanka ama cayrinta ama cunaqabataynta, wax ka qabashada ama xallinta kale. Warbixinta waa inay sidoo kale ku jirto da'da ardayga, heerka fasalka, jinsiga, qowmiyada, iyo xaalada waxbarashada gaarka ah.

Qayb-hoosaadka 2. **Warbixinta.**

(a) Guddida iskuulku waa inay ku daraan lambarada aqoonsiga ardayda ee gobolka ee ardayda ay saamaysay dhammaan cayrinta iyo warbixinada kale ee anshaxa ee ay u baahantahay waaxdu. Waaxdu waa inay sannad walba u soo gudbiso guddoomiyaha xogta la soo koobay ee tirada cayrinta iyo gacan qaadka uu ardaygu u gaysto shaqaalaha degmada iyada oo loo kala dhigayo da' ahaan, heerka fasalka, jinsiga, qowmiyada, iyo xaalada waxbarashada gaarka ah ee ardayda ay saamaysay. Dhammaan cayrinta iyo warbixinnada kale ee anshax-marinta ah waa in lagu soo gudbiyaa nidaamka warbixinta elegtarooniga ah ee waaxda.

(b) Guddoomiyuhu waa in uu isu geeyo xogta degmada ee lagaga soo warbixiyey qaybtan oo uu ku daro xogta la isku daray, oo ay ku jirto xogta la isku daray ee ku saabsan gacan qaadka ardaygu u geysto shaqaalaha degmada, warbixin sannadeedka waxqabadka iskuulka ee hoos timaada qaybta **120B.36**.

**121A.54 OGAYSIISKA XAQA DIB UGU LAABASHADA.**

Markasta oo ardayga uu ku guuldarraysto inuu dugsiga dib ug soo laabto muddo toban cisho gudahood ee maalmaha dugsiga la dhigto kaddib marka uu dhaco ceyrin ama joojin, agaasimaha dugsiga waa inuu ardayga iyo ardayga waalidkiisa ogaysiiyo xagga boostada ardayga xaqiisa isku qorista iyo dib ugu laabashada dugsiga guud.

**121A.55 QAANUUNNADA LOO BAHANYAHAY IN LA DEJIYO.**

(a) Wasiirka waxbarashada waa inuu soo saaraa tilmaamo si uu uga caawiyo gole kasta oo dugsiyadeed. Gole kasta oo dugsiyadeed waa inuu dejiyo shuruudo mideysan oo ku saabsan ka saarista (dismissal) ardayda, wuxuuna ansixinayaa siyaasad iyo xeerar qoraal ah si loo hirgeliyo ujeeddooyinka qaybaha **121A.40** illaa **121A.56**. Siyaasadahaasi waa in ay ku jiraan hab-raacyo anan ahayn ka-reebis (nonexclusionary disciplinary policies) kuwaas oo waafaqsan qaybta 121A.41, farqada 12, isla markaana xooga saara kahortagga ka saarista ardayga iyadoo la ogaanayo dhibaatooyinka hore. Siyaasadahani waa in loo sameeyaa si ay uga hortagaan ku celcelinta dabeecado aan habboonayn oo ardaygu leeyahay.

(b) Siyaasadahani waa inay aqoonsadaan masuuliyadda sii socota ee dugsigu u leeyahay waxbarashada ardayga inta lagu jiro muddada ka saarista.

(c) Dugsigu wuxuu mas'uul ka yahay inuu hubiyo in adeegyada waxbarasho ee kale (alternative educational services), haddii ardaygu doonayo inuu ka faa'iidaysto, ay ku filan yihiin si ardaygu horumar ugu sameeyo buuxinta heerarka

qalinjabinta ee lagu ansixiyey qaybta **120B.02** iyo inuu diyaar u noqdo dib-u-soo-noqoshada dugsiga iyadoo la waafajinayo qaybta 121A.46, farqada 5.

(d) Marka laga hadlayo ka saarista ardayga iyadoo la eryo (expulsion) ama laga reebo (exclusion) ama heshiisyada ka bixista ardayga (pupil withdrawal agreements) sida ku qeexan qaybta 121A.41, farqada 13:

1) Ardayga wali ku qoran isla degmada ama sugaya isdiiwaangelinta degmo kale, masuuliyadda sii socota ee degmada dugsigu waa inay ku jirtaa dib u eegista shaqada iyo darajooyinka ardayga si saddexdii biloodba mar loo hubiyo in ardaygu u diyaar garoobayo dib ugu noqoshada dugsiga asxaabtiisa. Degmada dugsigu waa inay si joogto ah ula xiriirto waalidka ama mas'uulka ardayga si loo hubiyo in ardaygu dhameystirayo shaqada loo xilsaaray iyada oo loo marayo adeegyada waxbarasho ee kale ee lagu qeexay qaybta 121A.41, farqada 11. Adeegyadani waa qasab ilaa ardaygu isdiiwaangeliyo dugsi kale ama ku laabto dugsigii hore;
2) Ardayga helaya adeegyada caafimaadka maskaxda ee dugsiga ku salaysan ama la xiriira dugsiga ee hoos taga qaybta 245.4889 wuxuu sii ahaanayaa u qalma adeegyadaas ilaa uu ka isdiiwaangeliyo dugsi cusub;
3) Degmada dugsigu waa inay siiso waalidka ama mas'uulka ardayga macluumaad ku saabsan sida loo helo adeegyada caafimaadka maskaxda, oo ay ku jiraan bixiyeyaasha adeegyada bilaashka ah ama ku saleysan awood bixineed (sliding fee) ee bulshada. Macluumaadkani sidoo kale waa in lagu dhejiyaa website-ka degmada dugsiga ama dugsiga charter-ka ah.

(e) Xarunta waxbarashada ee aagga hoos timaada qaybta **123A.05** ma diidi karto isdiiwaangelinta arday la eryey ama laga reebay dugsi oo kaliya sababtoo ah degmada dugsiga ayaa ardayga ka saartay. Guddiga xarunta waxbarashada aagga ayaa adeegsan kara qodobbada Xeerka Ka-saarista Caddaaladda ah ee Ardayga (Pupil Fair Dismissal Act) si uu ardayga uga reebo ama ugu baahdo qorshe gelin ah (admission plan).

(f) Degmo kasta oo dugsiyeed waa inay samaysaa siyaasad una soo gudbisaa wasiirka taasoo qeexaysa adeegsiga habboon ee saraakiisha nabadgelyada (peace officers) iyo kooxaha xaaladaha degdegga ah (crisis teams) si looga saaro arday leh barnaamij waxbarasho oo gaar ah (IEP) gudaha dugsiga.

### 121A.56 KU DHAQANGALINTA

Qodob hoosaadka 1. **Diidmada ka soo horjeedda takoorka waa inay ahaato mid la dhaqangaliyay**.

Qodobada **121A.40** illaa **121A.56** waa in loogu talagalo in wax laga baddalo ama haddii kale ay saameeyaan ama baddala qodobka 363A.13, qodob hoosaadka 2.

Qdb.hsdka. 2. **Qaybaha barnaamijka dusiga oo xisaabta loogu darayo**.

Qodobada **121A.40** illaa **121A.56** waxay saamayn keliya ku yeelaan doonaan barnaamijika dugsiga ee qaadashada maaddooyinka la oggolaaday.

**121A.57** [Waxaa lugu magacaabey 121A.035]

### 121A.575 BEDDELKA KA JOOJINTA ARDAYGA.

Si kastaba ha ahaatee sharci kasta oo lid ku ah, iyo iyadoo la waafajinayo qaybaha 121A.40 ilaa 121A.56, kadib marka maamulka dugsigu ogeysiiyo ardayga sababaha looga joojinayo, maamulka dugsigu wuxuu halkii uu ka joojin lahaa ardayga qaadi karaa mid ama ka badan tallaabooyinka soo socda:

(1) Si xooggan ugu dhiirrigeli waalidka ama mas'uulka ardayga inuu hal maalin la joogo ardayga dugsiga;
(2) Ardayga loo xilsaaro inuu dugsiga yimaado maalinta Sabtida iyadoo uu korjoogto ka yahay maamulaha ama qof uu magacaabay maamulaha;
(3) In maxkamadda carruurta laga codsado in ardayga loo arko mid u baahan adeegyo hoos yimaada cutubka 260C.

# Lifaaqqa III'aad - Habraaca Cabashada Anshaxa (SPPS Procedure 506.00.01)

*Qodobka 121A.61 ee Sharciga Minnesota wuxuu ka dalbanayaa Degmada Dugsiyada inay dejiso siyaasadda anshaxa ee guud ee degmada taasoo ka koobnaan doonta habraaca cabashada anshaxa oo ardayda, waalidiinta, masuuliyiinta kale, iyo shaqaalaha dugsigu ay u isticmaali karaan inay cabasho gudbiyaan oo tallaabo sax ah raadiyaan marka laga hadlayo shuruudaha Qodobbada 121A.40 ilaa 121A.61 ee Sharciga Minnesota, oo ay ku jiraan fulinta siyaasadaha dhaqanka iyo anshaxa deegaanka oo aan si habboon loo fulin ama si takoor leh loo adeegsanayo.*

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay ku boorinayaan dhinacyada inay marka hore isku dayaan inay cabashooyinka ku xalliyaan madaxda dugsiga ama ku-xigeenka madaxda dugsiga ka hor inta aysan gudbin cabasho rasmi ah. Haddii isku dayadan ay guul darreystaan, cabasho rasmi ah ayaa lagu gudbin karaa iyadoo la adeegsanayo Foomka Habraaca Cabashada Anshaxa.

A. Habka Cabashada Rasmiga ah ee Anshaxa ee SPPS waa sida soo socota:

1. Ardayda, waalidiinta, masuuliyiinta kale, iyo shaqaalaha dugsiga waxay cabasho rasmi ah ka gudbin karaan wixii ku saabsan shuruudaha Sharciga Minnesota ee Qodobbada 121A.40 ilaa 121A.61, gaar ahaan haddii siyaasadaha dhaqanka iyo anshaxa deegaanka aan si habboon loo fulin ama si takoor leh loo adeegsanayo.
2. Cabashada waxaa lagu gudbinayaa foomka 506.00.1, kaasoo laga heli karo bogga: **spps.org/rights_and_responsibilities.** Haddii aad u baahan tahay caawimaad buuxinta foomka, waxaad ka codsan kartaa dugsiga.
3. Foomka waa in la gudbiyaa 14 maalmood oo jadwalka kalandarka ah laga bilaabo maalinta tallaabada anshaxa la qaaday. Cabashooyinka ka dambeeya 14-kaas maalmood lama tixgelin doono.
4. Marka la helo foomka, waxaa loo gudbin doonaa Kuxigeenka Sare ee kormeera dugsiga uu ardayga cabashada la xiriirta dhigto. Kuxigeenkaas ayaa mas'uul ka ah baaritaanka, diiwaangelinta, iyo ilaalinta macluumaadka cabashada.
5. Baaritaanku waa inuu bilaawmaa 3 maalmood oo shaqo dugsiga ah laga bilaabo helitaanka foomka cabashada.
6. Baaritaanka waxaa sameyn kara Kuxigeenka Sare ee ku habboon, qof uu magacaabay, ama dhinac saddexaad oo ay Degmada Dugsiyadu u xilsaartay.
7. Dhinacyada ku lugta leh cabashada waxay helayaan fursad ay ku soo gudbiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cabashada.
8. Kuxigeenka Sare ama qofka loo magacaabay waa inuu qoraal ku soo gabagabeeyaa foomka 506.00.1, kuna soo gudbiyaa qofka cabashada gudbiyay go'aanka iyo natiijada baaritaanka.
9. Haddii baaritaanku muujiyo in shuruudaha sharciga Minnesota ama siyaasadaha deegaanka aan si habboon loo fulin, waxaa la diyaarin doonaa qorshe lagu saxayo diiwaanka ardayga iyo tababar/kaaliye loo fidin doono shaqaalaha si loo hubiyo u hoggaansanaanta mustaqbalka.
10. Degmada Dugsiyadu waxay ilaalin doontaa qarsoodiga qofka cabashada gudbiyay, ardayga, qofka laga cabanayo, iyo markhaatiyada, iyadoo la raacayo waajibaadka sharciga ah ee baaritaanka iyo ka jawaabista cabashada.
11. Mamnuuc in lagu ciqaabo ama lagu sameeyo aargoosi qof si daacad ah u soo bandhigay, ku eedeeyay, ama cabasho gudbiyay. Qof kasta oo lagu helo inuu sameeyay aargoosi waa in si waafaqsan siyaasadaha degmada loo ciqaabaa.
12. Warbixinaha si ula kac ah been abuurka ah ama aan sal lahayn waa mamnuuc. Qof kasta oo lagu helo inuu soo gudbiyay warbixin noocaas ah ayaa la ciqaabi doonaa sida ku cad siyaasadaha iyo heshiisyada shaqo ee Degmada.
13. Habkani waxa lagu daabici doonaa bogga internetka ee Degmada Dugsiyada iyo Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadaha.

## Khayraadka iyo Kaalmada

### Xeerka Fursada siman/Takoor la'aanta

SPPS kuma samayso takoor ku salaysan isir, caqiido, lab ama dheddig, heerka guurka, asalka dhalashada, da'da, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga iyo hadalka, abtirsiinyada, heerka la xidhiidha kaalmada dadweynaha, jihaynta galmada ama kalgacalka, heerka qoyska, naafanimada ama xubinnimada ama waxqabadka komishanka deegaanka. Su'aalaha ku saabsan siyaasadeena takoorka lidka ku ah waa in lagu hagaajiyaa 360 Colborne Street, Saint Paul, MN 55102 ama wac 651-744-6950. Foomka 415 ayaa loo isticmaali karaa in lagu soo sheego xaaladaha suurtagalka ah ee la xiriiro takoorka ama dhibaateynta taasoo ku saleysan waxyaabaha la ilaaliyo oo isirka qofka: **[spps.org/form415](spps.org/form415)**.

**Si loo sheego takoor, dhibaabatayn ama xadgudubyada kale:**

- **Shaqaalaha –** kala xiriir 651-767-8202 xafiiska shaqaalaha ee Human Resources ama xafiiska Office of Equal Employment Opportunity (EEO) ka wac 651-744-6950. Foomka 415 ayaa loo isticmaali karaa in lagu soo sheego xaaladaha suurtagalka ah ee la xiriiro takoorka ama dhibaateynta taasoo ku saleysan waxyaabaha la ilaaliyo ee qofka: **spps.org/form415**.
- **Ardayda –** marka hore la xiriir maamulaha iskoolka/barnaamijka, oo ka wac 651-744-6950 xafiiska EEO si aad uga warbixisid takoorka, kaasoo ay ku jiraan barnaamijka Title IX ee xadgudubyada (sida takoorka jinsi, dhibaateynta jinsi) ama ku xadgudubka xuquuqda aadanaha ee ardayga. Foomka 415 ayaa loo isticmaali karaa in lagu soo sheego xaaladaha suurtagalka ah ee la xiriiro takoorka ama dhibaateynta taasoo ku saleysan waxyaabaha la ilaaliyo oo isirka qofka: **spps.org/form415**. Haddii qofka dhibaatada lagu eedeeyey uu arday yahay, marka hore u sheeg dhacdada maamulaha dugsiga. Ikhtiyaar kale ayaa ah in akhlaaqda loo sheego Kaaliyaha Isu Duwaha Guud ee dugsiga nambarka 651-767-8133.

### Ardayda Naafada ah

**Khayraadka Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul**

- Waaxda Waxbarashada Gaarka ah: 651-767-8321
- 504 Iskuduwaha: 651-767-8380

**Khayraadka Dugsiyada Dadweynaha ee aanan ka mid ahayn Saint Paul**

- MDE (Minnesota Department of Education (Waaxda Waxbarashada ee Minnesota)): 651-582-5200
- PACER (Isbahaysiga u Doodidda Waalidka ee Xuquuqda Waxbarashada): 952-838-9000

### Dhexdhexaadiyaha Baaritaanka Dugsiga

Dhexdhexaadiyaha baaritaanka SPPS waxa uu ka caawiyaa ardayda, waaliddiinta iyo xubnaha ka tirsan bulshada inuu xalliyo arrimaha iskuulka haddii ay awoodi waayaan inay gaaraan xal lagu qanci karo oo la shaqeynayo maamulayaasha iskuulka iyo xubnaha ka tirsan shaqaalaha. Dhexdhexaadiyaha baaritaanka ayaa ku caawin kara:
Inuu xalka kala xaajoodo macalinka ama maamulaha

- Inuu si wax ku ool ah ula xiriiro macalinka ama maamulaha
- Inuu fahmo Xeerka dugsiga, qaanuunka ama habraaca
- Inuu qofka ku xiro xubinta shaqaalaha ama xafiiska degmada dugsiga ee ku haboon
- Inuu soo uruuriyo macluumaadka guud ee ku saabsan degmada dugsiga. La xariiri Dhexdhexaadiyaha baaritaanka adigoo ka wacaya 651-767-8394 ama barta onlaynka **spps.org/ombudsperson**.

## Qiimaynta Gobolka oo dhan: Go'aanka Waalidka/Masuulka ee ah in aanu ka qayb galin

Markaad buuxiso foomkan, waxaad qiraysaa in ilmahaagu aanu ka qayb qaadan doonin qiimaynaha gobolka oo dhan uunu heli doonin natiijooyinka qiimaynta shaqsiga ah. Foomkan waa in loo gudbiyaa dugsiga ama xafiiska degmada ka hor inta aan la qaadin imtixaanka.
Qiimaynta Gobolka oo dhan: Tusida Macluumaadka Diidmada iyo Ka Qaybqaadashada Waalidka/Masuulka

MN DEPARTMENT OF EDUCATION

# Qiimaynta Gobolka oo dhan:

# Tusida Macluumaadka Diidmada iyo Ka Qaybqaadashada Waalidka/Masuulka

Ka qayb galka ardaygaaga ee qiimaynada gobolka oo dhan waana muhiim maadaama ay u ogolaanayso dugsigaaga iyo degmadaada inay hubiyaan dhammaan ardayda inay helaan waxbarasho tayo sare leh. ardayda hore ee naafada ah iyo kuwa Ingiriisiga barta inta badan waa laga saaray qiimaynaha gobolka oo dhan. Marka dhammaan ardaydu ay ka qeyb qaataan qiimaynaha gobolka oo dhan, dugsiyada iyo barayaasha waxay helayaan macluumaad dheeraad ah si ay u arkaan sida ardayda oo dhan ay yihiin. Tani waxay ka caawisaa dugsiyada inay horumariyaan waxbarashada ay bixiyaan iyo aqoonsadaan kooxaha, darajooyinka, ama maadooyinka laga yaabo inay u baahan yihiin taageero dheeraad ah.

## Qiimayntu waxay ku xidhan tahay heerarka

Qiimaynta gobolka oo dhan waxay ku salaysan tahay Minnesota Academic Standards ama WIDA English Language Development Standards. Heerarkan kala duwan ayaa qeexaya aqoonta iyo xirfadaha ardayga ay tahay inay wax ku bartaan degmooyinka K-12 iyo dugsiyada. Minnesota waxay mudnaan siisaa waxbarasho tayo sare leh iyo macaliminta qiimaynta gobolka oo dhan iyo hogaamiyayaasha fursad ay ku qiimeeyaan guusha ardayga iyo dugsiga.

**Qiimaynta Dhan ee Minnesota (MCA)**

MCA iyo imtixaanada kale (Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Waxbarashada (MTAS)/MCA Alternate ah) ayaa ah qiimaynta sanadlaha ah ee akhriska, xisaabta iyo sayniska ee bixiya sawirka ardayga ee Heerarka Waxbarasho ee Minnesota K-12.

**WIDA ACCESS iyo WIDA ACCESS Alternate ah ee Bartayaasha Ingiriisiga**

WIDA ACCESS iyo WIDA Alternate ACCESS waa qiimaynta sanadlaha ah ee bartayaasha Ingiriisiga kuwaas oo bixiya macluumaadka ku saabsan horumarkooda xagga barashada Ingiriisiga tacliinta, iyadoo lagu saleynayo Heerarka Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee WIDA.

## Qiimaynta Gobolka oo dhan waxay caawisaa qoysaska iyo ardayda

Ka qayb-qaadashada qiimaynaha gobolka oo dhan waxay ka wuxuu qoysas siiyaa inay arkaan sawirka waxbarashada ardaygooda si ay ugu doodaan guushooda dugsiga. Ardayda dugsiga sare waxayna isticmaali karaan natiijooyinka waayo MCA:

- Ikhtiyaarada Diiwaangelinta Dugsiga Sare Kadib (PSEO)u qalmitaanka diwaangalinta ee fasalka 10.
- Ku meelaynta koorsada kulliyadda ama jaamacadda Gobolka Minnesota. Haddii ardaydu helaan buundada u diyaarsan kulliyadda, waxa laga yaabaa in aanay u baahnayn inay qaataan koorsada hagaajinta, ee maaddadaas.

Bartayaasha Ingiriisiga ee qaata WIDA ACCESS ama WIDA Alternate ACCESS oo buuxiya shuruudaha qaarkood, waxay haystaan fursad ay kaga baxaan adeegyada EL.

## Qaadashada Qiimaynta Gobolka oo dhan waxay caawisaa Dugsiga Ardaygaaga

Qiimaynta gobolka oo dhan waxay siisaa macluumaadka ku saabsan dugsigaaga iyo degmadaada sida dhammaan ardaydu ula falgalayaan nuxurka ay ku bartaan dugsiga. Macluumaadkani waxa uu caawinayaa:

- Barayaashu waxay qiimeeyaan agabkooda waxbarasho.
- Dugsiyada iyo degmooyinku waxay aqoonsadaan sinnaan la'aanta kooxaha dhexdooda, waxay sahamiyaan sababaha asaasiga ah waxayna hirgeliyaan taageerooyin.
- Hogaamiyayaasha dugsiyada iyo degmadu waxay gaadhaan go'aano ku saabsan sida loo isticmaalo lacagta iyo agabka si ay u taageeraan dhammaan ardayda.

## Ka-qaybgalka Ardayga ee Qiimaynta Gobolka oo dhan

Ka-qaybgalka ardayga ee qiimaynaha gobolka iyo deegaanka looga baahan yahay waa doorashada waalidka/masuulka. Haddii aad doorato in ardaygaagu aanu ka qayb galin qiimaynta gobolka oo dhan, fadlan ku bixi sababta go'aankaaga bogga soo socda hoose. La xidhiidh dugsiga ardaygaaga si aad wax badan uga ogaato qiimaynaha deegaanka looga baahan yahay.

## Cawaaqibka Ka-qaybgal La'aanta Qiimaynta Gobolka oo dhan

- Ardaygu ma heli doono dhibco gaar ah. Wixii WIDA ACCESS iyo WIDA ACCESS Alternate ah, ardaygu ma heli doono fursad uu kaga baxo adeegyada EL.
- Natiijooyinka qiimaynta dugsiga iyo degmadu waxay noqon doonaan kuwo aan dhammaystirnayn, taasoo ka dhigaysa mid aad u adag in sawir sax ah laga helo waxbarashada ardayga.
- Xisaabinta qiimeynta gobolka oo dhan waxaa ku jira dhammaan ardayda u qalma, oo ay ku jiraan kuwa aan ka qeyb qaadan. Ka qaybgal la'aantu waxay saameyn ku yeelataa natiijooyinka la xisaabtanka, taas oo waxay saameyn kartaa awooda dugsiga lagu aqoonsan karo taageerada ama loo aqoonsado guusha.

Ka hubi dugsiga ama degmadaada si aad u aragto haddii ay jiraan wax cawaaqib xumo dheeraad ah oo ka qaybqaadasho la'aanta.

Sahri Statewide Testing pagewixii macluumaad dheeraad ah.

(education.mn.gov > Students and Families > Programs and Initiatives > Statewide Testing)

### xog dheeraad ah

- Celcelis ahaan, ardaydu waxay ku qaataan wax ka yar 1% wakhtiga waxbarashada qaadashada qiimaynaha gobolka oo dhan sannad kasta.
- Xeerarka Minnesota ayaa xaddidaya wadarta wakhtiga ardaydu ku qaadan karaan imtixaanada degmada ama dugsiga oo dhan ilaa 11 saacadood ama ka yar sanad dugsiyeedka, iyadoo ku xidhan darajada.
- Degmooyinka dugsiyada waxa looga baahan yahay inay ku daabacaan jadwalka qiimaynta mareegaha ay ku leeyihiin marka la gaaro Oktoobar 1 sannad dugsiyeedka. Ka eeg bogga dugsiga degmadaada ama waaxda xogta ee dugsiga wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta.

---

## Qiimaynta Gobolka oo dhan: Go'aanka Waalidka/Masuulka ee ah in aanu ka qayb galin

Markaad buuxiso foomkan, waxaad qiraysaa in ilmahaagu aanu ka qayb qaadan doonin qiimaynaha gobolka oo dhan uunu heli doonin natiijooyinka qiimaynta shaqsiga ah. **Foomkan waa in loo gudbiyaa dugsiga ama xafiiska degmada ka hor inta aan la qaadin imtixaanka**.

Magaca hore: ____ Magaca Abaha ____ Magaca Awowga: ____

Taariikhda Dhalashada: ____ Fasalka Hadda Dugsiga: ____

Lambarka Aqoonsiga Ardayga (haddii la garanayo): ____

Dugsiga: ____ Degmo: ____ Magaca Waalidka/Masuulka (daabac): ____

Saxeexa Waalidka/Masuulka: ____ Taariikhda: ____

Sababta Diidmada\loo diiday ____

**Fadlan sheeg qiimaynta gobolka oo dhan Ardaygaaga ka qaybqaadan mayo:**

- ☐ MCA/Alternate MCA Akhriska
- ☐ MCA/Alternate MCA Sayniska
- ☐ MCA/MTAS Xisaab
- ☐ WIDA ACCESS/WIDA Alternate ACCESS

La xidhiidh dugsigaaga ama degmadaada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan go'aamada kaqeybgalida sida looga baxo qiimaynaha deegaanka.

(Fiiro gaar ah: Foomkan waxa kaliya oo lagu dabaqi karaa 20____ilaa 20____sanad dugsiyeedka.)